**Sharciga L. 76 ee 7 Disember 1972**

**Sharciga Caymiska Khasabka ah ee ka Yimaada Shilalka Shaqada iyo Cudurrada Shaqaalaha**

## CINWAANKA 1AAD
Hawlaha la Ilaaliyo

### Qod. 1
### Shaqooyinka lagu Sameeyo Warshadaha, Shaybaarrada, ama Deegaan loo Habeeyay

Waa khasab caymiska shilalka ee dadka (10-11) ee xaaladaha ku xusan sharcigan, waxayna xaalad kasta ee sharcigan uu tilmaamayo, ha noqdaan kuwo ku shuqlan xafiisyada, shaybaarada iyo degaannada ama bii'adaha u abaabulan shaqada, hawlaha, adeegyada, kuwaas oo ku lug leh isticmaalka mashiinnada aan toos u dhaqaaqeynin in qofka isticmaala iyaga uu dhaqajiyo mooye, qalabka cadaadiska, qalabka korontada ama qalabka wax kululeeyo.

Dadka ku xusan faqradda hore waxaa loo tixgeliyaa in ay waajib tahay in la caymiyo xataa haddii uu loo shaqeeyuhu ku buuxiyo ama geliyo hawl wax dhameestireyso ama kabeyso oo la qabanaayo iyada oo aan la isticmaaleynin mashiin ama lagu qabanayo goobo kale oo ka duwan goobta lagu qabto hawsha ugu muhimsan.

### Qod. 2
### Shaqooyinka lagu Sameeyo Mashiin, Qalab ama Aalad Gaar ah

Marka mashiinnada, qalabyada iyo aladaha ku xusan faqradda hore lagu isticmaalo, si kala goonni goonni ah, meelo ka baxsan warshadaha, shaybaarrada, degaannaada shaqada habeysan, waa khasab in la caymiyo dhammaan dadka ku sugan xaaladaha ku tilmaaman sharcigan, ee isticmaalo aaladaha, qalabyada, mashiinka la soo sheegay ee ku xusan faqradda hore oo loogu talo galay in shaqaaluhu ay ku qabtaan shaqadooda, bishardi, marka la eego xaaladaha mashiinnada, ma ahan kuwo si toos ah u dhaqaaqo ee ay tahay oo keliya kuwo uu dhaqaajiyo qofka isticmaalayo.

Waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay shaqaale u qaybsan mashiin, qalab, ama aalad, qof kasta oo qabto hawlo ku xiran had iyo jeer khatar shil toos ah ay u dhaliyaan mashiinnada, aaladaha iyo qalabyada laftooda.

### Qod. 3
### Isticmaalka Mashiinnada Sida ku Meel Gaarka ah

Waxaa soo gelayo o kale waajibaadka caymiska xaaladaha mashiinnada, qalabyada iyo aaladaha ku tilmaanan qodobbada hore:

1) in si kumeel gaar ah loo isticmaalo;

2) waxba kama taraan in si toos ah loogu adeegsado howlaha la xiriira warshadaha, shaybaarrada, goobaha u habeysan oo ay ku rakiban yihiin;

3) waxaa isticmaalayo shaqaalaha ka shaqeeya iibka si ay ugu sameeyaan tijaabo badeecadda, bandhig muuqdo ama tijaabo.

### Qod. 4
### Hawlaha Kaloo la Ilaaliyay

Marka tusaale ahaan aysan jirin qodobbada aan soo dhaafnay, caymiska waa ku khasab dadka ku hoos jira xaaladadaha ku xusan sharcigan xataa haddii loo shaqeeyuhu ay uga shaqeynayaan shuqullada dhammeystiraayo howsha ugu weyn, oo ku lug leh shaqada:

1) dhismaha, dayactirka, hagaajinta, burburinta hawlaha dhismaha oo ay ku jiraan jidadka, dhuumaha biyaha iyo guud ahaan shaqooyinka dadweynaha ama hawlaha guud; hagaajinta, nadiifinta, qurxinta, dib u habeynta isla hawlaha, sameynta curiye la xiriiro aqal

ama wax kale oo dhismahooda horey loo diyaariyay oo leysku rakibayo si loogu sameeyo hawlo dhismo iyo weliba hawlaha la xiriiro jidadka, rusheynta, jaridda geedaha iyo harameyntooda;

2) Rakabidda, dayactirka, hagaajinta, wax ka beddelka, ka saaridda aalad gudaha ama dibadda dhismayaasha; furfuridda, xirxiridda, dayactirka, hagaajinta, baaritaanka baabuurta, qalabka, dhismooyinka ee ku xusan qodobbada hore ee 1 iyo 2;

3) Fulin, dayactir, sameyn hawlo ama dhisme ee aaladaha loogu talo galay hagaajinta biyaha, xataa sidoo kale in la hagaajiyo iyo in laga sameeyo dhul beereed oo kanaallo dhuumo dareere ah leh, in la buuxiyo ama farsamo ahaan la qalajiyo si loo hagaajiyo meelaha kharriban, iyo sidoo kale kala-soocidda qulqulka biyaha oo ay ku jiraan hawlaha dayactirka iyo ka jaridda dhirta dhinacyada kanaallada;

4) Qodaal hawada u furan ama dhulka hoostiisa; shaqooyin oo nooc kasta leh oo lagu fuliyo ayada oo la isticmaalayo miino;

5) dhismo, dayactir, hagajin ama sameyn jid tareen, xarig koronto oo bas ku socdo iyo wiishashka oo ku socdo xargo oo iskaga goosho qorarka;

6) waxsoosaarka ama soo bixinta, bedelidda, keydinta, baabi'inta gaaska, biyaha, quwadda korontada, oo ay ku jiraan kuwa la xiriiro goobaha taararka iyo raajada, telefoonnada iyo raadiyeyaasha, dhismaha, hagaajinta, dayactirka iyo qaadista dhuumaha biyaha, habeynta, ayactirka iyo qaadista usha caaradda fiiqan leh oo loo isticmaalo celinta biriqda;

7) xamaalista badeecada iyo dadweynaha ee dhulka, marka la isticmaalayo baabuur ama xoolo;

8) istismaalista maqaasiino iyo meelaha lagu keydiyo badeecadaha iyo qalabyada;

9) rarista iyo dejibta;

10) maamulista hangarrada lagu xafido baaburta birrijooga ah, gaadiidka badda ama hawada, iyo sidoo kale meelaha ay baabuurta fariistaan oo xataa u furan qalabyada makaanikada ah;

11) gagooyinka dayuuradaha, saldhigyada ay fariistaan ama ay ka duulaan dayaaradaha ka duula biyaha dushooda iyo wixii la mid ah, oo ay ku jirto hoosooyinka wax lagu hagaajiyo, marka laga saaro khatarta duulista;

12) badmaaxista badaha iyo webiyada iyo kaluumeysiga maraakiibta leh warqadaha markabka ama doonyaha, ama doonyaha dulsabeeyo biyaha oo ku shaqeeyo mashiinnada awooddoodu ka sareyso 12 faras, iyo sidoo kale kalluumeysiga loo isticmaalo isbuunyo, qar, luul, 'trocas', cambar, tebediin iyo nooc kasta ee mallaay oo ujeedooyinka warshadaha leh;

13) waxsoosaar, dhaqaaleyn, hawlgelin ama xamaalid walxo ama walxaha qarxa, holco, shidmi og, sun leh, burburiyo, wax gubo, shucaac leh, iyo sidoo kale shaqooyinka la xiriiro goobaha loogu talo galay in wax lagu keydiyo ama in lagu gado walxahaas ama dalagayadas; waxaa loo ictibaaraa walxo ama wax shidmi karo walxaha leh heer shidmid oo ka hooseeyo 125 C iyo, xaalad kastaba, shidaalka ceyriin iyo saliidda macdanta ah ee lagu dufniyo biraha.

14) goynta, dhimista dhirta, xamaalistooda;

15) dhismooyinka la xiriira sancada macdanta iyo makaanikada oo ay ku jiraan birshubidda iyo hoosooyinka;

16) magdeynta hargaha, kawaannada, dukaannada hilibka;

17) quraaradaha iyo warshadaha dhoobada;

18) godmacdan, kaawada, dhoobada qoyan iyo cusbooleyda, oo ay ku jiraan xanaaneyntooda iyo ka shaqeynta walxooyinka la soo saaray, xataa haddii lagu fulinaayo meelaha lagu keydiiyo;

19) waxsoosaarka shameentada, nuuradda, jeessada iyo jaajuurka;

20) dhismo, burburin, hagajinta maraakiibta iyo doonyaha, iyo sidoo kale hawlaha dib u helidda iyaga iyo xamuulkoodaba;

21) deminta dabka;
22) adeegyada samatabixinta;
23) adeegyada ilaalinta gaarka ah;
24) adeegyada hawlaha nadaafadda;
25) xannaaneynta gaarka ah ee duurjoogta guurguurto, soosaarka, xannaaneynta iyo difaacidda xayawaanka, oo ay ku jiraan hawlaha beeraha qaranka, meelaha gaarka u ah ugaarsiga, jardiinooyinka xayawaannada iyo meelaha lagu hayo kalluunka yar yar;
26) sameynta xirfadaha la xiriiro ugaarsiga;
27) habeynta, tijaabinta ama dhigista filimmada, habeynta ama maamulista beeraha maaweellada, marka laga saaro dadka u qaybsan adeegyada hoolalka shiinemooyinka iyo golaha madadaallada;
28) qabashada waayo-aragnimo iyo laylis wax ku ool ah ee xaaladaha ku xusan lambarka 5 ee qod. 10.

**Qod. 5**
**Shaqada Guriga**

Waajibaadka caymiska ee lagu caddeeyay magacan ma jiri karaan oo keliya xaaladaha hawlaha shaqo ee loogu talagalay ujeedooyinka guriga (126, nambar 3 Xeerka Shaqada), marka laga reebo shaqooyinka shaqaalaha sida gaarka ah loo qaatay in ay wadaan gaadiidka uu qoyska isticmaalo ama gaarka ah.

## CINWAANKA 2AAD
Ujeeddada Caymiska

**Qod. 6**
**Fikradda Sharciga ah ee Shilalka Shaqada**

Caymiska waxaa soo gelayo dhammaan xaaladaha shilalka ku yimaado sabab rabsho leh inta lagu guda jiro shaqo, taas oo ay ka dhalato dhimasho ama dhaawac joogto ah Oo buuxo ama qayb ahaan ee shaqada, ama dhaawac ku meel gaar ah oo buuxo keeni karana in qofka shaqaalaha ah uu shaqada ka istaago muddo labo maalmood ka badan (68).

Sabab rabsho, sida faqradda hore ku cad, waxaa loola jeedaa fal dibadeed, oo marka uu la sameeyo xiriir jirka qofka baniaadamka ah, sababo qallooc ama isbeddel kaamilnimada jirka ama maskaxka qofka wax loo dhimay.

Marka la qaabeynayo shilalka la magdhabi karo, fursada shaqada ee ku xusan faqradda koowaad, waxay rumoobi kartaa oo keliya marka khatarta dhaawaca uu ka dhashay ay tahay mid ku timid shaqada uu diyaariyay qandaraaslaha ama fikrad ka timid shaqaalaha sida wafaqsan danta shirkadda uu ka tirsan yahay.

Sida waafaqsan Xeerkan, waxaa loo ictibaari karaa shil shaqo, sida caabuqa kasoobax ama fin. Kama mid noqonayo, xaaladahan dhaawacyada shilalka shaqo, dhacdada khatarta ah oo ka dhalato caabuqa cudurrada la xiriiro duumada ama kaneecada. Waxaa sidaas si la mid ah loo ictibaari karaa shil, sheelo calooleedka, haddii aanay ka dhalan sheelo calooleedka tallaabo makaaniko ama farsamo ee dibadda ah nabar aan kala go’ lahayn oo soo gaaray qaybta caloosha.

**Qod. 7**
**Xaaladda ku Saabsan Magdhawga Shilalka ku Yimaado Kallifaadka**

Si loo magdhawo shilka ku yimaado cadaadis ama kallifaad, shardiga looga baahan yahay sababta rabshada, waxaa loo ictibaaraa mid soo noqnoqotay marka keliya oo nabarku uu yahay mid ka yimid adeegsasho kedis ah, lama filaan ah, iyo muruq iyo xoog xad dhaaf ah oo ka badan intii loo baahnaa in loo adeegsado shaqada caadiga ah.

## Qod. 8
## Shilalka Waddooyinka

Khatarta socodka baabuurta oo ay sababaan shilalka waddooyinka ama dhacdooyinka ku dhici karo ama ku keeni karo khasaro Shaqaalaha markuuu ka soo tago gurigiisa, kuna jeedo goobta shaqada ama dhinaca kale markuu ka soo tago shaqad kuna sii jeedo gurigiisa waa khatar guud oo masuuliyaddeedu isku si' u saameyneyso shaqaalaha iyo muwaadin kaloo kasta, sidaas darteedna laguma daraayo khatarrada sharcigan uu dhowrayo, marka laga reebo xaaladaha isla shaqada nafteeda ay ka qayb qaadato ayna keento in ay ka dhigto isla khatarta mid aad ugu culus qofka shaqaalaha iyo qof kastoo kale.

## Qod. 9
## Fikradda Cudurrada Shaqaalaha

Ceymisku waa khasab cudurrada ku dhaco shaqaalaha ee ku tilmaaman shaxda n.3, kuwaas oo qandaraasleeyda ay kula heshiinayaan shaqaalaha sameynta iyo farsamooyinka lagu sheegay isla shaxda lafteeda, farsamooyinkaas waxay noqonayaan kuwa ka mid ah kuwa ku xiran waajibaadka caymiska ee khasabka ay tahay in shaqaalaha laga caymiyo shilalka shaqada.

Shaxda aan soo sheegnay waxaa wax looga beddeli karaa ama dhammeystiri karaa Dekreeto Madaxweynaha Golaha Sare kadib markuu tixgeliyo soo jeedinta Xoghayaha Dawladda ee Caafimaadka, garwaaqsanaada Xoghayaha Dawladda ee Shaqada iyo Sboortiga, dhageestana talada Shirkadda Caymiska Bulshada ee Soomaaliya (Cassa per le Assicurazioni Sociali della Somalia) oo wixii hadda ka dambeeyo loogu yeeri doono "LA CASSA".
Cudurrada shaqada maadaama sharcigan uusan qodobbo cad ku sheegeyn waxaa lagu dabaqayaa qodobbada la xiriiro shilalka (119).

# CINWAANKA 3AAD
Dadka la Cayminayo

## Qod. 10
## Dadka la Cayminayo

Dadka la cayminayo waxaa ka mid ah:

1) dadka sida joogtada ama ku meelgaarka ah u qabanayo, ayaga oo ku hoos jiro kuna shaqeynaayo amarka dad kale, hawl gacmeed lagu mushahar siinaayo, qaab kasta ha noqdo mushaharkooda (71 Xeerka shaqada);
2) dadka, iyaga oo ku jiro xaaladaha lagu tilmaamay lambarka 1aad, xitaa iyaga oo aan ka qayb galeynin shaqada, kormeerayo shaqada dad kale;
3) Maamulayaasha farsamada ee leh hawlaha maaraynta, kontroolka, dhab u hirgelinta waxqabadka hawlaha la caymiyay;
4) farsamo-baradyaasha leh ama aan laheyn mushaharka (58 xeerka shaqada). Waxaa loo tixgelinayaa farsamobarad ahan, sida waafaqsan ujeeddooyinka sharcigan, kaliya kuwa da'doodu ay ka yar tahay siddeed iyo toban sano[1], rasmi ahaan looga faa'iideysto sida farsamo-barad ahaan;
5) macallimiinta iyo ardayda ka qeyb galeyso koorsooyin tabobar ama dib u tababarid koorsooyin xirfadeed ama tababar xirfadeed ee shirkadaha iyo sidoo kale qabanqaabiyeyaasha, adeegayaasha iyo dadka mas'uulka ka ah khibradda iyo laylinta farsamo-camali ah ama shaqo;
6) ninka, carruurta, xitaa kuwa dabiiciga ah (60 St. pers.) ama la korsaday (114 St. Pers.),

[1] Qodobka 59aad ee Xeerka Shaqaalaha ayaa dhigaya in dhalinyarada da'doodu ka yar tahay shan iyo toban iyo in ka badan soddon aan ka badnayn loo shaqaalaysin karo tababar.

qaraabo kale (34-36 cc) ama la xidid ah (37 cc), iyo ilmo uu korsaday ama lagu aaminay shaqo bixiyaha, mushahaar leh ama aan mushahar ahayn ayaga oo qabanayo shaqo gacmeed ama mid aan ahayn iyaga oo isaga ku xiran, sida waafaqsan xaaladaha ku xusan lambarka 2 iyo 3 ee qodobkan;

7) shuraakada iskaashatada iyo nooc kasta oo shirkad, xataa ayadoo aan sharci ahayn la iska magacaabay, la dhisay ama ka shaqeynayso hawl gacmeed ama hawl aan ahayn hawl gacmeed, sida waafaqsan xaaladaha ku qoran lambarrada hore ee 2 iyo 3.

Waxaa loo ictibaarayaa in ay ku jiraan caymiska, sida waafaqsan nambarka hore ee 1, dadka, ayaga oo ku hoos
shaqeynaayo kana amar qaadanayo dad kale, baahida shaqada ama xiriirka qoyska awgeed kuna leh, guri degaan oo ku yaallo meelaha shaqada lagu qabanayo.

**Qod. 11**
**Shaqaalaha Badda**

Marka la eego badmaaxidda iyo kalluumeysiga, waxaa lagu daraa caymiska xubnaha shaqaalaha, si kastaba ha ahaatee, oo laga siiyo musharkooda maraakiibta, doonyaha ama doonyaha sabbeeyo sida ku cad lambarka 12 ee qodobka 4, xataa haddii hadafkoodu uu yahay in ay ku shaqeeyaan doonyaha lagu tamashleeyo.

Waxaa loo ictibaarayaa sida shaqaale ka tirsan markabka, doonyaha, ama doonyaha sabbeeyo, dhammaan kuwa sida joogtada ah ugu qoran kaalinta shaqaalaha ama u soo fuulay markabka shaqo (104 Xeerka Badda).

Kaalinta doorka shaqaalaha iyo mushahar bixinta, markaad isticmaasho, waxaa lagu haynaa buugaagta diiwaangelinta markabka, waxaana loo ictibaarayaa in ay ka mid yihiin shaqaalaha dadka ku qoran shatiga iyo dhammaan waxayaahaba kale ee ku cad buugaagta diiwaangelinta iyo mushahaarooyinka ee ku xusan qodobka soo socdo ee 29.

Maraakiibta aan haysanin warqadaha markabka, waxaa loo ictibaarayaa shqaalaha markabka dadka ku qoran shatiga iyo dhammaan kuwa kale ee lagu muujiyay liiska diiwaangelinta iyo buugta mushaharka ee ku tilmaaman qod. 29 iyo in maraakiibtaas uu u hayo warqadahaas loo shaqeeyaha.

Xoghayaha Dawladda ee Caafimaadka markuu la oggolaaday Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Gaadiidka, dhageystayna Shirkadda Ceysmiska, wuxuu oggolaan karaa ka-noqoshada amarrada ku xusan qodobbada 29 iyo 33 ee ku saabsan sameynta, haynta iyo ilaalinta buugagta diiwangelinta iyo mushaharooyinka.

## CINWAANKA 4AAD
## Loo-shaqeeyaha

### Cutubka 1aad
Dadka la Caymiyay

**Qod. 12**
**Fikradda loo-shaqeeyaha Kooxda**

Loo shaqeeyeyaasha ee hoos imaanayo qodobbada sharcigan waa dadka iyo hey’adaha gaarka ah ama hey’adaha guud, oo ay ku jiraan Dawladda iyo Wakaaladaha maxalliga ah , oo marka ay qabanayaan shaqooyinka ku xusan magaca koowaad ee sharcigan waxaa buuxin karo dad sida kuwa lagu tilmaaamay magaca seddexaad.

Sida waafaqsan ujeeddada xeerkan, waxaa kaloo loo tixgelin karaa loo shaqeeyeyaal:

— Shirkadaha iskaashatada iyo nooc kasta oo kale ee shirkad (50-504 cc), xataa haddii

dhab ahaantii aan lagu dhisin sharci, si kastaba ha ahaatee, magacaabeen, dhiseen gebi ahaan ama qayb ahaan loo shaqeeyaasha, marka loo fiiriyo xubnohooda shirkadda ee u qaabilsan shaqooyinka sida siyaabaha ku xusan qod. 10 lambarka 7;

— Shirkadaha dekedaha, xagga xubnahooda u gaarka ah ee oo loo isticmaalo rarista iyo dejinta, wareejinta, kaydinta iyo dhaqdhaqaaqa guud ee alaabta iyo qalabka;

— Gaadiidka xamaaliga ah iyo nooc kasta oo la mid ah ee shaqaale isku dhaf ah, marka loo eego dhinacyada ay ka kooban yihiin;

— Milkiilaha markabka, doonyaha, iyo doonyaha sabbeeyo ama kuwa qaanuunku sidaas oo kale uu u arko, marka loo eego kuwa ku lugta leh badmaaxidda iyo kalluumaysiga badda (104 Xeerka Badda);

— Dugsiyada iyo hey'adaha nooc kasta iyo darajo kastaba leh, xataa haddii ay yihiin kuwo gaarka ah ama kuwo maamulo koorsooyin tabobar ama dib u tababarid koorsooyin xirfadeed ama tababar xirfadeed ee xataa shirkadaha, marka loo eego dadka iyo xaduudka ee ku cad qodobka 10 n.5;

— Qandaraaslayaasha (585 cc) iyo kuwa la siiyo shaqooyinka, hawlaha iyo adeegyada; xataa haddii ay u fulinayaan iyaga oo ka wakiil ka ah Dawladda, hey'adaha maxalliga ah ama hay'ado kale ee dawladeed;

— Muwaadiniinta caadiga ah ama hay'adaha oo sida tooska ah ugu hawlan, magacoodana ku qabanayo, ayaga oon ahayn kuwo leh hadaf faa'iido, dadka looga baahan yahay in ay hoos tagaan caymiska, wax kastoy tiradoodu tahayba, si loo fuliyo shaqooyinka ka midka ah kuwa ku xusan cinwaanka koowaad.

Waxaa lagu tiriyaa in ay yihiin loo shaqeeyayaal marka loo eego dadka u qaybsan ku shaqeynta mashiinnada, qalabyada, ama aaladaha ku xusan qodobka 2, dadka, sida qandaraaslayaasha ama dadka gaarka ah,oo socodsiiyo mashiinnada, qalabka ama alaabta ama ka shaqeysiinaayo dad iyaga ay u xilsaareen.

**Qod. 13**

**Dhexdhexaadiyeyaasha iyo soo Dhexgaleyaasha Muruqmaalka**

Sida waafaqsan ujeeddada sharcigan, waxaa loo tixgeliyaa shaqaalaha ku hoos shaqeeyo loo shaqeeyaha oo dhab ahaantii uu si run ah uu u isticmaalo wax qabadkooda:

1) shaqaalaha loo qaatay shaqooyinka mushaharna ay ku siiyaan, si loogu fuliyo oo keliya wax aan ka badnayn shaqo, qandaraaslayaasha, shirkadaha iskaashatada ama shirkadaha gaarka loo leeyahay, kuwaasoo fulintoodu lagula galay qandaraas ama qandaraas hoosaad (45/3 Cod Lav.), ama qaab kastoo kale ee heshiis ee lala galay loo-shaqeeyeyaal sida ku cad qod.12,waxaa loola jeedaa qandaraas shaqo wax aan ka badneen qaab kastoo qandaraas ama qandaraas hoosaad oo ku saabsan hirgelinta hawlo ama adeegyo oo qandaraasluhu uu adeegsanaayo xataa qayb keliya, laakiin ilaa xad badan, raasumaal, ama mashiinno ama qalab uu bixiyay qandaraaslaha xataa haddii, si loo isticmaalo, loogu beddelaayo qandaraaslaha ijaar u dhigmo;

2) Shaqaalaha ay qaataan mushaharkoodana ay bixiyaan dhexdhexaadiyeyaal si ay u fuliyaan shaqooyin ama adeegyo shaqo ee loo-shaqeeyeyaasha ay ku siinayaan lacag u dhiganto hadba inta hawl ay u xilsaareen isla dhexdhexaadiyeyaasha ee lagu xusay qodobka 12aad, ha noqdeen shaqaale ayaga ku tiirsan ama ku tiirsan dad saddexaad ama shirkad xitaa iskaashato.

**Qod. 14**

**Mas'uuliyad Wadareedka Qandaraas Bixiyaha iyo Qandaraas Qaataha**

Loo-shaqeeyeyaasha qandaraas ku bixiyo shaqo ama adeegyo lagu dhex sameynaayo gudaha shirkadda hadba ayada oo loo marayo nidaamka gaarka ah iyo

maaraynta shirkadda qandaraaska la siiyay, waxayna si wadajir ah ula wadaagayaan loo shaqeeyeyaasha mas'uuliyadda qandaraaslahan dambe wax kasta oo u waajibay shirkadda caymiska sida abaalgudka caymiska ee shaqooyinka lagula heshiiyay iyo faa'iidada khuseyso iyo lacagaha dheeraadka ah ee la xiriiro ciqaabta, shaqooyinka lagu bixiyay tartan qandaraas, marka laga reebo xaqa uu u leeyahay qofka qandaraaska la siiyay in uu iska diido xaqa uu ku leeyahay qandaraaslaha.

## Cutubka 2aad

Mas'uuliyadda Madaniga iyo Tabooyinka looga Hortagaayo

### Qod. 15
### Mas'uuliyadda Madaniga ee Looshaqeeyaha

Caymisku, sida waafaqsan sharcigan, wuxuu ka reebayaa loo-shaqeeyaha masuuliyadda madaniga ah ee shilalka shaqada (49 n 2 Xeerka shaqada).
Inkasta caymiska aan kor ku soo sheegnay, waa ay negaaneyso mas'uuliyadda madaniga ah ee loo shaqeeyaha oo ka keentay xukunka ciqaabeed ee xaqiiqdii falka shilka uu ka yimid.

Sidaa daraaddeed, sidoo kale, mas'uuliyadda madaniga ah ee loo shaqeeyaha marka xukunka ciqaabtu uu dhigayo in shilku uu ku dhacay fal lagu eedeyn karo shaqaalihiisa, haddii falkoodaas uu yahay mid loo shaqeeyeyaasha ay tahay in ay ka jawaabaan sida waafaqsan shuruucda xeerka madaniga ah (171 x.c.).
Qodobbada ka mid ka ah labada faqradood ee hore ma la isticmaalayo marka, si loo ciqaabo falka shilku uu ka yimid, ay lagama maarmaan ahayd in uu cabasho ka
gudbisto qofka la xumeeyay (81 x.c.; 21 x.h.c.)

Haddii lagu dhawaaqay xukun ah in aan dacwada la sii wadi karin dhimashada eedeeysanaha awgeed (274 CPI), ama cafis (144 x.c.) ama baabi'iid (73 x.h.c.),
garsooraha madaniga ah, ka dib codsi ka yimid qofka dhaawacmay ama kuwa ka badbaaday, ama shirkadda caymiska ay u soo jeedisay saddexda sano gudahood maalinta xukunka la gaaryay, wuu go'aaminayaa, haddii falka dembiga uu ka dhashay ay jirto masuuliyad madani ah, sida waafaqsan faqradaha labaad, saddexaad iyo afaraad ee qodobkan.

Magdhaw looma sameeyo sida qaanuunka caamka ah uu qabo, haddii uu garsooruhu aqoonsado in qaanuunkan uusan kor u qaadeynin lacag ka badan tan gunnada shilka ah ee ay bixisay shirkadda caymiska.
Sida waafaqsan faqradaha lixaad iyo toddobaad ee hore, gunnada shilka waxaa matalayo qiimaha raasumaalka ee dakhliga la xaraashay, ayada oo lagu xisaabinayo sida wafaqsan shaxda lifaaqa ah ee No. 5 oo ku saabsan horgalaha la xiriira qiimaha raasumaalka dhabta ah ee dakhliga naafanimo iyo geeri.

### Qod. 16
### Xaquuqda Diidmada iyo Baddelka

Shirkadda ceymiska waa in ay bixisaa gunnada xataa xaaladaha ku xusan qodobka hore, marka laga reebo xaqa uu u leeyahay in uu diido dhammaan gunnada iyo dhammaan gunnadaha iyo jeegagga la bixiyay oo uu ku jiro dakhliga soo galo oo qayb qayb ah, kharajka caafimaadka, difaaca, garsoorka iyo waxa soo raaco, iyo weliba faa'idada dulsaaran lacagaha aan kor ku soo sheegnay, ee liddiga ku ah dadka madani ahaan masuulka ah (171 x. m).

Qofka maadani ahaan masuulka ah waa in sidoo kale uu u shubo shirkadda ceymiska qaddar lacageed oo u dhiganto qiimaha raasumaalka ee dakhliga dheeraadka ah ee waajibay, oo lagu xisaabiyay iyadoo la raacayo shaxda ku cad faqrada dambe ee qodobka.

Xukunka ciqaabta ah ee xaqiijinayo gundhigga masuuliyadda madaniga ah ee loo-shaqeeyaha oo lagu caddeeyay faqradaha labaad iyo seddexaad ee qod 15 ama xukunka madaniga ah ee lagu gaaray sida waafaqsan faqradda shanaad ee isla qodobka, waa ay ku

filan tahay in shirkadda ceymiska ay ku yeelato deyn qofka madani ahaanta masuulka ka ah dhamaan lacagaha lagu caddeeyey faqradda hore.

Shirkaddu waxay kaloo ku isticmaali kartaa isla tallaabooyinka diidmada qofka dhaawacmay marka shilku uu ku dhacay qaab ula kac ah ee isla qofka uu ku kacay taasoo lagu cadeeyay xukun ciqaabeed.

Cadeyntan waa in loo soo uruuriyo qaabka uu caddeeyay xeerka habka madaniga ah, marka lagu dhawaaqo Xukunka in aan la sii wadin dacwada geerida uu geeriyooday eedeysanaha ama cafis awgeed.

Qodobbada gaarka ah ee kor ku xusan ma khuseeyaan marka, xaqiiqdii sababta shilka uu ka yimid, ay soo noqnoqoto masuuliyadda madaniga ah ee qof aan ku jirin kuwa ku tilmaaman faqradaha labaad iyo tan sadexaad ee qodobka 15aad. Xaaladahan waxaa la raacayaa nidaamka guud ee ku jira xeerka madaniga ah.

Xaaladaha ku xusan faqradda hore, wadaxaajoodka uu dhaawacanaha la gaaray qofka saddexaad oo mas'uulka ah iyo magdhawga uu qofkan magdhabay, waxay ka xureyneysaa shirkadda caymiska bixinta magdhawga shilka, ugu yaraan ilaa inta qadarka wadarta lacag ee uu bixiyay qofka masuulka ah.

## Qod. 17
## Tallaabooyinka ka Hortagidda iyo Ammaanka Farsamo iyo ka Hortag ee Shilalka Shaqada iyo Cudurrada Shaqada

Kuwa khasabka ku ah caymiska waa in ay u adeegsadaan hababka iyo qaababka loo fulinayo shaqooyinkaas oo marka loo eego adeegsashada muruqmaalka, baahida iyo in si joogto ah loo isticmaalo habka ama qalabka qarxo oo gaar ahaan khatarta ah, in la adeegsado walxo sun leh xaaladaha deegaanka iyo bay'adda, waxay yareyn karaan sababaha burburka jirka shaqaalaha.

Gaar ahaan, loo-shaqeeyaashu waxaa waajib ku ah in ay ku rakibaan iyo in ay joogteeyaan waxtarka meelaha lagu shaqeeyo, qalabka, makiinadaha iyo alaadaha, iyo in la hagaajiyo habka shirkadaha u shaqeeyaan si shaqaalaha looga ilaaliyo khatarta ku imaan karto caafimaadkooda iyo noloshooda (101 x. shaq.).

Runtii waa in la hirgeliyo isticmaalka qalabka ammaanka ee kuwa loo baahan yahay si shaqaalaha looga difaaco khatarta makiinadaha ama qayb ka mid ah, ama khataro kale oo xataa leh dabeecadaha sunta ah ee dabiiciga ah ee shirkadda la dhalato oo aan laga saarin kuwa dhalin karo dabka (101, n.5 x. shaq.)

Ugu dambeystii loo-shaqeeyaashu waa in sameeyaan hawlo barbaarin iyo dacaayad ee ku wajahan shaqaalahooda si ay u ilaaliyaan nidaamka iyo in ay isticmaalaan qalabka xafidaadda ee shirkadda (101 n. 11 x. shaq.).

Shirkadda caymiska waxay wax ka qaban doontaa daraasadda arrimaha farsamo iyo baraatiko ee ku jiheysan ka hortegidda iyo in ay u qeexaan Wasaaradda Caafimaadka hindise la xiriiro xeer guud, si looga hortago shilalka iyo caafimaadka shaqada looguna soo saaro go'aan Madaxweynaha ee Golaha Sare ee Kacaanka asaga oo raacayo soo jeedinta Xoghayaha Caafimaadka.

Shirkadda ceymiska waxay sameyn doonta, xataa ayada oo isticmaaleyso kormeereyaal farsamo, hawlo dacaayadeed ee shaqada si loogu faa’iideysto qaabka ugu faa’iido badan mashiinnada, qalabka iyo aaladaha shaqada si looga hortago isla markaana la sameeyo dacaayad xataa shaqaalaha dhexdooda si loo abuuro damiir ka hortagga shilka ah.

Shirkaddu waxay kaalmmeyneysaa isla markaana la talinysaa shaqo bixiyeyaasha si loo rakibo qalabka ka hortagga iyo ururinta wararka iyo macluumaadka si loo xaqiijiyo natiijooyinka dhabta ah ee la gaaray iyada oo la raacayo xeerarka ka hortagga.

Shirkadda Caymiska, marka ay go'aaminayso heerka qiimaha caymiska ee la xiriiro abaalmarinta caymiska, waxay tixgelineysaa waxqabadka diyaargrawga ee loo-shaqeeyaha si looga hortago shilalka iyo natiijooyinkii la gaaray.

## Cutubka 3aad

Waajibaadka loo Shaqeeyaha iyo Hay'adaha kala Duwan Ciqaabaha

### Qod. 18
### Waajibaadyada Caymiska

Waajibaadka caymiska wuxuu ku xaqiiqoobaa bixinta abaalgudka caymiska, waana mas'uuliyadda kaliya ee loo-shaqeeyaha, waxaana lagu go'aamiyaa iyada oo loo eegaayo dabeecada iyo inta ay la egtahay halista iyo ayada oo lagu saleynaayo mushahaaraadka la bixiyay.

Qof kasta oo laga jaro dakhligiisa canshuur mid toosan ama mid dadban, ha noqoto lacag caddaan ah ama badeeco, kalana qayb qaato shaqaalaha kharajka caymiska ee ku waajibay marka la eego shuruudaha xeerkan, waxaa lagu ciqaabaa ganaax ilaa shankun shilin Soomaali (82 xeerka shaqada.).

Shirkadaha dekedaha ee ku cad qod. 12 waxay xaq u leeyihiin mag dadka iyo hay'adaha daneynaya ee loo sameeyey hawlahaas ay qabatay.

### Qod. 19
### Ashtakada ku Saabsan Shaqooyinka

Loo-shaqeeyayaasha hoos yimaado qodobbada xeerkan waa in ay u ashtakoodaan shirkadda caymiska, ugu yaraan shan malmood ka hor inta shaqooyinka aan la bilaaban, dhabeecadda shaqada lafteeda iyo gaar ahaan hawlaha gaarka ah ee lagu xaddiday caymiska ka dhanka ah cudurrada shaqada ee shaxda n.3 ee ku lifaaqan sharcigan.

Waa in ay sidoo kale keenaan dhammaan tilmaamaha iyo cunsurrada looga baahan yahay si loo qiimeeyo halista iyo in si sax ah loo cayimo abaalgudka caymiska ee waajibay (38-39).

Marka dabeecadda shaqooyinka ama baahida ku xiran shaqooyinka bilaabistooda awgood ayaan suurtagelin in waqtigii hore la sameeyo ashtakadaas, waxaa isla ashtakada sameyn karo loo-shaqeeyaha shanta maalmood ee ah maamlmaha xigo marka shaqada la bilaabay.

Loo-shaqeeyeyaashu waa in, sidoo kale ay u ashtakoodaan shirkadda ceymiska isbeddellada dambe ee ballaarinta iyo nooca khatarta ee shirkadda hore u caymisay iyo joojinta shaqada muddo aan dhaafsiisneyn maalinta tobnaad laga soo bilaabo maalinta isbeddelada ama kala duwanaanshaha kor ku xusan ay soo muuqdeen.

Loo-shaqeeyuhu waa in sidoo kale uu ku caddeeyo ashtakadiisa isbedellada la xiriiro hubsashada milkiilaha shirkadda, cinwaankiisa iyo degaankiisa, iyo sidoo kale xarunta shirkadda, toban maalmood gudahood marka isbedellada ay soo muuqdeen.

Loo shaqeeyuhu marka shqsiyan uusan si toos ah u koontrooleyn maamulka hawlihiisa, waxaa waajib ku ah in uu u caddeeyo shirkadda ceymiska xogta qofka ka wakiilka ah sida waafaqsan sharcigan iyo isbedel kasta oo la xiriiro isla qofkaas.

Si loo adeegsado ujeeddooyinka qodobbada ku xusan faqradaha aan soo sheegnay, loo shaqeeyeyaasha baddu waa in, bilowga sannad walbo ama marka uu markabka ganacsigu oo mar kale la diiwaan geliyay, uu bilaaabayo shaqada ama haddii kale uu ku sugnaa bilowga sannadka xaalad fariisasho, waa in ay gaarsiiyaan shirkadda ceymiska tirada caadiga ah ee dadka saran markabka, darajadooda, mushahaarkooda iyada oo loo xisaabiyo si waafaqsan

faqradaha qodobbada 36 iyo 37, taas oo ay uga qiyaasanayaan in ay waafaqsan yihiin ilaa 31 Disembar shaqaalaha, badmaaxidda ama meesha caadi ahaan loogu talo galay markabka

Waa in ay, sidoo kale, ku wargeliyaan tilmaan kasta oo loo baahan yahay si shirkadda caymiska ugu suurto gasho in ay qiimeyso halista.

Shirkadda caymisku waan in ay ku wargeliso loo shaqeeyaha baddu cadadka abaalgudka caymiska iyo qaabka lacag bixinta.

Isbeddel kasta oo ku keeni karo, sannadka gudihisa, isbedel nuxurka halista iyo magdhowga, waa in si dhaqso ah lagu wargeliyo shirkadda caymiska.

**Qod. 20**

**Xarunta la Geynaayo Ashtakada**

Ashtakda shaqaalaaha iyo isbedelladooda, ashtakada shilalka iyo guud ahaan dhammaan wixii ogeysiis ah ee u socdo shirkadda caymiska waa in la geeyo xarunta gobolka ee shirkadda caymiska ee goobta lagu qabanaayo shaqooyinka iyo ayada oo la raacayo qaabkii ay u dejisay isla shirkadda (54-55).

Haddii shaqooyinka loo qabanayo loo shaqeeyaha lagu kala qabanaayo meelo kala duwan, oo goob walbana ay ka tirsan tahay dhul deggaan kala duwaan ee shirkadda caymiska, loo shaqeeyuhu waxaay shirkadda caymiska u oggolaan kartaa in ashtakadiisa shaqo iyo isbedelladooda uu geeyo xarunta ay u cayimi doonto isla shirkadda caymiska.

**Qod 21**

**Ganaaxyada fulin la'aanta ee la xiriiro waajibaadka ka-hortagga warbixinnada.**

Looshaqeeyeyaasha aan fulinin, muddada sharciga uu tilmaamayo dhexdeeda, waajibaadka warbixinnada shaqada iyaga aay qabtaan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeyo shan boqol oo shilin Soomaali ah ilaa shan kun oo Soomaali ah.

Iyadoo aan loo eegin dacwadda dembiyeed, loo-shaqeeyayaasha eedaysane waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan hay'adda caymiska, marka lagu daro khidmadaha caymiska ee laga bilaabo bilawga shaqada, qadar u dhigma saamiga lacagta la sheegay oo u dhiganta muddada u dhaxaysa bilawga shaqada iyo taariikhda la soo gudbiyay cabashada.

Loo-shaqeeyayaasha aan soo gudbin cabashooyinka ku saabsan wax ka beddelka baaxadda iyo nooca khatarta hore ee caymisku ku jiro muddada kama dambaysta ah ee ku xusan farqada saddexaad ee qodobka 19-aad waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan laba boqol oo Soomaali Shellini ah oo la saarayo Kunka Shellini ee Soomaaliya.

Loo-shaqeeyayaasha soo gudbiya warbixin ku saabsan shaqada ama beddela khatarta aamin-la'aanta si loo go'aamiyo baabi'inta ama bixinta qaddarka qaddarka ka yar inta lagugu leeyahay waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan laba kun oo Soomaali ah oo Shellini ah iyo iyada oo aan loo eegin dacwadaha ciqaabta, waxaa laga rabaa in ay u wareejiyaan hey’adda ceymiska, marka lagu daro farqiga dheeraadka ah ee u dhexeeya qaddarka la bixiyay ama la bixiyay iyada oo lagu salaynayo cabashada daacadnimada la'aanta ah ee la soo bandhigay iyo tan dhabta ah, waxaa looga baahan yahay inay siiyaan Caymiska qaddar lacag ah ee u dhigma saamiga faraqa la sheegay. oo u dhiganta muddada u dhaxaysa taariikhda bilawga shaqada ama wax ka beddelka khatarta iyo ka-hortagga u hoggaansanaan la'aanta.

Haddii ay dhacdo in dib loo dhigo ama la dhaafo warbixinta joojinta shaqada, waajibaadka bixinta khidmadaha caymiska, qaddarkii hore ee loogu talagalay, waxay koreysaa ilaa sagaashanka maalmood ee ku xiga maalinta joojinta.

## Qod.22

## Qaabka bixinta khidmadaha caymiska

Kharashka caymiska waa in ay hore u siiyan loo-shaqeeyayaashu si ay u siiyaan Caymiska habka iyo shuruudaha uu dhigayo sharcigan muddo hal sano qorraxeed ah ama muddada gaaban ee shaqada iyadoo lagu saleynayo cadadka mushaharka loo maleynaayo inuu bixinaayo loo shaqeeyaha inta lagu jiro sanadka ama inta lagu jiro wakhtiga khidmada loo tixraacayo.

Shaqooyinka joogtada ah iyo shaqada ku meel gaadhka ah ee soconaysa in ka badan hal sano, khidmaddu waxa ay tilmaamaysaa marka ugu horraysa ilaa wakhtiga ka bilaabmaya shaqada bilawga ah ee 31 December isla sanadkaas iyo ka dib xilliyada u dhigma sannadaha jadwalka. marka laga reebo wakhtiga ugu dambeeya ee shaqada ku meel gaadhka ah, taas oo noqon doonta midda shaqaynaysa laga bilaabo sanadka qiimaha iibka shaqada ilaa taariikhda la joojiyo lafteeda.

Shaqooyinka joogtada ah iyo shaqada ku meel gaadhka ah ee soconaysa in aan ka badnayn hal sano, khidmaddu waxa ay tilmaamaysaa marka ugu horraysa ilaa wakhtiga ka bilaabmaya shaqada bilawga ah ee 31 December isla sanadkaas iyo ka dib xilliyada u dhigma sannadaha jadwalka. marka laga reebo wakhtiga ugu dambeeya ee shaqada ku meel gaadhka ah, taas oo noqon doonta midda shaqaynaysa laga bilaabo sanadka qiimaha iibka shaqada ilaa taariikhda la joojiyo lafteeda.

Haddii inta lagu jiro mudada lacagta caymiska la hormariyay, caymiyuhu aqbalo in qadarka mushaharka la bixiyay uu ka badan yahay qaddarka la filayo iyadoo lagu salaynayo khidmada hore loo bixiyay, caymisku laftiisu wuxuu codsan karaa bixinta qayb dheeraad ah oo ka mid ah lacagta caymiska.

Isbeddelka qaddarka mushaharka loo malaynayo waxa ku siin kara caymisku marka uu codsi wax kaga beddelaay uu u soo gudbiyo loo shaqeeyaha 30ka Noofambar isagoo warqad diiwaangashan ah oo ay ku jirto caddaynta rasiidka in laga qabtay. Isbeddelku wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo Janaayo 1 ee sanadka soo socda.

Si loo habeeyo khidmadaja, waa inay looshaqeeyeyaasha ku wargeliyaan caymis bixiyaha, soddon maalmood gudahooda ka dib markuu dhammaado qaybaha khidmadda caymiska (24/5), qaddarka mushaharka dhabta ah ee la bixiyay muddada caymiskii hore, marka laga reebo awoodda koontrool ee ku haoon ee isla heyadda lafteeda u leedahay iney ku sameyso.

## Qod. 23

## Wax ka bedelka khidmadaha haddii ay dhacdo in lagu guuldareysto in lagu dhawaaqo mushaaraadka la bixiyay; Ciqaabta ku dhawaaqida daacad-darrada ah ee isku mid ah

Haddii ay dhacdo in lagu guuldareysto in la soo diro, gudaha muddada kama dambaysta ah ee lagu sheegay farqadda ugu dambeysa ee qodobka 22, caddaynta la xiriirta qadarka mushaharka dhabta ah ee la siiyay shaqaalaha caymiska ku jira.

Caymisku si toos ah ayuu ugu gudbi karaa qiimaynta mushaharaadkan oo kale, isaga oo ku dallaci kara loo shaqeeyaha kharashaadka ku baxay qiimaynta lafteeda, ama waxa uu fulin karaa bixinta qaddarka qaddarka ah ee ku salaysan labanlaab mushaharka loo malaynayo ee la aasaasay muddada caymiska.

Xuquuqda caymisku ku leeyahay lacagta caymiska iyo ciqaabta lagu sheegay farqada labaad ee qodobkan ayaa ah mid aan saamaynaynin, haddii ay dhacdo in khidmad ka badan tii hore loo codsaday ama rafcaan looga qaato baadhitaannada xiga.

Loo-shaqeeyayaasha, ujeeddooyinka nidaaminta khidmadaha, waxay caddeeyeen inay bixiyeen mushahar qaddar ka hooseeya kan la bixiyay, si loo go'aamiyo xallinta iyo bixinta qaddarka qaddarka ka hooseeya tii lagu lahaa, waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan caymiska Hay'adda marka lagu daro kala duwanaanshaha dheeraadka ah ee u dhexeeya dejinta khidmadaha la bixiyay ama la bixiyay iyo ka la rabo, wadar la mid ah faraqa la sheegay iyo tan oo dhaqangal ah laga bilaabo taariikhda la bixiyay.

**Qod 24**

**Shuruudaha lagu bixinaayo khidmadaha caymiska.**

Bixinta khidmadaha, marka laga reebo lacagta caymiska, oo ay tahay in ay dhacdo ka hor bilowga shaqada, waxaa bixinaya loo shaqeeyaha toban maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda xilliga caymiska ee qaybta la tixraacayo (22). /3).

Isla muddadaas tobanka maalmood ah ee ka bilaabmaysa xirhiirka uu sameeyay caymisku, xeerarka khidmadaha waa in uu bixiyaa loo shaqeeyaha, iyo sidoo kale kala duwanaanshaha dheeraadka ah ee lagu go'aamiyo kala duwanaanshaha khatarta ah iyo lammaanaha loo shaqeeyo ee la xiriiro diiwaangelinta, mushaharka ama hagaajinta isdiiwaangelinta laftooda kormeer ka dib.

Haddii ay dhacdo in isgaadhsiinta lagu sheegay farqada lixaad ee qodobka 22 ay ka dhalato nidaaminta lacagta caymiska ee loo shaqeeyaha, caymisku waa in uu u soo celiyo kharashka lixdan maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda la helo isgaadhsiinta lafteeda, marka laga reebo hubinta in isla hay'addu ay doonayso in ay ku riddo muddadan gudahooda.

Xuquuqaha caymisku ku leeyahay khidmadaha iyo ganaaxyada, ee ka dhasha baadhitaannada la sameeyay xittaa ka dib wakhtiga kama dambaysta ah, wax saamayn ah kuma laha.

Caymiska loogama baahna in uu xasuusiyo loo shaqeeyaha taariikhaha dhacayo ee qaybaha kuwaas oo, weliba, lagu tilmaamay shahaadada caymiska uu bixiyo loo shaqeeyaha. Kaliya rasiidhada uu bixiyo khasnajiga caymiska ayaa ka dhigan caddaynta lacag bixinta iyo taariikhda lacag bixinta.

**Qod 25**

**Ganaaxyada la xiriiro ku guul dareysiga bixinta khidmadaha caymiska ama diiwaangelinta shaqaalaha iyo lacagaha la xiriira.**

Loo-shaqeeyayaasha kuwaas oo, waqtiyada kama dambaysta ah, aan lacag bixin, marka laga reebo kordhinta uu bixiyo caymisku ama farqiga dheeriga ah ee lagu go'aamiyo kala duwanaanshaha halista kala duwan iyo hagaajinta la sameeyay ee la xiriirto diiwaangelinta mushaharka ama habeynta isdiiwaangelinta lafteeda, waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan Hay'adda, marka lagu daro khidmadaha ama qayb-qaybinta ama qayb-hoosaadka dheeraadka ah, dulsaarka cabbirka heerka sharciga ee arrimaha madaniga ah (233 xm) (1) ee qaddarka caymiska sababtoo ah ama kootada o kala duwanaanshiyaha aan soo sheegnay iyo qadar la mid ah shan meelood meel tirada la sheegay.

Loo-shaqeeyayaasha ka baaqsada diiwaan gelinta loo baahan yahay ee ku xusan faqradaha 1 iyo 2 ee qodobka 29, ee la xiriira shaqaalaha la caymiyay ama mushaaraadka la siiyay ama xaqa ay u yeesheen, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo gaaraya ilaa Seddex Kun Shilin Soomaali ah, iyadoo aan loo eegin dacwadda ciqaabta ah, ayaa looga baahan yahay inay siiyaan caymis bixiyaha, marka lagu daro farqiga dheeraadka ah ee u dhexeeyo khidmad u dhiganto qadarka mushaharka la diiwaan geliyey iyo kan u

bislaaday kaas oo ku saleysan mushaharka dhabta ah ee la siiyay dhammaan shaqaalaha caymisku uu ceymiyay ama uu daboolay, qadar u dhigma farqiga la soo sheegay taasina waxaa laga soo bilaabaa taariikhda ay ilaabatay gudasho la'aanta.

**Qod 26**

**Ciqaabta ku noqonoqoshada gudasho laa'anta.**

Loo-shaqeeyayaasha, oo ka dib markii ay galeen mid ka mid ah gudasho la'aanta ku xusan qodobbada 22, 23 faqrada labaad, iyo tan 25, ay ku dhacaan isla gudasho laanta, ayaa waxaa looga baahan yahay, marka lagu daro bixinta lacagaha ku cad isla qodobbada laftooda, inay u soo celiyaan caymiska dhammaan magdhow-yada ay ku bixisay shilalka ku dhacay shaqaalahooda muddada gudasho la'aanta.

Iyadoo loo eegayo qodobbada qodobkan, waxaaa loo ictibaaraa sida gunno la bixiyay gunnooyinka la bixiyay iyo kuwa la bixinayo intaba waxaana loo tixgalinayaa magdhow ahaan, iyada oo loo samaynayo gunnada sida ku cad jaantusyada ku xusan faqradda u dambeeyso ee qodobka15.

**Qod 27**

**Wadajirka waajibaadka:**

Marka laga hadlayo wareejinta shirkad laga wareejinaayo loo shaqeeye loona wareejinaayo loo shaqeeye kale (56 Xeerka Shaqada), kan dambe, inkastoo cabasho la sameeyay iyadoo la raacayo qodoka 19, si wadajir ah ayuu waajib uu ula noqonaa kan hore, marka laga reebo xaqa suurtogalka ah ee dib u noqoshada ee loo-shaqeeyaha cusub uu leeyahay ee ku wajahan kii hore, dhammaan wixii u waajibay caymisku iyada oo loo marayo qaabka khidmadaha caymiska iyo danaha la xiriiro iyo lacagta dheeraadka ah ee qaabka ciqaabta, oo la xiriiro sannadka hadda ah iyo labadii sanoo hore.

Shirkadaha ku hawlan badda ama kalluumeysiga, waajibaadka wadajirka ah ee lagu sheegay faqradda hore ayaa wxay jirtaa xaalad kasta marka ay jirto wareejinta milkiyadda markabka (100 Xeerka Badda) marka laga reebo in wareejinta ay ku timid iyada oo la raacayo habraaca qasabka ah.

**Qod. 28**

**Waajibaadka Wakaaladaha maxalliga, Rugta Ganacsiga, warshadaha iyo beeraha Maamulka caamka (guud)**

Si loo hirgaliyo shuruucda xeerkaan ku qoran, Wakaaladaha maxalliga waxaa ku waajiba in ay u soo gudbiyaan Rugta Badbaadada Bulshada Soomaaliya bil kasta liiska dhammaystiran ee shatiga iyo siismada. Wargalintaas mid la mida ayaa laga doonayaa Wakaaladda, Rugta Ganacsiga, warshadaha iyo beeraha shirkadaha warshadleyda, beeraha iyo ganacsiga iyo guud ahaan urur hantiyeedka idil oo hawlahooda bilaabaya.

Maamullada dawladda, Wakaaladaha Maxalliga iyo Wakaaladaha caamka waa in ay soo wargaliyaan Wakaaladda la soo sheegay heshiisyada muhiimka ee qandaraasyada, qaab kasta oo lagu gaaray, shaqooyinka ku saabsan caymiska qasabka ah ee ku qoran cinwaanka koobaad ee xeerkaan (14. Lr.1: 12), iyo sidoo kale tilmaamaha buuxa iyo halka uu degganyahay midka heshiiska galay iyo qiimaha lagu heshiiyay. Wargelintu waa in lagu soo gudbiyaa labaatan cisho gudahood oo ka soo bilaabata marka la diiwaangeliyay heshiiska iyo marka heshiisku dhacay haddii heshiiska isaga aan looga baahnayn diiwaangelin.

Saraakiisa Dawladda, Wakaladaha maxalliga, Wakaaladaha caamka iyo Rugta Ganacsiga, warshadaha iyo beeraha oo ka mas'uul ah dayaca, marka gudanayaan xilkooda xeerkan lagu sheegay, waxay mudanayaan ganaax maamul kala duwan oo u dhexeeya shilin

Soomaali boqol ilaa saddex boqol, iyadoo aan meel looga dhacayn ciqaabta xanshax marinta iyo marka laga reebo in falku uu dambi keenay.

Ganaaxa maamul waxa uu ku soo baxayaa dekereeto uu soo saaro Xoghayaha Wasaradda Caafimaadka.

**Cutubka 4aad**

Buugagta Hagaajinta

**Qod. 29**

**Tilmaamaha Buugaagta Hagaajinta**

loo-shaqeeyeyaasha u xilsaaran xeerkaan waa in ay haystaan:

1) Buugga xogta, oo taxane habaysan loogu qoro shaqa qoristooda iyo inta aan shaqada loo oggolaan, dadka shaqada haya oo idil sida uu qabo qod. 10. Buugga xogta waa in lagu tilmaamaa, cid kasta oo hawl qabanaysa, lambarka qorista nidaamsan, magaca oo buuxa iyo goobta dhalashada, taariikhda shaqada loo oggolaaday iyo midka heshiiska xiriirka shaqada, nooca xirfadeed iyo cadadka mushaarka;

2) Buugga mushaar bixinta, iyadoo shaqaale kasta lagu tilmaamayo magaca oo buuxa iyo lambarka shaqaalaha; tirada saacadaha uu shaqeeyay maalin kasta, iyadoo si gooniya loo tilmaamayo saacadaha shaqada aan caadiga ahayn; lacag bixinta dhabta ah ee qaab kast lagu bixiyay.

Marka qofka shaqada qabanaya la siiyay lacag go'an ama mid maalin oo dhan ah ama xilliyo ka badan, wuxuu calaameynayaa keliya maalinta uu shaqada soo xaadiray.

Xirfadbarte kasta 58 i.w.x. Xeerka Shaqada ama shaqaale ka yar siddeed iyo toban (88/2; 90/2 Xeerka Shaqada), ka sokow mushaaarka joogtada ee suurtagalka ah, waxaa la tilmaamayaa mushaarka lagu bilaabay ee loo qoondeeyay qofka ka wayn da'da siddeed-iyo-toban jirka ee caymiska ku jira oo aan ahayn xirfadbarte, oo ka hawlgala isla shaqada xirfad bartayaashu iyo dadka aan qaan gaarka ahayn ay qabtaan iyado sikastaba la siinayo mushaar aan ka yareyn midka ugu hooseeya ee la siiyo kuwa qabta shaqada dadka ka wayn sideed iyo-toban sano isla dabaqadda hawlaha ay qabtaan.

Haddii shaqooyinku ay yihiin dadka ku xusan qod. 10, lambarka 6 iyo 7, loo shaqeeyuhu, ka sokow in laga qoro qofka buugaagta isku qorista iyo bixinta mushaarka, waa in uu ashtako u soo qoraa Wakaaladda wax caymisay magac ahaan iyadoo ay wehliyaan lacagaha la siiyo. Haddii aan lacag la siin ama lacagta la siiyay aanay macquul ahayn ama sikastaba la hubin karo waxaa loo qiyaasaya lacag bixin la isla qaadan karo ee dhexdhexaadka mushaarka idil ee kuwa qabta isla xilka ama mihnadda hawl-qabadyadooda ka haya isla goobta.

**Qod. 30**

**Kormeeridda Goobaha**

Buugga mushaarka iyo midka qorista lambarka waa in la geeyo goobta shaqadu ay ka socoto, codsi kasta, ee Wakaaladda wax caymisay: ee ulajeeddaas leh buugaagta lagama qaadi karo goobta shaqada, xitaa si ku meelgaar ah.

Loo-shaqeeyuhu waa in uu bixiyaa caddaymaha idil, isagoo tusinaya buugaagta xisaabta oo dhan iyo dokumentiyada kale, iyo inu uu keeno akhbaar kasta oo dhamaystiraysa iyo sidoo kale faahfaahinada lagama maarmaanka si uu u muujiyo saxnaanta diiwaangelinta. Isagu sidoo kale waa in uu siiyo Wakaaladda wax caymisay akhbaar kasta oo la weydiisto si lagu ogaado, markasta, dadka ku jira caymiska, lacagta la siiyo iyo saacadaha shaqada ay iyagu qabtaan.

Dadka u xilsaaran Wakaaladda wax caymisay, waa in ay soo bandhigaan marka la weydiisto warqadda aqoonsiga oo Wakaaladdu ay bixisay; waa inay ku yaalliin taariikhda iyo saxiixa qoristii u dambaysay ee buugga mushaarka.

Wakaaladda wax caymisay iyadoo adeegsanaysa hawlwadeenadeeda la soo sheegay, waxay xaq u leedahay in ay ka haysato buugga mushaarka nuqul waafaqsan asalka, Loo shaqeeyuhuna waa in uu la saxiixa.

Hawlwadeenada iyaga ah waxay ka samaynayaan xaqiijinta dhacdooyinka warbixin uu wax ka saxiixay loo shaqeeyaha, kaaso xaq u leh in uu u qoro caddaynta iyada haddii uu arko in ay ku habboontahay. Haddii loo-shaqeeyuhu uu diido saxiixa, hawlwadeenka ayaa xusaya isagoo sheegaya sababta diidmada.

## Qod. 31
## Ku Qorista Buugga Mushaarka

Buugga mushaarka waa in si joogto ah loo xafido.

Maalin kasta waa in lagu dhigaa qoraallada ku saabsan saacadaha shaqada uu qabtay shaqaale kasta maalmahii tegay iyo, xaaladda lagu xusay faqradda saddexaad ee qod. 29, keliya waxa quseeya maalinta shaqada la joogo; mushaarooyinka waa in lagu diiwaangeliyaa buugga mushaarka saddex maalmood gudahood oo laga soo billlaabo muddada dhicitaanka lacagbixinta socota.

Marka la eego qaabka shaqadu u socota oo ay ka dhaceyso meel ka fog saldhigga urur hantiyeedka, uuna weliyo guur-guur isxiga oo ka dhacaya goobo kalaa duwan, looshaqeeyuhu ma awoodo in uu wax ku soo sameeyo waqtiga lagu ballamay qorisyada ku saabsan saacadaha shaqada caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn ee maalin kasta uu qabto shaqaalaha, tilmaamaha saacadaha la soo sheegay waxaa lagu muujin karaa buugga mushaarka isla waqtigaas mushaarka isaga ah la diiwangeliyay, sida ku xusan faqradda kor lagu soo sheegay.

Shaqooyinka ku saabsan shaqada hawlqabad cayiman waa in lagu muujiyaa buugga mushaarka lacagaha la siiyay shaqaalaha, saddex maalmood gudahood oo ku siman lacag bixin kasta.

## Qod. 32
## Qaabka loo Haynayo Buugaagta wax lagu Hagaajinayo

Buugga lambarka taxana iyo buugga mushaarka waa in ay isku lifaaqanyihiin iyadoo la lambarinayo bog kasta iyo, ka hor inta aan la isticmaalin, waa in loo geeyaa Wakaaladda wax caymisay, taaso bog kasta uu la saxiixaysa qof si gaara u xilsaaran, isagoo bogga ugu dambeeya uu ku caddaynayo tirada baalalka uu ka koobanyahay buuggu isagoo ku dhigaya caddayntaas taariikhda iyo saxiixa isla hawlwadeenka. Labada buug ee la soo sheegay waa in lagu hayaa iyagoo aan lahayn meelo bannaan waana in lagu qoraa khad ama shay aan tirtirmayn. Laguma samayn karo tirtirid, haddiise loo baahdo tirtiridda qaarkeed waa in lagu sameeyaa kaas si erayga la tirtiray uu u noqdo mid la akhrin karo.

Xaaladaha gaarka Wakaaladda wax caymiska waxay qoraal ugu oggolaan kartaa loo-shaqeeyaha in uu haysto buugaag saa'id ah ama baalalka mushaarka iyo buugaag saa'id ah ee lambarka taxana, isagoo ay waajib ku tahay in uu ku soo koobo buugaagta xogaha si waafaqsan qaababka degsan.

Buugaagta iyo baalalka mushaarka iyo buugaagta lambarka taxana waa in Wakaaladda caymisku ay ku astaamaysaa lambarro si nidaamsan isku xig-xiga.

Looshaqeeyuhu waa in uu xafidaa buugaagta mushaarka iyo buugagta lambarka taxan muddo shan sano ah ugu yaraan marka laga soo bilaabo diiwangelinta ugu dambaysa iyo, haddii aan la isticmaalin laga soo bilaabo taariikhda la calaameeyay si waafaqsan faqradda koobaad.

## Qod. 33
## Ka Dhaafidda Haynta Buugagta Hagaajinta

Wasiirka Caafimaadka, marka uu dhagaysto talada raalli-ahaanshaha Wakaaladda wax caymisay, waxay ikhtiyaar u leedahay in ay haynta buugga lamabarka taxana iyo buugga mushaarka in Maamullada Dawladda iyo urur hantiyeedka ay hubinta ilaalinta dawladeed ku jira in ay ka dhaafto marka ay soo baxdo isla iyada in si wax ku ool ah diiwaangelinti laga isaga baahanyahay loo sameeyay oo ay wehliyaan baalasha ama kaalimihii mushaarka.

Wasaaradda la soo sheegay, marka ay hesho talada Wakaaladda wax caymisay, waxay ka dhaafi kartaa haynta:

a) Buugga mushaarka, looshaqeeyaasha hawsha qabanaya waxay ku bixin karaan qaabab kale ee ku habboon diiwaangelinta la isaga baahanyahay;

b) Buugga lambarka taxana, shaqooyinka leh dabaeecadda aan joogtada ahayn ama muddada gaaban iyo xitaa buugga mushaarka marka shaqooyinkaas iyaga ah ay ku cadyihiin liistada lacag bixinnada dhexdhexaadka ama la isla qaatay sida uu qabo qodobka 93. Xaladahaan ugu dambeeya, inta aanu shaqooyinka la bilaabin iyo ama marka xiga ee shaqa qorista, waa in uu soo wargeliyaa Wakaaladda wax caymisay macluumaadka shaqaalaha arrimahaas u xilsaaran.

## Cutubka 5aad
Lacag Bixinta, Xisaabinta Lacagta Caymiska, Tariifada

## Qod. 34
## Fikradda Lacag Bixinta ee Cayminta loola Jeedo

Waxaa looola jeedo xisaabinta lacagta cayminta iyo gunnada awood laawaha ku meel gaarka ama joogtada ah iyo, mararka dhimashada ee lagu xusay Cinwaanka lixaad ee xeerkaan, lacag bixinta waxaa loola jeeda wax kasta oo shaqaaluhu uu ka helo loo-shaqeeyaha oo lacag ah ama nooc kale oo xiriir la leh shaqada, xitaa maalmaha fasaxa iyo munaasabadaha ciidaha qaranka iyo kuwa caamka ah (86 Xeerka Shaqada) duuduub ahaan waxa kasta oo laga jaray.

Lama xisaabinayo bixinta lacagaha lagu bixiyay magaca[1]:

1) shaqooyinka lagu qabtay maamulidda hawlgabka iyo waxa la wadaago;
2) abaalgudka fasaxyada iyo ciidaha qaranka iyo kuwa caamka ah oo aan la helin;
3) baqshiiska;
4) gunnada baddalka digniinta horteed (51 Xeerka Shaqada) waaya-aragnimada muddada shaqada (52 Xeerka Shaqada,);
5) suurtagalnimada abaalgudka lagu kasbaday muddada maqnaaanshaha shaqada, si kasta ha ahaato muddada ay qaadatay iyo sababta;
6) gunnada Wakaaladda, halista, wakiilnimada;
7) ballaarinta halka mar sida badan uu bixiyay loo-shaqeeyaha;
8) xasuusqorka iyo gunnada baddalka tira go'an oo ku kooban boqolkiiba lixdan wadartood;
9) soo-celinta kharashyo kala duwan ama soo-celinta abaalgud kasta oo qofka shaqaalaha ku galay fulinta shaqada ama fursadda shaqada.

[1] La soco qodobka 49 lamba. 6 xeerka shaqada

## Qod. 35
## Qaababka Gaarka ee Lacag Bixinta

Arrimaha ku saabsan mushaarka dhex-dhexaadka loo gooyay ama la isla qaatay, kuwaas waxay wax ka tarayaan si loo go'aamiyo lacag bixinta.

Haddii lacag bixintu ay ku jirto dhammaan ama qayb ahaan cuntada iyo jiifka (73 Xeerka Shaqada) ama hawlqabadyo dabiici ah (71/3 Xeerka Shaqada), qiimaha midkaas waxaa goynaya Wakaaladda wax caymisay iyadoo lagu saleynayo qiimaha maxalliga.

Shaqooyinka lagu bixinayo tacab-qaybsiga ama faai'iido qaybsiga lacag bixinta waxaa loola jeeda lacag bixinada laga helo tacabaysiga ama cadadka faa'iida qaybsiga oo laga jaro kharashka uu shaqaaluhu galay xitaa haaddii lagu gaaray qaab qiyaaseed (71/2 Xeerka Shaqada).

Mararka shaqaaluhu aanay qaadan lacag go'an ama sikastaba lacagta la siiyo aan la xaqiijin karin, haddii aanay ku jirin shaxda joogtada ah ee mushaarka go'an ee dhex-dhexaadka ama mid la isla qaatay, waxaa laga qiyaas qaadanayaa lacag bixinta shaqaalaha haya isla tayada ama mihnadda ee isla goobta.

Wixii ku saabasan arrimaha ardayda dugsiyada amar kasta iyo darajo kasta lacag bixinnada sanadeedka la qiyaasayo waxa lagu jaangooynayaa hawlgabka ka dhasha awood la'ida ama kuwa ka badbaaday, iyadoo loo eegayo da'ada fasallada iyo nooca waxbarashda isla ardayda iyaga ah ay soo qaateen, waxaana lagu soo saarayo dekereto Wasiirka Caafimaadka, oo la kaashanaya Wassiirada Maaliyadda iyo Waxbarashada. Lacag bixinnadaas waxay kaloo loo adeegsan karaa ulajeedooyin tabarucaad.

## Qod. 36
## Aragtida Lacag Bixinnada Shaqaalaha ku jira Safarrada Badda iyo Kalluumayska Badda

Kuwa ku jira safarrada badda ama hawlaha kalluumaysiga badda oo shaqaalayntooda aanu nidaaminayn faqradda koobaad ee qodobka soo socda ee 37, wixii ku saabsan go'aaminta lacagbixinta waxaa lagu dhaqayaa isla qod. 34.

Marka aanay waajib ahayn sida uu qabo xeerka heshiiska lakala qortay ee shaqa qorista, mushaarka, cuntada waa in lagu muujiyaa buugga mushaarka.

Marka shaqa qoristu ay ku saabsanatahay lacag bixinta safarka maalinlaha waxaa loo qaybinayaa lacagta ku qoran kaalinta rakaabka ama waxa lagu heshiiyay oo ah lacag bixinta safarka, oo ay ku jiraan qiimaha cuntada, marka loo eego tirada maalmaha safarka muddada caadiga ee dhex-dhexaadka.

Marka heshiiska qorista shaqaalaha uu ka yaryahay muddo sanad ah ama qofka shaqada qabanaya uu markabka ama doonta uu saaranyahay muddo aan sanad ka yareyn isla darajadiisa, hawlgabka awood laawida iyo hawlgabka ka badbaadidda waa midka lagu bixiyo muddada sanadka, mararka kale waa mid la eg saddex boql oo jeer lacaga bixinta maalinlaha.

## Qod. 37
## Qaabka u Gaara Lacag Bixita Shaqaalaha Safarka Badda iyo Kaluumaysiga Badda

Shaqaalaha gaadiidka badda ee loo shaqaaleeyay qaabka ka qaybgalka faai'iidada iyo wixii ka soo baxa wax soo saarka, waxaa la go'aaminaya marka la dhagaysto, Saraakiisha Badda, lacag bixinta la isla qaatay oo loo qaadan karo ha ahadeen xisaabinta abaalgudka caymiska ama xisaabinta magdhawga awood la'ida ama xisaabinta gunnada hawl la'ida ku-meelgaarka waadaxa iyo xaq-gudidda dakhliga awood la'ida joogtada ama tan laga badbaaday.

Marka la go'aaminayo lacag bixinta la isla qaatay waa in maanka lagu hayo ha ahaado mushaarka go'an, ama ha ahaado boqollayda laga wada qaybgalayo, ama qiimaha waxyaale kale looga daydo xitaa haddii lagu qabtay nooc kale iyo haddii lagu bixiya lacag.

Dekereetada lagu oggolaanayo lacag bixinta la soo sheegay waxa soo saaraya Wasiirka Arrimaha Shaqada iyo Isboortiga oo kaashanaya midka gaadiidka (72 Xeerka Shaqada)[1].

Lacagbixinta la isla qaatay waxay ka bilaabanaysaa taariikhda la faafiyo dekereetada ee lagu soo sheegay faqradda sare, waxaan dib loo eegayaa caadiyan shantii sanaba hal mar.

**Qod. 38**
**Xisaabinta Lacagta Caymiska**

Lacagta caymiska waxay waajib ku tahay loo-shaqeeyaha iyadoo lagu saleynayo lacagta canshuurta ee ku cad tariifada qodobka 40 oo ay dabbaqdo Wakaaladda Bulshada Soomaaliya heerka, iyadoo loo eegayo halbeegga iyo qaababka tariifada iyada ah, qiimaha dhammaystiran lacag bixinta si wax ku oolnimada loo bixiyay ama waxayaabaha la isla gartay muddada idil oo ay socdaan shaqooyinka ay qabanayaan shaqaalaha oo ay ku jirto waajibka caymiska. Canshuuraha tariifada waxaa lagu tixraacaya Shilin Soomali.

**Qod. 39**
**Habeegga Lacagta Caymiska Gaarka**

Wakaaladda badbaada Bulshada Soomaaliya waxay u fasaxantahay in ay dabbaqdo lacag caymis gaar ah oo lagu xisaabinayo halbeeg lagu tixraacayo walxo kale oo ku habboon, sida cadadka dadka, muddadda ay shaqadu socoto, tirada gawaarida, tayada badeecadooyinka, iyadoo maanka lagu hayo sida lagu sheegay faqradda labaad ee qod. 40, waxa ku saabsan shaqooyinka marka loo eego wixii jiray, sida ay iskugu xiranyihiin marka loo eego dabeecadda ama qaabka ay wax u socdaan ama duruufo kale, caqabadaha wax lagu xaqiijin karo ee dadka u xilsaaran shaqooyinka, iyaga ah, ama saacadaha shaqada la qabto, ama iyo sikastaba sida loo xafido buugaagta wax lagu habeeyo, tusaale arrimaha ku saabsan duurka, fiiqidda suufka iyo galleyda, iyo shaqooyinka xammaalka.

**Qod. 40**
**Tariifada Lacagta Caymiska**

Tariifada lacagta caymiska ee liddiga shilalka shaqada iyo cudurrada xirfadaha iyo qaababka la xiriira ee dabbaqaadka, ee loo jideeyay si loo fahmo culayska maaliyadeed ee jira oo u dhigma shilalka iyo cudurrada xirfadaha xilliga ay caymiska ku jiraan, waxaa lagu meelmarinayaa dekereeto Wasiirka Caafimaadka marka uu arko talada soo jeedinta Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaaliya.Tariifada waxay caddaynaysaa canshuurta lacagta caymiska si u dhiganta culayska halista dhexe ee qaran ee la xariirta keli ahaanta shaqooyinka la caymiyay, si loo famo culayska maaliyadeed ee lagu soo sheegay faqradda sare.

**Qod. 41**
**Guddiga Baarista Cabashada Liddiga Dabbaqaadda Tariifada Lacagta Caymiska**

Dabbaqidda liddiga tariifada lacagta caymiska loo shaqeeyuhu wuxuu kaga caban karaa guddi uu magacaabo Wasiirka Caafimaadka, oo ka kooban sarkaal ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka, oo noqonaya guddoomiyaha guddiga, wakiil ka socda loo shaqeeyeyaasha warshadaha iyo sarkaal ka socda Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaaliya, kaasoo qabanaya xilka xoghayaha guddiga. Kharshka ku baxaya hawl-socodsiinta Guddiga isaga ah waxaa qaba Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaaliya, hadba qaabka dekereetada Wasiirka Caafimaadka ay u goyso.

Shaqada Guddiga waxaa lagu qabanayaa Xarunta Guud ee Wakaaladda.

---

[1] La soco qodobka 11

## Qod. 42
## Cabashooyinka ku Wajahan Dabbaqidda Tariifada Lacagta Caymiska; Habraacyada iyo Shuruudaha

Cabashooyinka liddiga ku ah qaraaraadka dabbaqidda tariifada lacagta caymiska. Oo laga sameeyay afar nuqul, iyo qoraallada idil ee dhinacyada, oo ay saxiixaan dhinacyadu ama cid sifa sharci uga wakiila, oo aanay ku jirin wakiillada gaarka, waa in ay ku yimaadaan muddo aan ka badnayn soddon cisho oo ka soo bilaabata taariikhada ay soo gaartay akhbaarta qaraaraadka isaga xarunta Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaliyeed ee u xilsaaran iyagoo bixinaya helitaanka. Xarunta Wakaaladda waxay cabashada ku dul qoraysaa taariikhda la qabtay iyadoo soddon cisho gudahood oo ka bilaabata keenisteeda u gudbinaya cabashooyinka xoghaynta Guddiga, loona diyarinayo waxyaabaha laga jaray iyo dukumentiyada kale ee la xariira sida ku cad qodobka kore. Xoghayuhu, cabashooyinka iyaga wuxuu ku qorayaa diiwaan loogu talagalay oo Guddoomiyha Guddiga uu lambariyay iyo calaameeyo.

Dokumrntiyada la doonayo in la soo gudbiyo waa in lagu soo lifaaqaa cabashada, sikastaba Guddigu wuxuu xaafiis ahaan u yeeri karaa dhinacyda si ay u keenaan, waqti go’an gudahiis, faahfaahino ama ay keenaan dokumentiyada lagu xusay qorallada ee horay loo soo gudbiyay.

Loo shaqeeyaha cabashada soo gudbiya si waafaqsan qodobkaan, waa in uu ku keena xaqa cabashada iyada ka hor muddada dhicitaanka, bixinta lacagta caymiska, marka dabbaqidda koobaad ee lagu saleeyo tariifada dhexdhexaadka iyo mararka kale ee lagu saleeyo canshuurta hadda la qaado laga soo bilaabo taariikhda qaraarka ay cabashadu ka soo bilaabatay, marka laga reebo faraqa suurtagalka ah u dhexeeya lacagata lashubay iyo midda la iska rabay, iyadoo la dabbaqayo dulsaarka ah boqolkiiba shan oo laga soo xisaabinayo taariikda lacagta la shubay (223 Xeerka Madaniga).

## Qod. 43
## Go’aanka Cabashada

Marka ay wada yimaadaan cabashada iyo codsiyada, marka la helo, faah-faahinada iyo dokumentiyada lagu soo xusay faqradda saddexaad ee qod. 42, Guddoomiyaha Guddiga wuxuu muddeynayaa maalinta cabashada la dhageysanayo. Qaraarkaas waxaa la gaarsiinayaa dhinacyada, haddii ay iyagu codsadeen in si shaqsiya loo dhagaysto, taaso natiijadeedu arrintaas keliya ku egtahay. Dhinacyadu, markaasoo kale, waa inay shaqsiyan soo xaadiraan ama cid sifa sharci uga wakiila, iyadoo aanay ku jirin wakiillada ama ergada gaarka. Go’aanka, oo ay guddigu wada saxiixaan, waxaa la dhigayaa xoghaynta Guddiga isaga, kaaso isla markiiba go’aanka wargelinaya dhinacyada, marka ay dhammaato muddada durista, iyo, marka laga codsado, wuxuu bixinayaa nuqul dhamaystiran ee go’aanka.

## Qod. 44
## Cabashada Maxkamadda Sare

Go’aanka ay gaaraan Guddiga ee ku saabsan eegista cabashooyinka laga soo qaato dabbaqidda tariifada lacagta caymiska waa mid kama dambaysa, waxaase duris looga qaadan karaa keliya Maxkamadda Sare sababo la xariira sharcinimada iyo dulucda keliya si waafaqsan shuruudaha iyo qaababka xeerka.

## Cutubka 6aad

Habraaca Doodad

### Qod. 45

### Qiyaasidda Sharcinimada

Qaraarada maamul oo ay gaarto Wakaaladda wax caymisay waxaa la qiyaasayaa markasta in ay sharci yihiin haddii aan duris looga qaadan qaababka iyo muddada xeerka lagu sheegay ka sokow awoodahooda fulineed waxay noqonayaan kama dambays oo aan suuurtagal ahayn in dib loo eego, dacwo maxkamadeed ama is-hortaag fulin sida ku cad qod. 53.

### Qod. 46

### Go'aaminta Xaafiiseed ee Lacagta Caymiska ama Xoojinta Lacagta Caymiska

Wakaaladda wax caymisay, marka ay ogaato in aan la keenin ashtakada shaqada ama kuwa wax ka-baddalka ballaarinta iyo dabeecadda halista marka loo eego amarrada qod.19, wuxuu ka samaynayaa amiin ka-baxa loo-shaqeeyahu isago ogaysiis u soo marinaya warqad boostada diiwaangashan oo ay wehliyaan ogaysiiska helitaanka loona qabanayo muddo toban cisho in uu ku bixiyo.

Marka ay dhammaato muddadaas, haddii aan la keenin cabasho sida ku cad qodobka xeerkaan, loo shaqeeyuhu waa in uu shubaa lacagta caymiska ama lacagta caymiska dheeraadka ka soo baxday baaritaankii ay samaysay Wakaaladda wax caymisay, laga soo bilaabo inta u dhexeysa bilowga shaqada iyo taariikhda wax ka baddala halista.

Kaba soo qaad dayaca ashtakada shaqooyinka iyo wax ka baddalka halista, haddii loo shaqeeyuhu xilgudan waayo ah, inkastoo uu ku keenay ashtakada muddada loo qabtay aamin ka-baxa ashtakada la weydiistay, oo qaab aan run ahayn wax ku soo uruuriyay, wakaaladda wax caymisay waxay go'aan ka gaaraysaa lacagta caymiska kuna saleynaysaa baaritaanadeedi iyadoo aan soo gudbin aamin ka-bax cusub oo ah ashtako dheerad ah, loo shaqeeyuhuna aanu ka meer-meeri karin qaab kasta waajibaadka bixinta lacagta caymiska ama lacagta caymiska dheeradka la go'aamiyay.

Si looga hortago aamin kabaxa Wakaaladda wax caymisa, loo shaqeeyuhu wuxuu ikhtiyar u leeyahay in uu isla muddada tobanka cisho cabasho geysto Wasaaradda caafimaadka. Cabashada, la keeno xarunta Wakaaladda awoodda u leh rasiidka helitaanka ay bixiso, wuxuu noqonayaa caddaynta keliya oo muujinaysa in uu keenay cabashada iyada, waana saldhigga laga helayo aragtida dhabta ah waxaana loo soo gudbinayaa, muddo aan ka badnayn shan iyo toban cisho oo ka bilabata marka la keenay, Wasaardda la soo sheegay, taaso iyaduna go'aan ka gaaraysa shan iyo toban cisho gudahood. Wakaladda wax caymisay iyo loo shaqeeyaha labaduba waxay ikhtiyaar u leeyihiin in ay duris ka qaataan go'aanka Wasaaradda Caafimaadka, ayagoo u dacwoon kara hay'adaha garsoorka muddo soddon cisho gudahood oo ka soo bilaabata taariikhada la soo gaarsiiyay go'aanka isaga.

Haddiiba durista uu soo qaato loo-shaqeeyaha, xaqa dacwadda waxay ku xirantahay kolba caddayn muujinta lagu fuliyay qaraarka ay soo saartay hay'adda maamulka oo ay la socoto lacag bixinta wax ku oolka ee lacagta caymiska ama lacagta caymiska dheeraadka ama ugu dambayntii lacagta ku waajibtay sida ku cad qod. 21.

Habraaca hay'adaha garsoorka hortooda waxaa la ilaaliyaa, xitaa awood qaadista, xeerarka qodobada 459 illaa 466 Xeerka Habka Madaniga.

### Qod. 47

### Waajibaadka ah in la Siiyo Wakaaladda wax Caymisay Xogaha iyo Macluumaadka

Marka si sax ah go'aan looga gaaro lacagta caymiska ku waajibtay loo-shaqeeyaha iyo waajibaadka ka yimid Wakaaladda wax caymisay sida ku cad qod. 65, loo-shaqeeyuhu

waxaa ku waajiba in uu siiyoo Wakaaladda iyada, shaqaalaheeda u xilsaaran akhbaarta la soo qoray ee la xariirta lacag bixinta oo noqon karta saldhigga xaq-gudidda lacagaha caymiska, iyo loo oggolaado hawlwadeennada la soo sheegay baarista urur hantiyeedka, xitaa saacadaha shaqada, oo ay u sii dheertahay akhbaarta la soo sheegay, duruufaha uu shilku ku yimid iyo wax kasta oo looga baahanyahay qiimaynta halista.

Loo-shaqeeyeyaasha ama wakiilladooda, u diido in ay soo dhex galaan urur hantiyedkiisa hawlwadeennada Wakaaladda wax caymisay oo xilsaaraan baarista ama aanay doonayn in ay tusaan nidaamka diiwaanada sida ku cad qod. 29 ama aanay u oggolaan in ay eegaan diiwaanada caadiga iyo dokumentiyada xisaabaadka ama aanay bixin akhbaarta la weydiistay ama ogaal u siiyaaan si khaldan ama qabya ah, waxaa lagu ganaaxayaa shanboqol oo shilin Soomaali ilaa labakun, marka laga reebo haddii falku aanu keenin dambi ka culus.

Mararka ay jirto xilgudasha la'aanta ku xusan faqradda la soo sheegay, Wakaaladda wax caymisay waxay xaafiis ahaan go'aan ka gaaraysaa ama saxaysaa lacagta caymiska iyadoo adeegsanaysa walxaha iyo xogaha ay uruurisay, kuna boorinaysa loo-shaqeeyaha in uu bixiyo lacagta caymiska iyada ah muddo ku siman toban cisho.

Marka la eego qaraarka Wakaaladda caaymiska, wuxii awoodaa muddo kusiman toban cisho, in u ka dacwoodo hay'adaha garsoorka. Bixinta lacagta caymiska oo laga baaqsado iyo ganaaxa la socda waxay keenaysa in aan la qaadan dacwad maxkamadeed iyo hor-istaagga qoraallada fulinta ee ku xusan qod. 53.

### Qod. 48
### Ogaysiiska Marka Qoraalka Wargalinta aan laga Dacwoon ama la Diido

Qoraallada ogaysiisyada Wakaalladda wax caymisay marka ay leeyihiin muddo ay ka bilowdaan oo aan laga dacwoon ama dadka ay khusaysay ay soo diideen, ogaysiisyadaas iyaga waxaa lagu wargelinayaa siyaabo gaara sida ku xusan qod. 52 ee xeerkaan, oo ay wehliyaan qaabka ogaysiiska ee ku cad qod. 56 ee T.U. ee sharciga canshuuraha Tooska oo lagu meelmariyay Dekereetada Golaha Shacabka 5 Nofember 1966. Lr. 5.

### Qod. 49
### Aamin ka Baxa iyo Cabashooyinka

Aamin ka baxa Wakaaladda wax caymisay iyo cabashooyinka dhinacyada lama marsiinayaa axkaam gaar ah waxa ku saabsan qaabka, marka ay si ku filan u qalmaan gaarista ulajeedooyinkii loo soo saaray (82 x.h.m.) Cabashooyinka ku soo baxay si waafaqsan xeerka cinwaankaan waa in lagu qoraa waraaqad canshuuran (Bollo).

## Cutubka 7aad
Mudnaanta gaar Ahaaaneed ee Deymaha iyo Habraaca Canshuurta Khasabka ee Lacagta Caymiska

### Qod. 50
### Mudnaanta gaar Ahaaneed ee Daymaha Wakaladda wax Caymisay

Daynta wakaaladda wax caymisay ay ku leedahay loo shaqeeyaha oo ku saabsan lacagaha caymiska iyo dulsaaarada la xariira oo ku waajibay (42/4), oo wata cinwaanka lacgata la horumariyay ama faraq soo haray ama mid baariseed, ama lacaga dheeraada oo arrin ciqaab sax ku timid ee qodobbada 21, 23, 25 iyo 26, daynta dib u dalbashada ee waxqabadyada cayminta caafimaadka iyo anfacyada saxan qod. 16 waxay mudnaan gaara u leeyihiin hantida guurtada iyo maguurtada idil ee deynsanaha, darajadiisa kasta marka loo eego daynta Dawladda ee ku saabsan canshuurha tooska ah ee Dekereetada Golaha Shacanka 5 Nofember 1966, lr. 5, kuwaaso sikastaba ku qoran (919, 925, 927 Xeerka Madaniga).

Daynta ku xusan faqradda sare ee lagu leeyahay loo-shaqeeyaha badda waxay mudnaan gaara u leeyihiin maraakiibta, xamuulka iyo faaidooyinka iyo waxyaabaha laga helo safarka kuwaaso ka dhashay mudnanta gaar ahaaneed ee daynta iyo dheeraadyada markabka iyo faa'idada xamuulka ka dib bilowga safarka, darjada saddexaad ee lagu sheegay qod. 163 Xeerka Badda. Daynta la so sheegay waxay la soconayaan markabka cid kasta oo gacanta ku haysa.

**Qod. 51**
**Bixinta Kharashka**

Daymaha canshuuraha ee lagu soo xusay qodobka sare, oo la hubiyay marka la eego xeerkaan oo aan lagu bixin qaabkii iyo muddadii la jideeyay, Wakaaladda waxay ku dhaqaaqaysaa in ay xoog ku fuliso daynsanaha, iyadoo loo marayo xeerarka u dagsan uruurinta khasabka ee daymaha tooska ee uu leeyahay Maamulka Maaliyeed ee Dawladda sida ku cad Dekereetada Golaha shacabka 5 Nofember 1966, Lr. 5, marka laga reebo sida ku cad qodabbadii 52, 53 ee xeerkan.

**Qod. 52**
**Digniinta Mudda Dhaafta**

Fulinta khasabka ah waxaa billabayaa Wakaaladda awoodda u leh iyadoo lagu wargelinayo daynqabaha digniinta mudda dhaafka oo ay ku qorantahay tilmaanta daynta, iyadoo loo kala qaadayo cinwaan kasta sida ku cad qod. 50 iyo kharshka la socda, iyo iyadoo lagu wargelinayo in uu daynta ku bixiyo muddo shan iyo toban cisho gudahood. Wargelinta digniinta waxaa samaynaya gaarsiiyeyaal gaara oo ay magacawday Wakaaladda oo Wasaaradda Caafimaadkuna oggolaaatay.

**Qod. 53**
**Is-hortaagga Arrimaha Fulinta**

Is-hortaagga ay ka keenaan dadka danta ka leh arrimaha fulinta waxaa awood u leh Wasaaradda Caafimaadka, waxaana lagu soo hagaajinayaa Xarunta Guud ee Wakaaladda, taaso iyaduna u soo gudbinaysa Wasaaradda la soo sheegay labaatan cisho gudahood oo ka bilaabata marka la keenay ayna la socdaan macluumaadka gaarka. Wasaaradda caafimaadku waxay go'aan ka gaareysaa muddo labaatan cisho gudahood. Is-hortaagyadaas ma joojinayaan fulinta (51); sikastaba Wasaaradda Caafimaadka inta lagu jiro go'aanka mudda dhaafka waxay ku joojin kartaa markasta habraaca fulinta qoraal sababaysan oo ku salaysan baaris hordhac ah haddii is-hortaaggu loo arka wax jira.

Go'aanka Wasaaradda Caafimaadka waxaa la gaarsiinayaa dhinacyada qoraal lagu hubinayo helitaanka.

Hay'adaha garsoorka looma dacwoon karo haddii aanay cabashadu ka soo dhammaan dhinac maamulka. Wixii khuseeya dacwadda la soo sheegay waxaa la ilaalinyaa xeerarka lagu soo sheegay faqradda shanaad, lixaad iyo toddobaad ee qod. 46.

## CINWAANKA 5AAD

Ashtakada iyo Baarista Dhacdada

**Qod. 54**
**Ashtakada Ayaandarrada iyo Cudurrada Xirfadaha ee loo-shaqeeyaha**

Qofka la caymiyay waxaa ku waajiba in uu si degdeg ah u soo wargaliyo akhbaarta ayaandarro kasta oo la soo gudboonaata, loo-shaqeeyehiisa gaarka, xitaa haddii ay wax yar yihiin. Marka qofka la caymiyay uu dayaco waajibaadka la soo sheegay, oo loo-shqaqeeyaha isaguna aanu ogaan ayaandarrada, aan la samayn ashtkada muddadii lagu sheegay qodobka soo socda, lama siinayo gunno maalmaha ka horreeyay marka loo-shaqeeyuhu ogaaday

akhbaarta ayaandarrada. Ashtakada cudurrada xirfadaha waa in uu sameeyaa loo-shaqeeyaha muddo ku siman shan iyo toban cisho gudahood markii la soo sheegay iyadoo wixii ka horreeyay ashtakada muddadaas xaqa gunna siinta uu ka dhacayo.

**Qod. 55**

**Ayaandarrada Ashtakada iyo Cudurrada Xirfadaha ee Wakaladda wax Caymisay oo uu Sameeyo loo-shaqeeyaha**

Loo-shaqeeyuhu waa in u soo gudbiyaa ashtakada Wakaaladda wax caymisay ayaandarra kasta oo ku dhacda dadka u shaqeeya, oo la sheegay in aanay ku bogsoon karin laba cisho ka yar (68), oo ka madax bannaan qiimayn kasta wixii ku siman heerarka gunnada la oggolyahay.

Ashtakada ayaandarrada waa in lagu soo sheego laba cisho gudahood marka akhbaarta soo gaarto loo-shaqeeyaha, waana in laga soo diyaariyo caddayn dhaqtareed iyadoo lagu sheegayo in qofka la caymiyay aanu awoodin in uu shaqada yimaado.

Haddii ayaandarrada ay sababtay dhimasho la sii saadaalin karay halista dhimashada, ashtakada si deg-deg ah waa in lagu soo gudbiyaa qaabka wargelinta ugu dhaqsiyo badan ee suurtagalka ah.

Haddii awood laawaha ayaandarrada ay ahayd in uu ku bogsado laba cisho oo uu maalin saddexaad ku darsado, muddada ashtakada waxay ka soo bilaabanayasaa maalintan dambe.

Loo-shaqeeyaha, isagoo ogaa ayaandarrada ku dhacday shaqaalahiisa, kana baaqsada in uu soo sheego ayaandarrada muddada ku xusan faqradaha la soo sheegayay, waxaa ku waajiba in uu celiyo Wakaaladda wax caymisay gunnada u sugnaatay maalmaha ka horreeyay keenista ashtakada.

Haddii loo-shaqeeyaha uu ka warhelay ayaandarrada, balse qaab kale uu ku ogaaday, waa in uu ashtakata keena markasta.

Ashtakda ayaandarrada iyo caddaynta warqadda dhaqtarka waa in lagu muujiyaa:

1) Magaca oo buuxa, shirkadda, ulajeedddada dhaqaalaha ganacsiga ee loo-shaqeeyaha;
2) goobta, iyo maalinta iyo saacadda ay dhacday ayaandarradu;
3) dabeecadda iyo sababta la soo hubiyay ama loo maleyn karo ayaandarrada iyo duruufaha ay wax ku dhaceen;
4) magaca oo buuxa, aabbanimada iyo hooyanimad, degmada uu degganyahay ee dhibbanaha;
5) macluumaadka shaqsiga iyo cinwaanka markhaatiyada ayaandarrada;
6) nooca iyo meesha saxda ee waxyeelladu soo gaartay, xiriirka kala dhexeeya sabaabta ashtakada, wixii isbaddalla hore u jiray.

Ashtakada cudurrada xirfadaha waa in loo-shaqeeyuhu u soo gudbiyo Wakaaladda wax caymisay, oo ay la socoto caddaynta dhaqtarka laga soo diyaariyay, shanta maalmood oo ku xigta gudahood oo laga soo bilaabo marka midka hawsha haya uu soo gudbiyo ashtakada loo-shaqeeyaha warka cudurka. Caddaynta dhaqtarka waa in ay ku jirtaa, ka sokow tilmaamaha halka uu degganyahay iyo goobta la seexiyay, waa in laga soo sameeyaa warbixin gaar ah oo ku saabsan calaamadaha iyo waxyaabaha dhabta ah ee dhaqtarku ku soo sheegay. Dhaqtarrada caddaynta bixinayaa waxaa ku waajiba in ay siiyaan Wakaaladda wax caymisay macluumaadka idil ee loo arko in ay yihiin lagama maarmaan. Ashtakada, sidoo kale waa in lagu muujyaa saacadaha la shaqeeyay iyo lacagta lagu siiyay shaqaalaha toddobadii casha ee ka horreysay ayaandarrada ama cudurka farsamada. Ashtakadaas waa in lagu buuxiyaa foom gaar ah oo Wakaaladdu ay diyaarisay.

Wixii ku sabsan hawlawadeennada safarrada badda iyo kuwa kalluumaysiga badda (104, 105 Xeerka Badda) ashtakada waa in uu sameeyaa kabtanka ama qofka uu u xilsaaray taliyaha markabka ama doonta ama sabbeeyaha, ama marka ay jiraan wax u diidaya,

milkiiluhu waa in u soo diraa Wakaaladda wax caymisay ama Saraakiisha badda ama Wakiillada u xilsaaran diiwaangelinta.

Haddii ayaandarradu ay dhacdo inta lagu jiro safarka badda dhexdiisa ashtakada waa in la sameeyo maalinta ugu horreysa ee uu ku soo xirto marso ka dib marka ay dhacday ayaandarrada. Caddaynta dhaqtarka ee laga diyaarinayo ashtakada ayaandarrada waa in uu sameeyaa dhaqtarka gaadiidka badda, haddii aanu jirin, waa in uu sameeyaa dhaqtarka marsada ugu horreysa ee uu ku soo xirtay. Kuwa jabiya shuruucda ku qoran qodobadaan waxaa lagu ganaaxaya lacag ah laba-boqol ilaa shan-boqol oo shilin Soomaaali ah.

**Qod. 56**
**Ashtakada Ayaandarrada loo Gudbiyo Saraakiisha Boliiska**

Loo-shaqeeyaha, oo xitaa aanay ku waajib ahayn xilka lagu soo sheegay cinwaankaan, waa in, muddo laba cisho gudahood ku soo wargeliyaa saraakiisha maxalliga akhbaarta ayaandarro kasta ee ka dhacda shaqada oo sababta dhimasho ama awood la'i shaqo oo laba cisho ka badan.

Ashtakada waa in la soo gaarsiiyaa saraakiisha boliiska goobta ay ka dhacday ayaandarradu. Ayaandarradu haddii ay dhacday safarka dhexdiisa ashtakada waxaa la gaarsiinayaa saraakiisha boliiska goobta ugu horreysa ee lagu hakado iyadoo wixii ku saabsan safarrada badda iyo kalluumaysiga badda ashtakada waxaa lagu sameynayo, si waafaqsan faqradda xigta kan ugu dambaysa ee qodobka la soo sheegay, taasoo la gaarsiinayo, saraakiisha dekedaha ama qunsuliyadaha ama wakiillo kale oo ka tirsan Jamhuuriydda Demoqraadiga ee Soomaaliya oo xilsaaran.

1) Xaafiisyada la gaarsiiyay ashtaada waa in ay bixiyaan rasiidka helitaanka waana in ay geliyaan diiwaanka ashtakada ayaandarrada.

Ashtakada waa in lagu tilmaama:
magaca buuxa, shirkadda, ulajeedada iyo dhaqaalaha ganacsiga loo shaqeeyaha;

2) goobta, iyo maalinta iyo saacadda ay dhacday ayaandarradu;
3) dabeecadda iyo sababta la soo hubiyay ama loo maleyn karo ee ayaandarrada iyo duruufaha ay wax ku dhaceen;
4) macluumaadka shaqsiga, goobta deegaanka iyo xilka caadiyan uu hayo qofka waxyeeladu soo gaartay;
5) xaalaadda ugu dambaysa ee isaga, eelka suurtgalka ah ee ayaandarrada iyo suurtagalka waqtiga la ogaan karo natiijada kama dambaysta ah;
6) macluumaadka shaqsiga iyo cinwaanka markhaatiyada ayaandarrada.

**Qod. 57**
**Baarista Saraakiisha badda ama Saraakiisha Qunsuliyadda ama kuwa ka wakiila marka Ayaandarradu ku Dhacdo Shaqaalaha Badda**

Ayaandarra kasta oo ka dhacda, badda ama dhulka, oo la xariirta adeegyada markabka, oo qof ka tirsan shaqaalaha uu ku dhinto ama waxyello ka soo gaarto kuwaaso laga filan karo dhimasho ama hawl la'i ka badan soddon cisho (104, 105 Xeerka badda), saraakiisha badda ama qunsuliyad ama wakiil kale oo ka tirsan Jamhuuriyadda Demoqaraadiga ee Soomaaliya ee u xilsaaran, waxay samaynayaan baaris, ay ka soo qayb geli karaan wakiil ka socda Wakaaladda caymiska, qaabka iyo habraaca u jideeyay xeerarka jira.

Wixii ku saabsan Kharashka baarista waxaa loo bixinaya si waafaqsan qod. 61 ee xeerkaan. Nuqul ka mida garmaqalka baarista waa in loo geeyo garsooraha gobolka ee goobta saldhigga xaafiska dekedda laga diiwaangeliya markabka iyo Wakaaladda wax caymisay. Markii ay codsadaan Wakaalladda caymiska ama ayaan daranuha, saraakiisha badda ama qunsuliyadda ama wakiil kasta oo ka tirsan Jamhuuridda Demoqaraadiga ee Soomaaliya

wuxuu heli karaa in la sameeyo baaris xitaa mararka ayaandarrada aan la saadaalin karin hawl la'i ka badan soddon cisho. Kharashka la xariira baarista markaasoo kale waxa qaba cidda wax codsatay.

**Qod. 58**
**Baarista Garsooraha Gobolka**

Saraakiisha boliiska, marka ay soo gaarto ashtakada ku cad qodobka la soo sheegay, ashtaka kasta ee ayaandarro oo uu sababteeda leeyahay qof hawl hayay oo ku jiray wajibaadka cayminta si wafaqsan xeerkan in uu geeriyoday ama ay soo gaartay waxyeello laga filan karo in uu u geeriyoodo ama awood la'id ka badan soddon cisho, tusmo ka mida ashtakada waa in ay geeyaan maxkamadda gobolka ee deegaanka ay ka dhacday ayaandarradu. Waqtiga ugu dhow ee suurtagalka ah, markasta toddoba cisha gudahood oo ka soo bilaabata marka ashtakada la keenay, garsooraha maxkamadda gobolku wuxuu samaynayaa baaris si loo xaqiijiyo:

1) nooca shaqada uu hayay ayaandarranuhu;
2) duruufaha gaar ahaaneed ee ay ku dhacday ayaandarradu, dhaq-dhaqaaqa, sababta iyo dabeecadda iyada, iyo xitaa haddii ay jireen cillada tallaabooyin ka hortag iyo faye-dhowr oo uu suurtageliyay loo-shaqeeyu (110 Xeerka Shaqada);
3) aqoonsiga ayaandarranaha iyo goobta uu ku sugnaa;
4) nooca iyo inta ay la egtahay waxyeellada;
5) dawladda uu ka tirsanyanyahay ayaandarranuhu;
6) lacagta uu qaadanayay;
7) haddii ay jirto xaalad geeri, xaaladaha qoyska ayaandarranaha, kuwa nool ee ah xaqlayaasha magdhawga sida uu qabo qod. 87 iyo deegaankooda. Garsooraha maxkamadda gobolku waa in uu ku sameeyaa baarista goobta ay ayaandarradu ka dhacaday.

Wakaaladda wax caymisay, ayaandarranaha ama xaqlayaasheedaa waxay ikhtiyaar u leeyihiin in ay si toosa u weydiiyaan garsooraha maxkamadda gobolka in baaris lagu sameeyo dhibbanayaasha ay wax ka soo gaartay dhibaatada lagu tilmaamay faqradda sare ee xeerkaan, kuwaasoo boliisku aanu ka soo warbixin amase aan lagu sheegin warbixinta ama aan lagu xusin dhibaatada soo gaartay amaba sababa kale awgood, baarista aan laga samayn.

**Qod. 59**
**Muddada iyo Qaabka Baarista**

Tilmaamaha taariikhda iyo goobta baaristu ay ka dhacayso waxaa ku soo sheegayaa garsooraha maxkamadda gobolka, warqad si gaara boostada loo soo mariyo oo la socoto hubaal celinta helitaankeeda, ama lagala harayo rasiid uu bixiyay loo-shaqeeyaha, dhibbanaha ama xaqlayaasha ka dambeeya iyo Wakaaladda wax caymisay.

Baarista waxay ku dhacaysaa dood kafool-kafool ah ee kuwa daneynaya ama wakiilladooda iyo soo dhexgal, haddii loo baahdo, dhaqtar ama khubaro kale oo garsooraha maxkamdda gobolka soo xulo, kaaso ikhtiyaar u leh in su'aalo weydiiyo dadka oo idil, wixii isaga garashadiisa ay la noqota in ay wax ka iftiimi karaan duruufaha iyo sababta ayaandarrada.

Marka laga reebo jiritaanka sababa horjoogsanaya baarista oo gar-maqalka lagu qoro sida lagu soo sheegay faqradda xigta, baarista waa in lagu sameeyaa muddo gaaban oo aan ka badnayn shan iyo toban cisho marka ashtakada ayaandarrada ama codsiga baarista ay soo gaartay garsooraha maxkamadda gobolka sida ku xusan faqradda ugu dambaysa ee qodobka la soo sheegay.

Baarista waxaa laga diyaarinayaa garmaqal, iyado dadka ka soo qaybgalay ay xaq u leeyihiin in caddaymahooda gaarka lagu qoro. Garmaqalka waa in lagu diyaariyaa goobta ay ayaandarradu ka dhacday.

Qoraalka garmaqalka ee baarista, waxaa saxiixaya garsooraha maxkamadda gobolka, waxaana lagu keydinayaa kaalinta dacwadaha madaniga ee Maxkamadda Gobolka, waxaana lagu haynayaa tobon sano oo ka bilaabata maalinka ayaandarradu ay dhacday, iyado dhinacyaduna ay wax ka ogaan karaan ama nuqul ka qaadan karaan.

**Qod. 60**
**Dirista Garmaqaka Baarista Hay'adda Garsoorka Iqtisaaska u leh iyo Wakaaladda wax Caymisay**

Shan cisho marka laga joogo keydinta, nuqul la tasdiiqiyay ee garmaqalka waxaa loo gudbinayaa hay'adda garsoorka iqtisaaska u leh ee hawsha oo qabanaysa, haddii arrintu ay tahay sida uu xeerku qabo.

Isla muddaddaas gudaheed sida ku cad faqradda la soo sheegay, kaaliyuhu waa in uu u diraa qoraal gacanta looga dhiibo oo uu wehliyo digniinta hubaal-celinta, nuqulka garmaqalka la tasdiiqiyay Wakaaladda wax caymisay.

**Qod. 61**
**Gunnada Garsoorayaasha, Markhaatiyada Dhakhtarada iyo Khubarada Baarista**

Garsoorayaasha Maxkamadda Gobolka, kuwaasoo sameeya baarista ku xusan qod. 58, oo saldhiggooda ka soo taga, waxay xaq u leeyihiin gunno u dhiganta xaaladaha gunnooyinka la siiyo garsoorayaasha mararka ay hawlo garsoor saldhigooda uga soo tagaan.

Gunnada la soo sheegay xaq looma yeelanayo marka tegitaanka uu yahay lagama maarmaan sida uu qabo Xeerka habka ciqaabta.

Waxaa kaloo lagu bixinaya gunnada halbeegga iyo xaaladaha loo gooyay tariifada ciqaabta, markhaatiyada, dhakhtarada iyo khubarada kale ee garsoorka gobolku ugu yeeray baarista oo dantaasu ku jirtu.

Gunnada lagu xusay faqradda la soo sheegay, wixii khuseeya garsooraha gobolka, waxaa xaq gudaya Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka, wixii khuseeya markhaatiyada, dhakhtarada iyo khubarada, waxaa xaq gudaya isla garsooraha gobolka baarista sameeyay, isago kolba arrinta waxay tahay si cad u sheegaya in gunnada loola jeedo baarista ku xusan qod. 58.

Bixinta gunnada la soo sheegay waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaaliya, oo lagu meel marinayo codsi ka yimid Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka iyo garsooraha Gobolka ee baarista sameeyay.

**Qod. 62**
**Baarista Arrimaha la Xariira Dhimashada (necroscopic)**

Marka ay dhacdo dhimashada sababtay ayaan-darrada oo ku timid codsi Wakaaladda wax caymisay iyo ama xaqlayaasha kale, Xeer ilaaliyaha gobolka ee aaggiisa ay ka dhacday ayaan-darrada dhimashada sababtay wuxuu amrayaa in la caddeeyo sababta dhimashada waqtiga ugu dhaqsiyaha badan oo aan ka badnay shan cisho oo ka bilaabata maalinta la codsaday. Waa in ay oggolaadaan dhinacyada danta ka leh ee codsiga keenay kuwaaso soo wakiisha dhaqtar ay ku kalsoonyihiin si uu gacan uga geysto baarista sababta dhimashada, taaso aan la samayn karin haddii aan horay loogu soo sheegin taariikhda, saacadda iyo goobta ay baaristo iyo dhaqtarka ay Wakaaladda wax caymisay aanu joogin.

Xigtada qofka geeriyooday ma diidi karaan baarista sababta dhimashada qaab kastaba, sidoo kale ay ka dhigaan waxaan suurtagalayn ama ku kacaan fulin aan loo baahnayn, waxayna luminayaan xaqa kasta oo ay ku heli lahaayeen gunnada ayaan-darrada.

Xushmadda baarista meydka oo ay wehliso warqadda dhaqtarka waxaa xaqsiinaya Xeer Ilaaliyaha Gobolka iyadoo gundhig looga dhigayo halbeegga Wasiirka Caafimaadka kaaso la kaashanaya Wasiirka Shaqada iyo Isboortiga.

Kharashka baarista meydka waxaa qaba codasadaha lagu soo sheegay faqradda 1aad kaasoo bixinaya marka uu soo weydiisto Xeer Ilaaliyaha Gobolku ee baarista amary.

**Qod. 63**
**Baarista Deg-degga ah Mararka looga Shakisanyahay Kas-shil ama Xilgudsha la'aanta Xaqa**

Wakaaladda wax caymisay, marka ay jirto sabab la rumaynsan karo in ayaan -darradu ay ku dhacday kas-shil ama natiijada ka dhalatay ay si kutalgala looga sii daray amase caymiyuhu uu qariyay ayaan-darrada iyadoo looga dan leeyahay in lala xariiriyo dhaawacyo hore ama dhacdo waxyeello shaqada ka baxsan, ama si loo aqoonsado waxyeello ama carqadallo aan jirin ee dhibaatooyin culus ee waxyaabo la qiyaasay ama jug muuqata ee shaqada la xariira, waxay si iqtiaariya u weydiisan kartaa garsooraha gobolka baaris deg-degga iyado la raacayo habraacyada xeerka u degsan arrimaha de-degga ee lagama maarmaanka ah kuna xusan Xeerka habka iyo ciqaabta (300 – 302 x.h.m).

Xaaladaha ku xusan faqradda kore habraaca xaqsiinta gunnada waa la hakinayaa, haddii ay soo baxdo in caymiyuhu uu yahay dambiile dambiga la soo sheegay, wuxuu luminayaa xaqa waxqabad kasta, iyado ciqaabtu sharcigu ay tahay mid sideeda u taagan. Kharashka baarista deg-degga waxaa qaba Wakaaladda wax caymisay.

**Qod. 64**
**Ashtakada loo-shaqeeyaha Xogaha ama Walxaha aan run Ahayn**

loo-shaqeeyeyaasha iyagoo ujeeddadoodu tahay in ay naasnuujiyaan qof ka mida shaqaalahooda ayaan-darro ku dhacday, oo soo gudbiya ashtakadooda xogo ama walxo aan run ahayn, waxaa lagu ganaaxayaa shanboqol oo shilin soomali ah, haddii falku aanu keenayn dambi ka culus.

## CINWAANKA 6AAD

Wax-qabadyada

### Cutubka 1aad

Nooca iyo qaababka wax-qabadyada

**Qod. 65**
**Waxqabadyada Caymiska: Is-hagidda Iyaga**

Waxqabdyada caymiska waa sida soo socota:

1) gunno maalinle ah oo la siinayo awood laawaha aan joogtada ahayn (68-71) ;
2) gunno la siinayo awood laawaha joogtada ah (79);
3) lacag kaalmo gaar ahaaneed oo soconaysa (81);
4) gunno la siiyo kuwa nool iyo Lacag hal mar ah haddii dhimasho ay dhacdo (87 iwx.);
5) daaweynta caafimaadka iyo qalliimada oo ay ku jiraan baarista ogaashaha cudurka (98 i.w.x);
6) bixinta qalabka xubnamaha macmalka ah (108).

Kuwa caymiska ku jira waxay xaq u leeyihiin in Wakaaladda Caymisku ay qabto adeegyada la soo sheegay xitaa loo shaqeeyuhu haddii aanu gudan waajibaadka uu dhigayo xeerkaan (18-20, 24, 55).

**Qod. 66**
**Bixin la'anta Daynta Ayaan-darrada**

Daynta gunnada, ee sharcigano goynayo, cid kale lama siin karo sidoo kale lama gelin karo rahan (362 x.h.m) lamana xayiri karo, marka laga reebo kharashka garsooridda oo qofka

la caymiyay ama xaqlayaasha uu ku dhaco xukun dhammaday/ dhaqan galay (222 x.h.m) ee ku saabsanla dacwo la xariirta fulinta xeekaan.

**Qod. 67**

**Wax kama Jiraanimada Macaamil kasta oo Meesha ka Saaraya Bixinta Gunnada**

Waa wax kama jiraan macaamil kasta oo loola jeedo in meesha laga saaro bixinta gunnada ama lagu dhimayo halbeegga uu xeerkanu sheegayo.

Macaamillada ku saabsan xaqa gunnada ama halbeeggooda ma ansaxayaan haddii aanu soo ansixin Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka goobta uu ka dhacay maamilka isaga (512 x.m).

**Cutubka 2aad**

Hawlqabadyada Dhaqaalaha

**Qaybta 1aad**

Gunnada Maalinlaha Awood la'ida ku Meelgaarka ah

**Qod. 68**

**Halbeegga iyo inta ay Soconayso Gunnada Maalinlaha ee Awood la'ida ku-meelgaarka**

Laga soo bilaabo maalinta saddexaad ee dhacdada ayaan – darradu ama ay soo shaac baxdo jirrada xirfadda iyo inta ay socoto awood la'ida muuqata ee falka ayaan-darrada oo gabi ahaan ka reebaya in uu shaqeeyo, waxaa la siinayaa gunno maalinle ah oo loo xisaabinayo boqolkiiba lixdan (60%) mushaarkiisa maalinlaha sida ku cad axakaamta qodobada 91-94.

Haddii muddada ay socoto gunnadu sida ku cad faqradda la soo sheegay ay dhaafto sagaashan cisho, xitaa haddii aanay isku xigin, xisaabta gunnada maalinlaha waxaa la gaarsiinayaa boqlkiiba toodobatan iyo shan (75%), oo laga soo bilaabo maalinta sagaanshan iyo koobaad mushaarkiisa maalinlaha, sida ku cad amarrada qodobada 91-94. Gunnada awood la'ida ku-meelgaarka ah waxaa la bixinayaa ka dib muddo aan ka badnayn toddoba cisho iyadoo la bixinayo xitaa maalmaha ciidaha/fasaxa (86 Xeerka shaqada).

Kuwa ku lug leh safarrada badda gunnada maalinlaha waxay uga soo bilaabanaysaa maalinta ku xigta maalinta uu ayaandaranuhu uu ku soo dego dhulka qaranka ama dalka dibbadiisa waxaana loo xisaabinayaa mushaarka dhabta ah ee uu qaatay taariikhda uu ka degay markabka/doonta ee ku xusan kaalinta ama shatiga sarkaalka dekedda ama xaafiiska qunsuliyadda. Sida uu qabo faqradda la soo sheegay mushaarka maalinlaha waxaa loo qaybinayaa soddon mushaarka billaha.

Maalinta ayaan-darradu ay dhacday laguma darayo marka go'aanka laga gaarayo muddada ay qaadatay arrinta ayaan-darrada sababtay.

Gunnada maalinlaha lama sinayo ayaan daranaha muddada awood la'ida ku-meelgaarka haddii mushaarkiisa uu si caadi loo u sii qaato. Xaaladaha marka la dhimo, gunnada maalinlaha waxaa la siinayaa, wax ku siman xudduudaha lagu sheegay faqradaha koobaad iyo labaad, iyadoo aan la dhafayn xadkaas, ay wehliso mushaarka la dhimay, kan caadiga (54/4, xarafka "b", Xeerka Shaqada).

**Qod. 69**

**Horumariska loo-shaqeyaha ee Gunnada Awood-la'ida ku-meelgarka**

Loo-shaqeeyuhu ma diidi karo horumarista gunnada awood-la'ida ku meelgaarka marka ay ka codsato Wakaaladda wax caymisay.

Loo-shaqeeyuhu, marka ay ka codsato Wakaaladda wax caymisay. Waa in uu siiyaa ayaan-daranaha gunnada maalinlaha ee ku-meelgaarka ah ee sida sharciga ugu sugnaatay,

haddii uu ku suganyahay goobta uu degganyahay loo–shaqeeyuhu, isagoo raacaya tusaalooyinka ay bixisay wakaaldda wax caymisay.

Caddadka lacagta gunnada Wakaaladda wax caymisay waxay u celinaysaa loo-shaqeeyaha dhammaadka bil kasta, haddii aan si kale loogu heshiinin.

**Qod. 70**
**Iqtiyaarka lagu Dhimayo Gunnada Maalinlaha marka Ayaan-daranaha uu Isbitaal la Seexiyo**

Marka la caymiyaha la seexiyo isbitaal, Wakaaladda wax caymisay waxay iqtiyaar u leedahay in ay dhimis saddex meelood ku samayso gunnada ku-meelgaarka ee ayaan-daranaha. Sina looma samayn karo dhimis, laakiin, waa la samayn karaa haddii uu leeyahay xaas ama caruur keliya xaaladaha lagu sheegay qod. 87 ama uu leeyahay farac amase haddi ay yihiin kuwa ka shaqeeya safarrada badda ama kalluumaysiga badda.

**Qod. 71**
**Mushaarka la siinayo qofka caymiska ku jira oo la xariira maalinta ay ku dhacday ayaan-darradu iyo saddex-meelood meel maalmaha nuqsaanta**

Loo-shaqeeyaha waxaa ku waajiba in uu siiyo shaqaalaha ayaan-darradu ku dhacday mushaarka idil ee maalinta ay ku dhacday ayaan-darradu iyo saddex-meelood meel isla mushaarka isaga ee maalmaha xiga ilaa inta ay sii jirto nuqsaanta gunnada maalinlaha, xitaa haddii uu bogsado inta lagu jiro muddada nuqsaanta.

Waajibka la soo sheegay wuxuu soconayaa, sidoo kale maalmaha fasaxa/ciidaha marka ay jirto cudurrada xirfadaha.

Waajibka arrintaan ka ratima waxaa laga cabir qaadanayaa saldhigga dhex-dhexaadka mushaar maalmeedka ee shaqaaluhu qaadanayay toddobadii maalmood ee ka horreysay dhacdada.

**Qaybta 2aad**
Qiimaynta Dhaawacyada

**Qod. 72**
**Aragtida iyo Dabeecadaha Awood la'ida Joogtada ah**

Sida uu qorayo xeerkaan waa in loo aqoonsadaa awood la'ida joogtada buuxda cawaaqibka ka yimaada ayaan-darrada ama cudur xirfadeedka, kaasoo si buuxda u diidaya hab-dhaqanka shaqada inta uu noolyahay. Waa in loo aqoonsadaa awood laawe joogto dhimman cawaaqibka ka yimaada ayaann-darrada ama cudur xirfadeed si weyn u yareynaya qayb ahaan hab-dhaqanka shaqada inta uu qofku noolyahay.

Awood la'ida joogtada ah ee lagu soo sheegay faqradda la soo sheegay waa in ay tahay mid lala xariirinayo shaqada isku nooca ah iyo qiimaynta dhaawacyada la magdhabayo iyado talada lagu darayo kartida wax qabad ee, awoodda hoos u dhacday, oo aan ahayn shaqada u qabanayay qofka caymiska ku jira marka dhibaatadu dhacday, hasayeeshe waa nooca shaqada.

Lama magdhabi karo dhaawacyada ku lug leh bilicda/quruxda aan la tarraxin.

**Qod. 73**
**Shaxda lagu Qiimaynayo Awood al'ida Joogtada ah**

Halbeegga awood la'ida joogtada ah ee ka timid ayaan-darrada waxay ku caddahay shaxda qiimaynta (lifaaqa lr.1) ee xeerkaan ku lifaaqan. Xaaladaha awood la'ida joogtada ah ee ku xusan shaxda la soo sheegay, kartida hab-dhaqanka shaqada, marka la eego xaq-

gudidda hawlgabka, waxaa loo qaadanayaa in hoos loo dhigay cabbirka boqollayda lagu soo tilmaamay arrin kasta.

Joogsiga buuxa ee waxqabadkooda waaxyaha ama xubnaha ama qayb iyaga ka mida waxay la mida tahay iyadoo la waayay jir ahaan.

Marka waaxyaha iyo xubnaha ama qaybo ka mida la waayo qayb ahaan shaqadooda, darajada dhimista hab-dhaqanka shaqada, waxaa lagu saleynayaa boqollayda awood la'ida u degsan waayiddooda oo dhan iyo wax u dhigma qiimaha waxqabadka shaqada baaqsatay.

**Qod. 74**
**Qiimaynta Awood la'ida ka timid Dhaawacyada badan oo kala Nooca**

Marka ay jirto waxyeello badan oo kala nooca iyo, ka yimid hal ayaan-darro oo sababay waayidda waaxyo ama xubno badan ama qaybo badan oo iyaga ka mida, haddii kuwaasu aanay ahayn waxyaaba badan oo si cad looga baaraandagay shaxda, boqolleyda awood la'da fahamkeedu adagyahay ee aan lagu gaari karin habka xisaabinta caadiga wixii la xarirra dhimista hab-dhaqanka shaqada oo uu keenay mid kasta oo ka mida dhaawacyada, hasayeeshe waa in la go'aamiyaa iyadoo maanka lagu hayo sida ay giddigood isku saamaynayaan dhaawacyada naafonimada. Sida uu qabo faqradda hore ee xeerkaan, marka xaaladda naafonimada ay khusayso waaxyo ama xubno badan oo shaqadoodu isku xirantahay, qiimaynta dhan waxaa lagu go'aaminayaa isku daryo macquula oo lagu soo koobayo dhibatada ka bacdina waxaa go'aan laga gaarayaa inta ay la egtahay naafonimada koobaad marka loo eego wadarta hab-dhaqanka shaqada, marka ay jirto xaalad naafonimo oo ku saabsan waaxyo ama xubno badan ee cudurrada jirka qiimaynta waxaa lagu samaynayaa markasta iyadoo la xisaabinayo awood la'ida koobaad ee la xariirta boqollayda wadarta hab-dhaqanka shaqada, kan labaadna waxaa la tixracayaa boqllayda hab-dhaqanka soo haray iyo sidaas oo ay ku ii socon doonto.

**Qod. 75**
**Dhaawacyada Sababaha Isbiirsaday ee soo Jireenka**

Dhaqtarka wax qiimeeya iskama fogayn karo boqllayda awood la'ida lagu sheegay shaxda qodobka 73, haddii shaqaalaha ayaan-darradu ku dhacaday aanay sii silcin dhaawacyo hore u jiray oo ka madax bannaan ayaan-darrada, kuwaso keena natiijada cudurro ka sii culus marka loo eego ayaan-darradadu waxay noqon lahayd iyo heerka ay gaari lahayd. Xaaladaha naafonimada soo jireenka ah ee lagu sheegay faqradda kore waxaa loogu magacaabayaa "dhaawacyo isbiirsaday", si go'aan looga gaaro ficilladooda isbiirsaday ee sababay dhibaatada maskax-jireed ee hab-dhaqanka shaqada waa in tirada lagu daro qiimaynta awood la'da soo jireenka ahayd ee ku haray ayaan-darranaha.

**Qod. 76**
**Naafonimada Sababaha Isbiirsaday, iyo Wadajirka iyo isla jirka Iyaga ee Sababay ayaan-darrada**

"Sababaha isbiirdaday ee wax kama jiraanka ah" waxay dhacaan marka ay xaalad aan waxba ka jirin ay ku soo biiraan ama ka daba yimaadaan awood la'ida dhimashada ka dib oo ay sababtay ayaandarrada, iyada oo anay saamayn xaaladahii soo jireenka ah wixii horay u dhacay ama natiijada dhaawacyada ayaan darrada ka timid. Sababaha isbiirsaday ee la soo sheegay waxay noqon karaan kuwo wada dhacay oo sababa ayaandarrada ama caadiyan soo wada jiray.

Sida uu qabo xeerkaan waxaa loo tixgalinayaa "wadajira" awood-la'ida wax kama jiraanka ah loollanka runta iyo dhabta ah, ee isla qofka, laba ama naafooyin badan oo meelo kala duwan ka yimid oo la xariira dhawacyo midina aanay saamayn tadawurka kan kale, hasayeeshe marka ay isbiirsadaan saamayn ku reeba hannaanka hawlgalka xubnaha ama

hannaanada hawlaha xubno kala duwan, laakiin ay ka dhaxeyso xiriir hawlqabad ahaan isku xiran.

**Qod. 77**
**Sababaha Isbiirsaday ee dib ka Yimid**

Sababaha isbiirsaday ee dib ka yimid waxaa loola jeedaa falalka dhimashada keenay ee dhacay ayaan-darrada ka dib taaso wax ka baddashay natiijada. Dhaawacyada dambe waa in talada lagu daro qiimaynta awood la'ida idil ahaantood keliya marka la helo sababtooda, wax ku'oolka ah oo aan ahayn keliya wax marar ku dhacay, dhaawacyada ayaandarranaha.

Looma tixgelinayo sababo isbiirsaday ee dib ka yimid oo la magdhabi karo jirrooyinka dhimirka ama carqaldaha badan ee shaqsiga ee nooca cillad maskaxeedka ay keentay rabitaanka la falgala ogaal la'aanta shaqaalaha si uu ayandarrada uga helo waxtarka ugu badan, iyadoo sababaha naafonimada dhimirka la soo sheegay ay ka imaanayaan ama ka ratima keliya dhaqanka aan caadiga ahayn ee qofka.

**Qod. 78**
**Qiimaynta Awood la'ida Soo-jireenka ah ee Shaqada ka Baxsan ama ay Keeneen ayaan-darro ama Cudurrada xirfadaha ee ka Dhacay dibadda amase horay la xaq-Guday hanti ahaan**

Heerka hoos u-dhaca joogtada ah ee hab-dhaqanka shaqada, marka ay sii murjiso xaaladaha naafonimo oo qayb ka qaatay awood la'ida sababtay dhaawacyo ama cudurrda xirfadeed oo ka yimid falal ka baxsan shaqada amase dhaawacyada shaqada iyo cudurrada xirfadeed ee ka dhacay dibadda amase la xaq-guday hanti ahaan si waafaqsan qod.83 ee xeerkaan ama qod. 3 Qaraarka soo baxay 20 Maajo 1955, lr. 11 waa in laga soo warbixiyaa ma aha keliya hab-dhaqnka shaqda caadiga balse midka loo dhimay sababo xaalado naafinimo soo jireen awgood. Warbixinta waxaa lagu sheegayaa heerka xisaabta jajabka hooseeyaha kaasoo tilmaamaya soo jireenka hab-dhaqanka shaqo iyo jajabka sarreeyaha faraqooda u dhaxeeya iyo heerka ka soo hara ayaan-darrada/dhaawaca ka dib.

**Qaybta 3aad**
Hawlgabka Awood la'ida Soo-jireenka

**Qod. 79**
**Cabbirka Hawlgabka Awood la'ida Joogtada**

Marka la xaqiijiyo in ayaan-darrada/dhaawaca ama cudurrada xirfadaha ay keentay awood la'ida joogto ah taaso yareysay hab-dhaqanka shaqada wax ka badan boqolkiiba saddex iyo toban, waxaa la siinayaa hawlgab looga soo bilaabayo maalinta ku xigta maalinta ay si buuxda u joogsatay awood la'ida ku-meelgaarka, hawlgabka awood la'ida ku saleeysan qiimaha mushaharka waxaa lagu xisaabinayaa hadba sida uu qabo xeerar qodobbada 91 illaa 94:

1) wixii ku saabsan heerka awood la'ida boqolkiiba afar iyo toban ilaa boqlkiiba lixdan-iyo sagaal, qiimaha sare u socda ee heerka awood la'ida, sida ku cad shaxda Lr. 4, laga soo bilaabo boqolkiiba kontan iyo lix illaa boqolkiiba sagaashan iyo sagaal;
2) heerka awood la'ida boqlkiiba toddobaatan, qiimaha u dhigma boqolkiiba boqol.

Hawlgabka billaaha waxaa lagu soo koobayaa tobanlaha shilin Soomaaliga ku sii xiga: xab-dhaafka kuwa u dhigma ama ka sarreeya jajabka Sh. So. 0,05, wixii cillada ah ee ka hooseeya jajabka la soo sheegay.

## Qod. 80
## Hawlgabka Xaladaha Eernada (hernia) Calooleedka Dhaawac/jugta ka dib ee aan la qali karin

Marka ay jirto dhawac keenay eernada dhaawac/jugta ka dib ee ficil aaladeedeed dibadda, kaasoo wata dhaawacyo xiriira ee dhinaca caloosha, Wakaaladda wax caymisay waxay qaabilaysaa daaweynta iyo qalliinka keliya iyo bixinta gunnada awood la'ida ku-meelgaarka ah, marka laga reebo arrinta ku qoran qod. 70.

Mararka xaaladaha eernada aan la qali karin waxaa waajibaya xaqsiinta awood la'ida qaabka u degsan dhimista boqolkiiba shan iyo toban hab-dhaqanka shaqada, haddiba ay soo baxdo muran ku saabsan xagga qalliinka, go'aanka waxaa ka gaaraya dhex-dhexaadiyal guddi dhaqaatiira si waafaqsan qod. 100.

## Qod. 81
## Qoondaynta Lacag Dheeraad ah

Mararka ay jirto wax qabad la'aanta joogta ah ee buuxda oo ay sababeen naafonimada ku taxan shaxda lifaaqa lr. 2, kuwaaso ay lagama maarmaan tahay kaalmo shaqsiya ee joogto ah, hawlgabka waxaa lagu sii kordhinayaa qoondo lacageed ee ah shilin Soomaali bille ah muddada ay kaalmadaasu socoto. Lama samayn karo kororsiimaha marka kaalmada shaqsiga Wakaaladda wax caymisay ay toosa ka samaysay goobta la jiifiyay ama wakaalado kale.

## Qod. 82
## Xaqsiinta Magdhowga marka la Maleynayo in Awood la'ida ka timid ayaan-darro kala Noocyo ah

Marka xaqlaha magdhawga awood la'ida ayaandarrada ay soo gaarto ayaan-darro cusub oo mudan in laga bixiyo magdhawga awood la'ida, waxaa la socodsiinayaa hal magdhow oo lagu saleynayo heerka dhimista idil ee hab-dhaqanka shaqada oo ay sababeen dhaawacayadi ka yimid wixii hore ama ayaan-darradii hore iyo kuwa cusub iyadoo lagu qiimaynayo si waafaqsan xeerka qodobbada 73 iyo 74 iyo mushaarkii loo adeegsaday si loo go'aamiyo magdhowgii hore.

Haddiise mushaarkaasu ka yaryahay midka ay ahayd in lagu xaqsiiyo marka loo eego ayaan-darrada cusub, magdhowga cusub waxaa lagu saleynayaa mushaarka cusub ee dambe. Marka ayaan-darrada cusub, iskeed loo tixgaliyo, ayna sababto awood la'i joogto ah oo aan ka badneyn boqolkiiba saddex iyo toban iyo awood la'idu idil ahaanteed ayaa ka sarreyso amaba uu ka hooseeyo magdhawga horay lagu xaqsiiyay, hasayeeshe markasta uu ka sarreyo boqolkiiba saddex-iyo-toban, waxaa lagu xaqsiinayaa magdhow cusub sida uu qabo faqradda xeerka faqradda la soo sheegay.

Marka, ay jirto ayaan-darrooyin hore, oo reebay awood-li'i joogto ah oo aan dhaafsiisnayn boqolkiiba saddex-iyo-toban marka loo eego ayaan-daro cusub oo keentay awood-la'ida joogtada ah oo marka la isku daro ka sare marta wixii hore ee la soo sheegay, waxaa lagu xaqsiinayaa magdhow ku saleysan heerka dhimista hab-dhaqanka shaqada ee soo ifbaxay ka dib ayaan-darradii ugu dambaysay iyo mushaarka la siiyay xilliga kaasu uu dhacay.

## Qod. 83
## Gudidda Magdhowga ayaan-darrada leh Heerka awood la'ida Qaabka Joogtada ee aan ka badnayn Boqolkiiba labaatan

Xaqlayaasha magdhowga ayaan-darrada shaqada ee leh qaabka heerka awood la'ida joogtada ah ee aan ka badnayn boqolkiiba labaatan waxaa iqtiyaar loo siiyay in ay weydiistaan Wakaaladda wax caymisay, sanad gudahiis inta aanay dhaafin toban guurada sano ee taariikhda magdhowgu bilowday, bixinta lacgata iyo dhammaadka xaq kasta oo la

xariira heerka lacagta u dhiganta qiimaha raasulmaalka kale ee magdhawga u sugnaaday. Qiimaha raasamaalka magdhowga waxaa lagu salaynayaa xisaabta shaxda ku qoran qod. 15 iyado la tixraacayo taariikhda codsiga la keenay haddii aan laga jarin lacagahii magdhawga sida joogtada ah horay loo siiyay.

Marka laga hadlayo xisaabinta xaqsiinta ee faqradda la soo sheegay, haddii ay jirto sabab la rumaysan karo in aanay waafaqsanayn da'da runta ah ee ayaan – daranuhu sheegtay ama ku cad dokumentiyada dhalashada la soo bandhigay, da'da iyada waxaa lagu go'aaminayaa baaris dhaqtareed oo ay sameeyso Wakaaladda wax caymisay.

## Qod. 84
## Dib u Qiimaynta Magdhawga inta ay Hanashadu Socoto

Magdhawga idil ee la soo qaadanayay laga soo bilaabo taariikhta uu xeerkaanu dhaqan galay ayaan daarrooyinka dhacay wixii ka dambeeyay 31 Dicember 1961 waxaa dib loogu xaqsiinayaa qimaha ku saleysan mushaarka lagu caddeeyay qod. 79, iyado la tixraacyo sida lagu sheegay qod. 91 oo loo eegayo xuduudaha cusub, ugu yaraanta iyo ugu badnaanta, mushaarka sanadlaha. Magdhowga idil ee la soo qaadanayay laga soo bilaabo taariikhda dhaqangalka xeerkaan, ee la xariira xaaladaha ayaan-darrada dhacday wixii ka horreeyay 1 jannaayo 1962 waxaa dib loogu xaqsiinayaa qiimaha mushaarka ku cad qod. 79, iyado la tixraacayo qiimaha mushaarka dhabta ee cusub ee la siiyay ayaan-darranaha muddadi 12 bilood ee ka horreyay ayaan-darrada iyado lagu salaynayo dib uu qiimaynta:

a) boqolkiiba toddobatan, xaaladaha ayaan-darradii dhacaday sanadkii 1952;
b) boqolkiiba lixdan iyo shan, xaaladaha ayaan-darradii dhacaday sanadkii 1953;
c) boqolkiiba lixdan, xaaladaha ayaan-darradii dhacday sanadkii 1954;
d) boqlkiiba shan iyo konton, xaaladaha ayaan-darradii dhacaday sanadkii 1955;
e) boqlkiiba konton, xaaladaha ayaan-darradii dhacday sanadkii 1956;
f) boqlkiiba afartan iyo shan, xaaladaha ayaan-darradii sanadkii dhacaday 1957;
g) boqlkiiba afartan, xaaladaha ayaan-darradii dhacay sanadkii 1958;
h) boqlkiiba soddon, xaaladaha ayaan-darradii dhacaday sanadkii 1959;
i) bolkiiba labaatan, xaaladaha ayaan-darradii dhacday sanadkii 1960;
l) boqlkiiba toban, xaaladaha ayaa- darradii dhacday sanadkii 1961.

Xaaladaha lagu soo sheegay faqradda kore, caddadka magdhowga la xaqsiinayo kama hooseyn karo kamana sarreyn karo midkasta waxa u dhigma xuduudaha ugu yar iyo kan ugu badan ee mushaarka ku sheegan qod. 91 ee soo socda.

Xaqsiinta cusub waxay isku qaadanaysaa/fuuqsanaysaa gunna kasta ee bille ah oo ay bixisay Wakaaladda Caymiska, marka laga reebo qoondaynta dheeraadka ah ee ku saabsan kaalmada shaqsiga ee socota (81) iyo ka baxsan mararka xaaladaha hawlgallada lagu soo sheegay faqradaha hore, caddadka magdhowga dib loo xaqbixiyay uu ka yaryahay mid idil ee horay loo siiyay ayaan-darranaha cinwaan magdhow iyo gunno gaara. Xaaladahaas dambe Wakaaladda Caymisku waa sii wadaysaa bixinta faraqa u dhexeya kaaso ah qoondayn shaqsiya oo isku qaadan karta kororkii xigay ee raasamaalka cinwaan kasta ee uu laha

## Qod. 85
## Dib u-eegista Halbeegga Hawlgabka Awood la'ida

Halbeegga hawlgabka awood la'ida ka timid ayaandarrada dib ayaa loo eegi karaa, marka la helo codsiga xaqlaha hawlgabka ama Wakaaladda wax caymisay, haddii hoos u dhac ama sare u kac ku yimaado hab-dhaqanka shaqada iyo isbaddal ku yimaada xaaladaha jireed ee xaqlaha hawlgabka, haddii, marka xaaladdu ay ka sii darto, taasoo ka timid ayaan-darrada magdhowga ayaan-darrada lagu xaqsiinayo. Hawlgabka waa la joojinayaa marka ay muuqato xaaldaha awood la'ida dhimashada ka dib marka ay ka hoos martay heerkii ugu hooseeyay ee lagu xaqsiin lahaa. Arjiga dib u-eegista waxaa loo soo gudbiyaa Wakaaladda

wax caymisay waana in la soo raaciyaa warqadda dhakhtarka iyado la'aanteedna aan la socodsiin karin oo ay ku cadyihiin waxyaabaha ulajeeddooyinka idil iyo farsmo oo caddaynaya in sababta ayaan-daaradu ay uga sii dartay iyo ay ka muuqdaan halbeegga hoos u dhaca hab-dhaqanka shaqada.

Wakaaladda wax caymisay, lixdan cisho gudahoodoo ka soo bilaabata maalinta ay soo gaartay codsiga waa in ay ka jawaabtaa codsigaas isaga ah.

Haddi Wakaaladda wax caymisay ay diiddo in ay qabato codsiga, gebi ahaan ama qayb ahaan, ayaan darranuhuna aanu aqbalin dhimista ama joojinta magdhowga, muranka arrintaas ka dhasha waxaa lagu dabbaqayaa qod. 113 ee xeerkaan.

Xaqlaha magdhowga ma diidi karo baarista caafimaadka ay ku samaynayso Wakaaladda wax caymisay sida ku cad qodobakaan, xitaa haddii dhaqtar la seexinayo ama goob kale ee caafimaad.

Haddii uu diido, Wakaaladda wax caymisay waxay ka joojin kartaa gebi ahaan ama qayb ahaan magdhowga la siiyo.

Afarta sano ee hore oo ka soo bilaabata taariikhda dib u-eegista hore waxaa la codsan karaa ama la samayn karaa keliya marka ay ka soo wareegto hal sano taariikhda ayaan-darrada iyo weliba lix bilood marka ay ka soo wareegto magdhowga; mid kasta oo ka mida dib u-eegista xigta lama codsan karo lamana samayn karo haddii aanay ka soo wareegin sanad tii ka horreysay. Marka ay ka soo wareegto afar sano taariikhda magdhowga, dib u-eegista waa la codsan karaa waxaana la sameyn karaa keliya laba jeer, midda hore dhammaadka sanadka saddexaad iyo tan labaad marka ay muddaadaas dhammaato, soddon cisho gudahood dhammaadka saddexda sano ee xigta.

Tobon sano gudahood marka laga jooogo taariikhda ayaan-darrada, marka xaaladda Ayaan-darranaha la caddeeyo in uu bugsooday iyadoo aan la samayn baarista awood la'ida dhaawaca joogtada ka dib, ama baarisyo aan gaarsiisnayn heerka ugu hooseeya ee magdhabidda, uu ka sii daray sababo la xariira ayaan-darrada illaa uu gaaro heerka magdhabidda, ayaandarranaha isaga ah wuxuu weydiisan karaa Wakaaladda wax caymisay xaqsiinta magdhowga, iyado codsiga loo soo diyaarinayo qaabka iyo shuruudaha loo dejiyay dib u-eegista magdhowga haddii hawshu sii xumaato.

### Qod. 86
### Bilowga Magdhowga Cusub marka wax laga Baddalo ka Bacdi dib u-eegista

Dib u-eegista ka bacdi cabbirka magdhowga marka wax laga baddalo, isbaddalkaas wuxuu ka bilaabanayaa lacag bixinta ugu horreysa ee muddada dhicitaanka/dhammadka xiga ee la xariira muddada la codsaday dib u-eegista.

## Qaybta 4aad
Magdhowga Dadka Nool

### Qod. 87
### Cabbirka magdhowga dadka nool ee caymiska ku jira

Haddii ayaan-darranuhu ay dhimasho ku timaaddo, dadka nool oo hoos ku tilmaaman waxay helayaan magdhow ku salaysan faqradaha soo socda, oo u dhiganta boqlkiiba siddeetan xisaabta mushaarkiisa sida ku xusan qodobada 91, illaa 94.

1) Boqlkiiba afartan xaaskiisa illaa ay ka geeriyooto ama guur cusub ay gasho;

xaaladdaas labaad waxaa la siinayaa lacag u dhiganta magdhowga saddex sanadle. Haddii qofka nool uu yahay saygii, magdhowga waxa la siinayaa keliya marka hab-dhaqankiisa shaqda uu si joogto ah uu ka yaraado saddex meelood hal meel. Wax xaq ah uma

sugna sayga/xaaska haddii uu jiro xukun furriin ah ama kala tag shaqsiyeed oo dhaqan galay oo ku yimid sabab isagu uu leeyahay ama labada isqaba ay wada leeyihiin;

2) boqolkiiba labaatan canug kasta oo sharci ah, aan nikaax ku dhalan, la aqoonsaday ama la aqoonsan karo, la korsaday illaa uu ka gaarayo siddeed iyo tobon jirka, iyo boqolkiiba afartan haddii ay yihiin agoon labada waalid iyo, xaaladaha caruurta la korsaday, xitaa haddii ay geeriyoodeen labadooda waalid. Caruurta nool ee shaqaalaha ayaan-darrada marka uu geeriyoodo, ee aan hayn shaqo lagu mushaar qaato, tirada lacagtaas waxay u soconaysaa ilaa uu ka gaaro da'da koob iyo labataanaad, haddii ay arday yihiin. Haddii dadka nool ay yihiin caruur qaba awood la'i shaqo, magdhowga waxaa la siinayaa inta ay socoto xaaladda awood la'ida. Dadka nool waxaa ku jira kuwa lagu soo sheegay lambarkaan, laga soo bilaabo maalinta dhalashada, ilmaha calool galay taariikhda ayaan-darrada. Haddii aan si ka duwan loo caddayn, waxaa loo qaadanayaa in ay calool galeen laga soo bilaabo taariikhda ayaan-darrada ilma ku dhashay saddex boqolo cisho gudahood taariikhdaas.

3) Haddii aanay jirin dad nool ee lagu soo sheegay lambarrada 1, iyo 2, boqolkiiba labaatan mid kasta oo ka mid ah faraca iyo waalidiinta wax korsaday, haddiiba ay la noolaayeen qofka dhintay illaa ay ka geeriyoodaan.

4) haddii aanay jirin dad nool ee lagu sheegay lamabarrada 1, iyo 2, mid kasta oo ka mid ah walaalaha, wiilal iyo gabdho, waxaa la siinayaa boqolkiiba labaatan, haddii ay la noolaayeen aan-darranaha iyadoo loo eegayo xudduudka iyo shuruudaha u degsan caruurta. Caddadka lacagta u sugnaatay dadka nool ee la soo sheegay midkasta inta u qoondaysan kama badnaan karo qiimaha mushaarka oo idil sida kor lagu soo xisaabiyay. Marka cadadka lacagta la soo sheegay ay ka badato mushaarka, magdhowga keli ahaaned waxaa la yareynaya wax ku dheellitiran xadkaas. Haddiiba uu isataago mid ka mida ama ka badan magdhowga, waxa soo haray waxaa dib loogu midaynayaa illaa la tartansiiyo xudduudka la soo sheegay. Midaynta magdhawga keli ahaaneed sina uma dhaafi karo qaybta mid kasta xaqlayaasha u sugnaatay sida uu qabo faqraddda la soo sheegay.

Xaqa magdhawga u sugnaaday qaraabada waxay ka dhalanaysaa xeerkaan mana u sugna haddii ay yihiin dhaxaltooyo, hasayeeshe haddii ay u sugnaatay shuruudaha uu dhigayo xeerkaan isaga ah. Qaybta ama qaar ka mida xaqsiinta magdhowga Wakaaladda wax caymisay ee keli ahaan u sugnaatay xaqlayaasha waxay noqonayaan magdhow jira oo iskiis u taagan.

Waxaa sii dheer magdhowga kor lagu soo sheegay oo la siinayo hal qoondo xaaska laga dhintay ama sayga naagtu ka dhimatay xitaa haddii uu shaqayn karo, marka laga reebo sida ku qoran faqradda sadexaad lr. 1 ama, haddii aanay jirin waxa la siinaysa caruurta ama, haddii kuwaani aanay ku jirin, waxaa la siinayaa asalka. Haddii aanay jirin dad nool ee ka mida kuwa la soo sheegay, qoondaha lacagta waxaa la siin karaa dad kale oo ka mid ah qaraabada qofka geeriyooday marka ay muujiyeen in ay galeen kharash gaara ee la xariira geerida qofka dhintay.

Caddadka qoondaha lacagtu waa:

a) shan-boqol oo shilin Soomaali marka uu sayga/xaaska nool aanu caruur lahayn oo leh shuruudaha lr. 2 ee qodobkaan;

b) siddeed-boqol shilin Soomaali marka sayga/xaaska nool uu caruur leeyahay oo leh shuruudaha la soo sheegay;

c) lix-boqol shilin Soomaali marka ay noolyihiin caruurta keliya;

d) afar-boqol shilin Soomaali xaaladaha kale.

Marka la eego dhaqan galka xeerkaan caruurta waxaa la maqam ah faraca kale ee nool ee uu lahaa qofka geeriyooday oo ah agoon labada waalid ama caruurta waalidiinta aan shaqayn karin, xulufada iyo kuwa kale ee si joogta ay u xilsaaran yihiin, waxay la maqaam yihiin asalka xulufada iyo dadka si joogto ah ugu xilsaaran.

Haddii shaki ku jiro da'da dhabta ah ee dadka nool ee ku xusan lr. 2 iyo 4, kaas waxaa lagu go'aaminayaa qaabka lagu sheegayo qodobka 83.

**Qod. 88**
**Xaqsiinta Hantiyeed Saamiga qaybta Magdhowga Dadka Nool**

Dadka nool ee lagu soo sheegay qodobka la soo dhaafay waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay weydiistaan in Wakaaladda wax caymisay ay bixiso ama soo afjarto xaqa ku taxaluqa, qaddar lacag la mida qiimaha hantida boqolkiiba labaatan magdhowga xaqsiinta iyaga la siinayo, iyadoo go'aanka la xariira lagu gaarayo is-afgarad dhexdooda ah oo lagu muujinayo caddayn iyo codsiga xaqsiinta oo la soo gudbiyo muddo aan ka badnayn soddon cisho gudahood oo ka bilaabata taariikhda la sameeyay magdhowga.

Qiimaha hantiyeed ee magdhowga waxaa lagu xisaabinayaa shaxda qodobka 15 iyado la tixraacayo taariikhda codsiga la soo gudbiyay waxaase laga jarayaa magdhowga lacagihii la bixiyay taariikhdaas wixii ka dambeeyay.

Dhaqangalka xisaabta xaqsiinta lagu soo sheegay faqradda la soo dhaafay, haddii uu shaki ku jiro xagga da'da dhabta ah ee dadka nool, waxaa la dabbaqayaa sida ku qoran faqradda ugu dambaysa ee qod. 83.

**Qod. 89**
**Fikradda la-Noolaashaha**

Sida uu qabo qod. 87, la-noolaashaha waxaa lagu caddaynayaa marka ay caddaato kuwa faraca iyo qaraabada ku hareeraysan (35 x.m.s) marka ay kula suganyihiin iyado aanay jirin qaab nololeed madaxbannan ee ku filin iyaga xannaanadooda iyaga oo si gooniya oo wax ku oola kula loollama qofka geeriyooday. Sida uu qabo qod. 87, faqradda 1, hab-dhaqanka shaqada waxaa loo tixgalinayaa marka si joogto ah loo dhimo wax ka yar saddex meelood marka sayga laga dhintay laga joogo da'da lixdan iyo shan sano geerida xaaska ayaan darrada ku dhacaday.

Haddii ay jirto shaki hubaal la'aan xagga da'da, arrintaas waxaa go'aan looga gaarayaa qaabka faqradda ugu dambaysa ee qod. 83.

Xaqiijinta la-noolaashaha Wakaaladda wax caymisay waxay arrintaas ka ixtimaali kartaa akhbaarta xafiisyada canshuurta iyo xaafiisyada kale ee dawladda waxaa kaloo la weydiisan karaa baaris uu sameeyo ciidanka boliiska. Dhammaan xafiisyada la soo sheegay waa in ay siiyaan Wakaaladda wax caymisay macluumaadka la weydiistay qaabka uu qoysku ka koobanyahay iyo la-noolaashaha ee qod.87, sidoo kale waa in ay xogta qoyska si lacag la'aana ku bixiyaan, shahaadooyika jiritaanka nolosha iyo waraaqaha dhalashada oo ay weydiisato Wakaaladda wax caymisay iyo xaqlayaasha magdhowga ayaan-darrada si ay u helaan xaqsiinta magdhowga iyo bixinta qaybta lacagaha la xariira.

## Qaybta 5aad
Mushaarka

**Qod.90**
**Go'aan ka Gaarista Mushaarka Magdhowga loola Jeed**

Marka la eego cabbirka go'aaminta gunnada awood la'ida ku-meelgaarka ah (68), ee madhowga awood la'ida joogtada aha (79) iyo magdhowga dadka nool (87) saldhigga mushaarka la qaadanayo waxaa lagu xaqiijinayaa sida uu qabo qodobbada 91 iyo 94 ee xeerkaan iyo qod 34 ama, wixii ku saabsan safarrada badda, qodobbada 36, 37.

**Qod. 91**
**Saldhigga Mushaarka lagu Gaarayo Gunnada Xaqsiinta**

Wixii ku saabsan xaqsiinta magdhowga awood la'idda joogtada ah (79) iyo magdhowa dadka nool marka aan loo baahnay in la dabbaqo qod.91, waxaa laga qiyaas qaadanayaa sanadle ahaan mushaarka dhabta ah ee la siiyay Ayaan- darranaha, ha ahaato lacag iyo ama mid cayn kale ah inta lagu jiray laba iyo tobanka bilood ee ka horreysay ayaan-darrada.

Haddiba ayaan-darranaha, sababa kale wax ka yimid ee ka madaxbannaan noocyo shaqooyin gaara ee uu qabtay oo aanu si joogto ah u qaban hawlahiisa intii lagu jiray muddada la soo sheegay ama aanu ka hawlgalin hal loo-shaqeeye keliya amase aan la go'aamin karin wadarta lacagaha uu qaatay mudddadaas iyada ah, mushaarka sanadlaha waxaa lagu qiimaynayaa wax la eg saddex-boqolo jeer mushaarka maalinlaha. Sida ku cad faqradda la soo sheegay, mushaarka malinlaha waxaa loo tixgalinayaa qaybta lixaad tirada lacagaha ka soo baxa iyadoo la soo bandhigayo saacadaha shaqada caadiga ee toddobaadka, ee uu si joogta ah iyo si isku xiga uu ka qabtay urur-hantiyeedka qaybta uu ka tirsanyahay ayaan-darranuhu, dhexdhexaadka waxa uu ka helay ayaan-darranaha isaga ah saacadaha shaqo xitaa loo-shqeeyaal kale ee ka dambeeyay illaa maalinta ay soo gaartay ayaan-darradu, oo aan ka badneyn laba iyo toban bilood, taaso ay suurtagal tahay in la hubiyo waxa uu hantiyay.

Sikastaba mushaarka sanadlaha waxaa la xisaabinayaa ugu yaraan shan-boqol oo shilin illaa ugu badnaan shan-kun oo shilin.

Wixii ku saabsan xaqsiinta gunnada awood la'ida joogtada ah (68), marka aan loo baahnayn in la dabbaqo qod. 93 mushaarka laga qiyaas qaadanayo saldhig ahaan waa mid la mida mushaarka maalinlaha laga helo habraaca faqradda saddexaad, iyadoo la xisaabinayo faa'idada laga helo dhex-dhexaadka saacadaha shaqada toddobaadkii ugu dambeeyay sida ugu dhaqsiyha badan ee ka horreyay ayaan-darrada.

**Qod. 92**
**Cabbirka Mushaarka lagu Xaqsinayo Gunnada Xirfad-bartayaasha**

Haddii ayaan-daranuhuu uu yahay xirfad-barte (58 Xeerka Shaqada) amase uu ka yaryahay da'da siddeed iyo toban jirka, wuxuu xaq u leeyahay in la daaweeyo sida ku xusan qod. 98 iyadoo loo xisaabinayo waxqabadka lacag ahaan, sidaan ayaa lagu go'aaminayaa:

a) gunnada awaaod la'ida joogtada hubanti waxaa la siinayaa keliya mushaar u dhigma mushaarkii jiray sida ku xusan qod. 91;

b) magdhowga awood la'ida iyo magdhowga dadka nool waxaa lala mid dhigayaa mushaarka maqaamka bilowga u degsan dadka caymiska ku jira oo ka weyn da'da siddeed iyo toban jirka ee aan ahayn xirfad-barteyaasha oo isla shaqadaas qabta oo xirfad-bartayaasha iyaga ama da'yarta ka tirsan iyado aan laga yareyn karin mushaarka ugu hooseeya oo ay qaataan kuwa ka da'da weyn; da'da siddeed iyo toban jirka oo isla xilkaas qabta.

Mararka xaaladaha la soo sheegay aan mushaar la qaadan amase aan la xaqiijin karin, hawlqabadka lacagta waxaa lagu saleynayaa shaxda mushaarka lagu xusay qod. 93 ama, haddii taas la waayo, waxaa lagu saleeyanaya waxaa la siiyo hawlqabadyada dadka la mid ah ay ka qabtaan isla goobtaas iyo isla xilkaaso iyo shaqada.

Markasta iyadoo laga reebayo arrinta ku xusan faqradda afaraad qod. 91

**Qod. 93**
**Mushaarka la isku-afgartay**

Markii urur-hantiyeedka laga doonaya shuruudo gaar ah ama shaqooyinka, ama qaybo nooca ka mid ah urur-hantiyeedka ama shaqooyinka sida warshadaha sida joogtada aan u shaqayn, kuwa la qabto marka ay habboontahay, xilliyeedka ama shaqada tacbaysiga, taaso

ku soo baxaysa dekereto Wasaaradda Shaqada, xaafiis ahaana waxaa la jidayn karaa marka ay codsato Wakaaladda wax caymisay, shax mushaar bixin dhex-dhexaad ah ama la isku afgarto oo lagu saleeyo xaqsiinta gunnooyinka, iyadoo aan loo gafayn faqradda afaraad qod. 91, tiradana lagu darayo in mushaarka is-afgaradka lagu go'aamiyo hadba inta uu la egyahay dhex-dhexaadka faai'iida caadiyan ay kasbadeen kuwa haya hawlqabadyada shaqada inta lagu jiro sanadka oo idil xitaa loo-shaqeeyeyasha ka sii dambeeya

**Qod. 94**
**Xaqsiinta Gunnada Mushaarka waxku'oolka**

Haddii mushaarka dhab ahaan la siiyay ayaan-darranaha uu ka badanyahay midka ku qoran diiwaangelinta ku xusan qod. 29, Wakaaladda wax caymisay waa in ay gunnada ku bixisaa mushaarka dhabta ah, marka laga reebo marka la dabbaqayo ciqaabta ku xusan qod. 25.

Wakaaladda wax caymisay sidoo kale waa in ay bixisaa gunno dheeraad ah haddi taas lagu xaqiijiyay garsoorka ama qaabab kale ee xeerarka jira oo caddaynayaan in mushaarka la qaatay ee lagu saleeyay xaqsiinta uu ka hooseeyo midka uu xaqa u lahaa sida uu xeerku qabo, marka laga reebo, xitaa xaaladdaan, dabbaqidda ciqaabta ku xusan qod 25. Amarrada ku qoran qodobkaan laguma dabbaqi karo xaaladaha ku xusan qodobka la soo sheegay.

**Qaybta 6**
Xeerarka Guud ee u Degsan Xaqsiinta iyo Bixinta Gunnada

**Qod. 95**
**Lacag Bixinada Haftada ee Magdhwga**

Magdhowga awood la'ida iyo kuwa dadka nool waxaa lagu bixinayaa si hafto ah oo la sii horumariyo bille, saddex-biloodle iyo lix-biloodle, iyadoo loo eegayo nooca magdhowga isaga ah sida uu qabo xeerka Wakaaladda wax caymisay.

Haddii geeri ku timaaddo xaqlaha magdhowga waxaa dhaxaltooyada la siinaayaa idil ahaan (83/3) qaybta lacag bixinta waqtiga la joogo.

**Qod. 96**
**Bixinta Wakiilnimada lagu Dablnayo Gunada Sharciga**

Gunnada lagu mutaysto xeerkaan, xaqluhu wuxuu siin karaa wakaalad lagu dalbanayo keliya marka ay jiraan caqabado sharci ee ku saabsan sayga/xaaska keliya ama qaraabada darajada koobaad (36x. m) ama mid ka mida kuwa ay ka dhexeeyso xaqa gunnada doonisteeda iyada ah (87). Wakiilnimada waa in laga hubiyo madaxda maxalliga ama, qunsuliyadda Soomaalida, marka deggannku yahay meel dalka ka baxsan.

**Qod. 97**
**Wax kama Jiraanimda Waajbaadka lagu Mushaar Siinayo Dallaaleyda**

Waxba kama jiraan waajibaadka lagu gaaray in lagu mushaar siiyo dallaaley dano ka leh xaqsiinta iyo bixinta gunnada uu sharciganu jideeyay. Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ah kun illaa saddex kun oo shilin Soomali:

a) dallaaleyda, ulajeeddo faa'ido awgeed ku siiya kuwa wax caymiyay iyo xaqlayaasha shaqa ay qabteen ama wax kale oo looga danleeyahya faqradda la soo dhaafay;

b) kuwa, xaafiis ahaan, ka warhela ayaan-darrada dhacday oo wargeliyay dallaaleyda si wax loogu siiyo shaqada ay qabanayaan ama waxyaaba kale sida ku cad faqradda xarafka a).

## CINWAANKA 3AAD
Hawlqabadyada Caafimaadka iyo ka Hortagidda

### Qod. 98
### Tilmaamaha iyo Qasadka Waxqabadka Caafimaadka

Wakaaladda wax caymisay waa in ay wax qabataa qofka caymiska ku jira xaaladaha ayaan-darrada uu xeerkanu sheegayo, marka laga reebo arrimaha ku xusan qodobbada 70 iyo 105, daryeellada caafimaadka, qalliinka iyo daawaynta wixii la xariira ee loo baahdo, inta ay jirto xaaladda awood-la'ida ku-meelgaarka ah, iyo xitaa ka dib marka uu ka bogsado dhaawacyada, illaa ay soo laabaneyso suurtagalnimada halka ugu sarreeya awooddiisa shaqo.

### Qod. 99
### Gurmadka Deg-degga ah

Marka Wakaaladda wax caymisay aanay qaban karin hawlqabadyada adeegga deg-degga, ha ahaato bukaan socotadeeda, bixinta sanduuqa gurmadka deg-degga, ama ha kula heshiiso wakaalado iyo rugo caafimaad maxalliya, loo shaqeeyuhu waa inuu ku qabtaa qalabkiisa iyadoo Wakaaladduna kharaska uu galay u soo celinaysa haddi isagu uu si toosa u qabtay gurmadka deg-degga. Loo-shaqeeyuhu sikastaba waa inuu diyaariyaa gaadiidka lagu qaadayo ayaan-darannaha isagoo ay dushiisa tahay kharashka la xariira arrintaas (104 Xeera Shaqada).

Loo-shaqeeyaha waa inuu baraa shaqaalahiisa magacyada dhaqaatiirta iyo goobaha Wakaaladda wax caymisay ay u qoondaysay daryeelka caafimaadka.
Tarjumaadda Sharciga Caymiska Qod.100 – 142aad.

### Qod. 100
### Dhaawacanuhu waa ku Waajib in uu Oggolaado Daaweynta iyo Qalliinkaba ay u soo Qortay hay'adda uu ka Caymisan yahay

Haddii dhaawac gaaro, dhaawacanaha uma bannaana, haddii aysan jirin arrin cudurdaar leh in uu diido ka faa'ideysiga meesha ugu dhow ee daweynta ama diido daweyntii ay u soo qortay hay'adda caymisku ama isaga baxo isla sidaa.
Hubinta sababta uu ugu guuldareystay in uu sheego meesha daweynta ama diidmada iyo guldareysiga daweyntaba hay'adda caymiska, marka dhaawacanahu uusan hayn cudurdaar sax ah oo ku saleysan wax la taaban karo oo huba, waxay siinaysaa mar kale sida ku xusan nidaamka farqada 5aad.

Dhibbanaha ma awoodo, haddii aysan jirin sabab macquul ah, in uu diido in uu maro falal howleedka ay hay'adda caymisku u aragto in ay lagama maarmaan u tahay.
Hubinta sababta diidmada waa lagu weydiinayaa xunkunka aan ka noqosho lahayn, haddii la xaqiijiyo ee guddiga dhex dhexaadinta uu ka mid yahay dhaqtar ay soo magacaabatay hay'adda caymiska iyo dhaqtar uu soo magacawday dhibbanuhu ama la'aantood guddoomiyaha maxkamadda gobolka iyo dhaqtar sadaxaad oo ay soo xushay wasaaradda caafimaadka. Haddii dhaqaatiirta dhinacyadu ay isku raacin xulidda dhex dhexaadiyaha sadaxaad, waxaa soo xulayo wasiirka caafimaadka.

Garsoorka, waxaa dhaqaajinayo hay'adda caymiska ama dhibbanaha 15 maalmood gudahood oo ka bilaabata caddeynta dhacdada ama xaqiijinta diidmada. Diidmada cudurdaarka lahayn ee dhibbanaha in la marsiiyo falal howleedka, waxay keeneysaa in uu lumiyo xuquuqdii magta ee naafanimada ku meel gaarka iyo hoos u dhaca dakhliga qiyaasta la qaderiyay taas oo noqon lahayd in la jaro, haddii caynsanuhu uu mari lahaa falal howleedka hay'adda caymiska uga baahneed.

**Qod. 101**
**Jiifinta Dhibbanaha Goobaha Caafimaadka; Siinta Lacagta Dhexgalka inta uu Jiifo iyo ka dib Qiimeynta Dakhliga**

Fulinta daweynta ee qodobbada hore iyo xitaa ujeeddada qiimeynta, hay'adda caymisku waa u diyaarin kartaa dhibbanaha isbitaal ama goob kale oo cafimaad oo ay tilmaantay isla hay'addu.

Isbitaaleynta ayaa ah sariiraha caadiga ah kharajkana laga dabaqa, haddii ay san horay u jirin heshiis caynsanahuna ku lahayn xuquuq taakuleyn bilaash ah ama lacag la'aan ah, waxaa laga soo qaadayaa heerka ugu hooseeyo oo isbitaalladu ku dhaqmaan.

Xitaa ka dib marka la xisaabiyo megta naafo ilaa heerka ugu sareeyo megta ee naafada, hay'adda caymiska waa u banana tahay in dhibbanaha loo diro daweyn dhaqtar gaar ah iyo qalliimo oo ay ka mid yihiin falal howleedka, goorta loo arko in ay faa'ido u leedahay dib u soo celinta awooddiisa shaqo.

Muddada daweynta iyo inta dhibbanuhu uusan awoodin in uu tago shaqadiisa, hay'adda caymiska ayaa dhameytireysa dakhliga naafanimada ilaa heerka ugu sareeya megta naafada kumeel gaarka ah.

Haddii dhibbanuhu uu diido daweynta faqrada 2aad, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka qod. 100aad.

Haddii guddiga dhaqaatiirtu u gartaan in diidmadu cudur daar lahayn, hay'adda caymisku hoose ayey u dhigi kartaa dakhliga megta naafo qiyaas ay go'aamiyaan guddigu.

**Qod. 102**
**Xiriiirka Maamulka Cusbitalada, Haddii la Jiifinayo Dhibbanaha**

Maamulka cusbitaalladu ma u diidi karaan in ay jiifiyaan qofka dhibku ku soo gaaray shaqo, waana in si dhaqso leh la ogeysiiyaa jiifinta hay'adda caymiska ugu dambeyn labo maamood gudahood si ay u bixiso hay'addu kharashaadka cusbitaalka, marka dhaawacu yahay mid megeed sida uu qabo sharcigaan jiifintana hay'addu oggolaatay.

Hay'adda caymisku, waxay xaq u leedahay in dhaqaatiir ay aaminsan tahay baaraan dhibbanaha isagoo cusbitaalka jiifa.

Maamulka waa ku waajib in ay mar kasta si xili xili ugu yaraan usbuucle u wargeliyaan hay'adda caymiska si ay u la socoto daweynta dhibbaneyaasha ay soo jiifisay ugana war qabto hay'addu dhabbanaha iyo intii ka samatabaxday waraaqaha caafimaad iyo qalliin ee la xiriira in la siiyo/daayo nuqul dhameystiran hay'adda caymiska goorta ay soo codsato.

**Qod. 103**
**Xaqa Xakameynta Daweynta**

Hay'adda caymisku, waxay xaq u leedahay in ay ku xakameyso sida ay u socoto daweyntu dhaqaatir ay aaminsan tahay goob kasta ay ku howl galaan waana ka wareejin karaan dhibbanaha goob caafimaad oo hay'addu lafteedu u sumaday.

Ujeeddadaas, waxaa lagu dhaqaa goobaha caafimaadka iyo dhaqaatiirka gaar, waana in ay oggolaadaan dhammaan baaritaannada ay siisay hay'addu kana mid noqonayo dhammaan xogta waraaqo iyo wixii ay weydiisato.

**Qod. 104**
**Waajibaadka Daweynta Maragkaca; Abaal Gudka Dhaqaatiirta Maragkacda**

Dhaqaatiirta cusbitaallada ama goobaha bukaansocodka dowladda iyo meelo kale ee caafimaad ma diidi karaan daryeelka gargaarka koowaad iyo daryeelka dambe ee bukaansocodka ama hubaalinta cawaaqibka dhawaaca shaqo haddii laga codsado, waxayna

ku qasban yihiin in ay u soo saaraan hay'adda caymiska maragkacyada la xiriira waqti aan ka badneyn shan beri gudahood goorta ay adeega qabteen.

Abaalmarinada ay filayaan goobaha caafimaadka ee gaar maragkacyada kor ku xusan hay'adda caymiska ayaa u bixinaysa sida soo socota;

1) Maragkaca dhaqtareed ee koowaad waa Sh.So.shan.

2) Maragkaca kasta ee sugaya sii jiritaanka naafo shaqo Sh.So.labo, waase la gaarsiin karaa abaal marinta heerkeeda sare toban ah Sh.So., tiro kasta ha ahaatee maragkac taxanaha ah oo wada tilmaamaya hal dhib ah.

3) Maragkaca ugu dambeya ee joogtada ahaa waa Sh.So. sadax.

4) Daryeelka bukaan socodka daweyn iyo qalliinba oo ay ku jiraan qalab caafimaadka la siiyay oo ay ka baxsan yihiin cirbaduhu, talaalka iyo duubidda, abaalmarintooda, waxaa ka heshiiya hay'adda caymiska iyo maamulka rugta gaar ee caafimaad oo dhibbanaha lagu daryeelay.

**Qod. 105**
**Iska Daweynta dhibbanaha dhaqaatiir aysan u Dirin hay'adda Caymisku**

Haddii degmada ama gobolka ay ka jiraan rugo caafimaad ee ay horay ugu sheegtay hay'adda caymisku, balse dhibbbanuhu uu iska daweeyay rug kale caafimaad, kharajka la xiriira daweyntaas, waxaa bixinaya dhibbanaha.

**Qod. 106**
**Ganaaxyada**

Dhaqaatiirta, madaxda maamulka cusbitaallada iyo rugaha caafimaad ee aan u hoggaansamin nidaamka ku xusan qodobbada 100aad ilaa 104aad, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax cadad kala duwan leh oo ka bilaabma Sh.So. konton ilaa Sh.So. boqol.

**Qod. 107**
**Abaal Marinta Qubarada aafimaad ee ka mid ah Guddiga dhex Dhexaadinta hubinta Sababaha Diidmada Daweynta loo qoray**

Abaalmarinta uu leeyahay dhaqtar kasta oo ka mid ah guddiga dhexdhexaadinta, oo ku xusan qodobada 100aad iyo 101aad, waxaa bixiya guddomiyaha maxkamadda gobolka qader ah Sh.So. 80 iyo Sh.So. 100 dhex dhexaadiyaasha dhinacyada iyo Sh.So.120 dhexdhexaadiyaha sadaxaad oo aan cidna ka socon.

Guddomiyaha maxkamadda gobolka ayaa ku xaddidaya xeer ka noqosho lahayn sida ay kala yihiin culeyska abaalmarinta horay loo soo sheegay iyo isbedelka kharajyada soo bixi kara, waxay dusha ka saaran yihiin hay'adda caymiska oo caymisay dhibbanaha.

**Qod. 108**
**Bixinta Qalabka la Gaashanto**

Hay'adda caymiska ayaa u xil saran bixinta hore qalabka la gaashaanto oo ay ka mid yihiin ka gaashanka aragga qalabkaas oo lagu yareynayo xadka naafada iyo cusbooneynsiintoodaba marka la gaaro waqtigii ay hay'addu ugu talo gashay si ay ujeeddada oo ah hab sami u fulinta dammaanad qaadka qalabkeeda dhanka dhibbanaha, marka cillad farsamo ama jabni oo aan loo nasbeyn karin dhibbanaha.

Daryeelka ilkaha, waxaa bixinaya hay'adda caymiska oo kali markii la hubiyo in ay jirto waayid dhowr ilkood oo wax ugu dhinta si halis ah howsha calaalinta.

## Cutubka 4aad

Habraaca Maamul iyo fal Garsoor

### Qod. 109
### Xilka Sugidda

Caynsaneyaasha codsada howlaha ku xusan qod.65aad waa in ay keenaan caddeynta dhaawaca iyo jirroyiinka shaqo ee ka dhashay uu kana soo warbixiyay. Waayoo taasoo khuseysa dhaawaca, Cadeyntaas waa in ay ka koobnaato oo ay muujisaa sida iyo waqtiga waxyeelladu dheceen iyo waxaa dhaliyay dhibaatadaas iyo fursada shaqo iyo waxyaabaha isku xiraya shilka sida uu qabo nidaamka qod.6aad faqraddiisa 1aad.

Haddii uu geeriyoodo caynsanuhu, xilka culeyska caddeynta ee ku xusan faqradda hore waxaa laga doonayaa kuwa ka badbaaday xaqna u leh caymiska.

### Qod. 110

### Xaqiijinta Shilka in la Megdhabi karo iyo Muddada la Bixinayo Megta Naafada ku meel gaarka ah

Marka aad hesho war gelinta shilka oo ay la socoto warqad dhaqtar oo cadeyneysa in caynsanuhu shaqo aadi karin, hay'adda caymiskuna hubisay in la megdhabi karo shilka sida uu qabo sharcigaan, waxay ku dhaqaaqeysaa muddo gaaban, si kasta oo ay tahay aan dhaafi karin labaatan beri maalinta shilka in ay siiso dhibbanaha megta naafada ku meel gaarka (68).

### Qod. 111
### Wargelinta Dhaawacanaha Megtiisa la Bixiyay Dakhliga ku meel gaar ah

Marka uu helo warqadda dhaqtarka oo sugeyso natiijada ugu dambeysa ee dhaawaca, hay'adda cayminta waa war gelinaysaa si dhaqso ah dhaawacanaha taariikhda ay ka joogsatay megta naafada ku meel gaarka, haddiise ay jiraan cawaaqibiyo aan la saadaalin oo astaamo joogta ah leh ee la megdhabi karo sida uu qabo sharcigaan.

Haddii cawaaqibkaas la arki karo, hay'adda caymisku, waxay ku dhaqaaqeysaa hubin baaritaannadii dhaqaatiirta si ay u caddeyso nooca iyo heerka naafanimada joogtada ee shaqo, muddo soddon maalmood ah goorta ay hesho caddeynta dhaqtarka faqrada hore ku xusan, waxayna ku war gelinayaa dhaawacanaha liltirka dakhliga naafada, una sheegayso shayga saldhiga ay u adeegsadeen liltirkaas.

Haddii, xaaladaha dhaawaca aan weli la hubin karin heerkooda joogto ee naafo, hay'adda caymisku, waxay bixinaysaa qiyaas dakhli oo ku meel gaar ah, bixineysana digniin xilliga kor ku xusan daneeyaha, iyadoo ay u keydsan tahay in uu sii wado ilaa liltirka kamadambeysta.

Haddii ay jirto megdhow lacageed ee uu diiday dhibbanuhu maxkamadda ayaa go'aan ka gaareysa, midkaan dambe ilaa inta ay ka dhamaaneso xukunku waa ku qasab bixinta megdhowgii ay bixisay.

### Qod. 112
### Xiriiirka Dhibanaha ay ku yeelan karto Tallaabta Diidmo ee hay'adda Caymiska

Haddii hay'adda caymintuna u maleyso in aysan ku qasbanayn bixinta wax u qabashada, waa in ay ku war gelisaa dhibbanaha iyo dadka xaqiisa leh (87), iyadoo u cayimeysa sababaha tallaabtaas loo adeegsaday.

## Qod. 113
## Ka Dhiidhinta Dhibbanaha Xagga go'aanka Hay'adda Cayminta

Dhibbanaha aan dib u eegin saldhigga sababaha ay hay'adda caymintu ay qabto in aysan qasab ku ahayn bixinta megta ama aan la aqbalin taariikhda ay joogsatay megta naafada ku meel gaarka ahayd ama aysanba jirin naafo ku meel gaar ama diiday qaadashada dakhli ku meel gaar ah ama wax kasta oo hay'adda cayminta, wuxuu ku war gelinayaa isla hay'adda warqad diiwaan gashan oo leh rasiidka soo noqoshada ama warqad leh dib u soo noqosho inta lagu jiro muddo ka noqosho lahayn oo soddon beri ah, oo ka bilaabata helitaanka xiriirka uu soo gaaray sababaha uu ku diidayo ga'aanka hay'adda, isagoo sugayo, marka ay tahay arrintu naafo joogta ah, qiyaasta megta ay ahayd in la siiyo kuna soo lifaaqayo xaalad kasta codsiga caddeyn dhaqtar oo ay ku xusan yihiin wax kastoo u qalanta qalmidda macluumaadka ogganshaha iyo qiimeynta si loo caddeeyo codsiga laftiisa,

Haddii aan la helin jawaab muddo afartan maamlmood, laga bilaabo taariikhda helida codsiga ku xusan farqada hore, ama hadii jawaabtu aan u muuqan mid lagu qanci karo, dhibbanaha, waxaa u ka oggolaan karaa caymiska xukunka hay'adaha garsoorka.

Haddii muddada faqradda labaad iyo sadaxaad ee qod.111aad la dhaafo iyadoo hay'adda caymisku aysan dhibbanaha siin war gelin laga filayay, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka faqradda hore.

## Qod. 114
## Codsiga Bixinta Megdhowga Dadka Badbaaday Diidmada Go'aanka hay'adda Cayminta

Haddii ay dhacdo in dhaawacu uu sababo geeri dadka badbaaday, iyadoo la raacayo qodobka 87aad, waa in ay ula yimaadaan hay'adda cayminta warqaaha iyo howlaha kale oo caddeynayo xuquuqdooda. Hay'adda caymintu waa hubineysaa megdhowga kiiska sida uu qabo sharcigaan, waxayna ku dhaqaaqeysaa bixinta macaashka ku xusan qodobka 87aad, iyadoo war gelinaysa darafyada badbaaday muddo soddon maalmood oo ka bilaabata goorta laga helay warqadaha iyo howlaha kale ee horay loo soo sheegay.

Marka dhimashadu ku timaad sababta shilka ka dib, markii la bixiyo megdhowga naafada joogtada ama weli socoto howsha bixinta nooc kasta oo gunno, dadkii badbaaday inta xaqooda leh waa heli karaan megdhowga qiyaasta iyo habka loogu jideeyay qodobka 87aad, waxayna bixinayaan inta ku qoran waraaqaha iyo howlaha kale oo caddeyneysay xuquuqdooda la soo jideeyay, lana raacinayo ciqaab ganaax muddo soddan maalmood gudahood ah oo ka bilaabata taariikhda geerida.

Hadddii uu dhinto qof dhaawacmay inta lagu jiray bixinta megta naafada ku meel gaarka ama bixinta hawlgabka naafo joogta ah ama inta lagu guda jiray howsha maamulka ee liiltirka dakhliga caymiska. Haddii ay sooo baxdo kuwa ka badbaaday dhaawaca aan loo sheegi dhimashada, isla marka uu ogaado, waa in la ogeysiiyaa dhimashadaas badbaadeyaasha, saameynta codsi kasta faqrada hore. Xaalad kasta erayga lagu tilmaamayo faqrada kore waqtigeedu, wuxuu ka bilaabmayaa maalinta kuwa badbaaday ay ogaadeen geerida.

Dakhliga dadka badbaaday, wuxuu ka bilaabanayaa maalinta geerida ku xigta. Haddii ay dhacdo in caymisku diido in ay bixiso megta ama soo baxo khilaaf qiyaasta cadadka, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka uu qabo qod. 113aad ee sharcigaan.

## Qod. 115
## Bixinta Howl Gabka Badbaadeyaasha Xalad Markabkoodi Quusay

Haddii markab lumo ama loo qaadan karo in uu lumay sida uu qabo nidaamka lagu dhaqo badmaaxinta maalinta la qiyaasta ama tilmaamaha wararkii ugu dambeeyay markabka,

lix biloodna laga gudbo, iyadoo aan wax war ah oo lagu kalsoonaan karana laga helin ama qof ka mid ahaa shaqaalaha, kuwa xaqooda leh waa heli karaan howlgabka dhimashada, sida uu qabo qod. 87aad.

Muddo sanad ah, sida ku xusan qod. 130aad, ayuu ku dhacayaa si aad u hesho megta oo ka bilaabata maalinta dhicidaas muddo lix bilood ka dib ah.

Haddii uu soo noqdo qofkii in la waayay la mooday ama laga helay war sugan, hay'adda caymisku waa joojinaysaa bixinta dakhliga howlgabka, iyadoo ku saleynayso helitaanka cawaaqibka shilka oo leh xiriir nidaamsan oo kadhexeeya hay'adda caymiska iyo kuwa qaatay lacagaha megdhowga iyo qofkii la mooday in uu lumay.

**Qod. 116**
**Tijaabinta ka Hortag Habraaca Nidaamka Maamul sida Shuruuda u ah Habraaca Talaabo Sharci**

Dacwadaha la isaga soo horjeedo, waxaa lagu dhisi karaa oo kali ah marka ay dhamaadaan dhamaan dhaqamada ku qoran sharcigaan ee ku saabasan howlgabka megdhow maamul.

Mudda dhaca ku qoran qod.130aad waa la hakinaa inta lagu guda jiro bixinta howlgabka megdhow. Megdhowgaas si kastaba ha ahaatee, waa in uu ku dhammaadaa boqol maalmood gudahood oo ka bilaabato maalinta la helay warqadda dhakhtarka oo sheegeyso natiijada joogtada ee dhaawaca ama geerida dhibbanaha, nidaamka dacwadeedka ku xusan qod. 113aad waa boqoliyosodon maalmood habka lagu xusay qod. 85aad.

Haddii laga gudbo waqtiga ku xusan faqrada hore oo aan la bixin howlgabka megdhowga, daneeyuhu, wuxuu xaq u leeyahay in uu tallaab dacwo oogid ku dhaqaaqo.

**Qod. 117**
**Garsoorka Maxkamadda**

Garsoorka maxkamadda ee logu raadinayo dhaqaale adeeg oo sharcigaani oggol yahay laguna dhaqo qodobbada 459 ilaa 466 ee xeerka habka madaniga, kuwaas oo lagu dejiyay xeerar lagu xallinayo khilaafaadka badbaadada bulshada iyo kaalmada qasabka ah.

**Qod. 118**
**Xukunka Dhinacyada ee Bixinta Khrajyada iyo Khasaarooyinka Hab Dacwadeedka**

Ujeeddada hab raaca qodobbada 91, 92 iyo 96 ee xeerka habka madaniga khilaafaadka ku saabasan bixinta howl gabka megdhow, garsooruhu waa qiyaasi wadarta karaa gunooyinka loo cayimayo marka la barbar dhigo inta uu soo codsaday dhibbanuhu iyo inta hay'adda caymisku u balan qaadday.

## CINWAANKA 7AAD
Qodobbada u Khaaska ah Cudurrada Xirfadaha

**Qod. 119**
**Ku Dhaqidda Cudurrada Xirfadaha Shuruudaha ku Saabsan Shilalka Shaqo**

Cudurrada xirfadaha, waxaa lagu dhaqa qodobbada ku saabasan shilalka shaqo (54 s), marka laga reebo qodobbo khaas ah ee cinwaankaan.

**Qod. 120**
**Laga Saaro ilaalinta Dhibaatooyinka aan wax Xiriir Tooska ah la lahayn Cudurada Xirfadaha**

Waa laga reebayaa ilaalinta badbaadinta caymiska ka dhanka ah cudurrada xirfadaha cawaaqibka aan sida tooska ah ugu xirnayn cuduradaas iyaga ah (6/4), iyadoo loola jeedo

cawaaqibkaas oo aan lahayn dabeecad shaqo, balse ka mid noqonaya cudurrada xirfadaha, iyadoo aysan jirin wax xiriir ah oo ka dhaxeeya oo isku xir keena.

**Qod. 121**
**Xaq u Lahaanshada Lacagta Cudurrada Xirfadaha oo Dhalata ka dib Markii laga tegay Shaqada jilicsan; Dibna uga Dhacay Waqtiga**

Waxqbadka cudurada xirfadaaha waa in la bixiyaa xitaa; marka caynsanuhu joojiyo wax qabadka shaqo ee waajibinaysay xuquuqda faa'idooyinka, ilaa inta naafonimada ama dhimasho ku yimaad iyo cudur kasta oo ku dhaca inta lagu guda jiro waqtiga ku xusan shaxda lifaaqa lam.3.

Bixinta waxqabadku sidoo kale waa jiraysaa, haddii ay dhacdo in dib loo soo celiyo cudur horay megtiisa loo bixiyay ama la raacay shuruudaha nidaamka sharcigaan. Haddii dib u dhacaasi yimaad waqti aan dhaafsanayn muddo seddax sano ah marka ay joogsatay waxqabadka howsha sababayana cudurku.

Saameynta faqradda hore, cudurka ka dhalan kara megdhaw, waxaa loola jeedaa, midka soo ifbaxay kaddib markii uu dhaqangalay nidaamka caymiska qasabka ah faqraddiisa labaad ee qodobka 9aad.

**Qod. 122**
**Taariikhda uu soo Dibad Baxay Cudurka Xirfaddu**

Soo ifbaxa cudurka xirfadaha, waxaa la tixgeliyaa maalinta hore ee qofku shaqada u joojiyo sabab cudur. Haddii cudurku ka joojin shaqada ama ka dib soo baxaan in caynsanuhu joojiyo shaqadii uu ka shaqeynayay cudurkuna sababay, soo ifbaxa cudurka xirfadaha, waxaa loo qadanayaa in uu rumoobay maalinta loo keeno hay'adda caymiska ka cabashada oo ay la socoto warqad dhakhtar.

**Qod. 123**
**Kala Sareynta Dhibka. Bixinta Megdhowga loo Maleeyo Naafo Macquul ah oo ka Dhalatay Dhaawac iyo Cudurrada Xirafadaha**

Kala sarreynta dhibkana cudurrada xirafadaha dhakhtarna qiimyen ahna xaqiijiyay. Qod.82aad, waxaa lagu dhaqayaa xitaa naafada guud oo qeybtoodu ku timid dhaawac shaqo iyo qeybta kalana cudurrada xirafadaha.

**Qod. 124**
**Dib u Eegista Qiyaasta Megta Naafada Cudurada Xirfadaha**

Qiyaasta megta naafada cudurrada xirfadaha, waxaa dib u eegid loogu sameyn karaa codsiga qofka iska leh megta ama nidaam u degsan hay'adda caymiska, marka dhimis ama kor dhin lagu sameynayo dhabeecada shaqada iyo guud ahaan, ka dib marka la beddelo xaaladaha jireed ee qofka xaqa u leh megta ilaa iyo inta xaaladdu ka sii dareyso kana timaad cudurrada xirfadaha oo dhaliyay in la bixiyo megta. Megta bixinteeda waa la joojinayaa, marka malooyinkii naafo ay ka hoos marto naafada ugu yar oo meg laga bixiyo.

Codsiga dib u eegidda waa in loo soo bandhigaa hay'adda caymiska, iyadoo ay ku lifaaqan tahay warqaada dhakhtareed oo ay ka muuqato dhamaan waxyaabaha tilmaamayo ujeeddada fal iyo farsamana awood u leh in ay muujiyaan in ay sii xumaadeen dhibaatooyinku cudurrada xirfadaha kana muuqdaan qiyaasta cusub ee dhimista dhabeecadda shaqo.

Codsiga hore hay'adda caymisku waa ku qasab in ay ku dhawaaqdo go'aankeeda lixdan maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta la soo gaarsiiyay codsiga.

Haddii hay'adda caymisku ay diiddo in ay ka qaadato codsiga dhamaanti ama qeyb ka mid ah ama caynsanuhu uusan oggolaan dhimidda ama qaadashada gunnada megta, khilaafaadka la xiriira, waxaa lagu dhaqaa nidaamka qod.113aad.

Mulkilaha megtu ma diidi karo la kulanka kormeerka loo diyaariyay, sida ku qoran ujeeddada qodobkaan, hay'adda cayminta, iyadoo u direyso Cusbitaal ama goob kale caafimaad. Haddii uu diido hay'adda caymisku waa hakin kartaa dhammaan ama qeyb bixinta megta. Dib u eegista ugu horeysa waa la codsan karaa ama dib loo diyaariyo marka laga gudbo lix bilood goorta la hakiyay megta naafo ee ku meel gaar, ama ay san jirin naafo, ka dib markay dhaafto hal sano oggaanshaha cudurka shaqo. Mid kasta oo ka mid ah dib u eegista soo socota ma la codsan karo waqti sanad ka yar kii hore, laakiin halka ugu dambeysa, waxay dhici kartaa oo kali ah in isbeddel lagu sameeyo shaniyotoban sanad ka dib laga bilaabo taariikhda megta.

Codsiga la xirrira dib eegista dambe waa in la soo jeediyaa, iyadoo la raacayo ciqaabta ganaax muddo aan ka badnayn hal sano laga billaabo dhammaadka muddada dhaca shaniyotoban sano sida ku xusan faqrada hore.

Shaniyotoban sano gudahood ee cudurka shaqadu soo ban baxo, haddii shuruudaha caynsanaha la caddeeyo in uu bogsaday isagoo aan naafo joogto ahayn ama ay jirto naafo aan gaareyn kuwa ugu hooseeyo ee laga bixiyo gunnada howl gabka. Haddii ay ka sii darto natiijada cudurka xirfadu ayna gaarto xad megdhow, caynsanuhu waa weydiisan karaa hay'adda cayminta bixinta megdhowga isagoo u qaabeynaya warsiga siyaabaha iyo shuruudaha loogu talo galay dib u eegista megdhowga marka xaalada cudurku xun tahay.

## Qod. 125
## Furashada Dakhliga ka soo Kabashada Shaqada oo Heerka Naafadoodu ka Sareyn Boqolkiiba Labaatan

Kuwa leh dakhliga megta cudurrada xirfadaha ee naafo joogta ah qaabkooduna go'aan yahay kana sareyn boqolkiiba labaatan, waxaa qiyaar loo siiyay in ay weydiistan hay'adda cayminta sanad gudahiis laga bilaabo taariikhda dhicitaanka shaniyotoban sano oo ka bilaabata taariikhda megdhowga bixinta, si loo baabi'iyo xuquuq kasta oo la xiriirta, wadar lacageed oo la siman qiimaha raasumaalka dheeraadka dakhliga aad fileysay.

Qiimaha raasumaalka dakhliga, waxaa saldhig ahaan laga xisaabiyaa miisaska ku tilmaaman faqradda dambe ee qod.15aad, iyadoo la raacayo taariikhda soo gudbinta codsiga, waxaana laga jaraya qeybihii megta ee taariikhda ugu dambeysay la bixiyay.

Saameynta xisaabinta howlgabka ee faqrada hore, haddii aysan la hubin da'da dhabta ah ee dakhliga soo gala, waxaa loo raacayaa sida ku xusan faqrada dambe ee qod. 83aad.

## Qod. 126
## Baahi ka Tegid Shaqooyinka Fufud

Marka khilaafaadka naafanimada shaqo tahay joogto uu sababay cudurada xirfadaha, haddii heerkeedu yahay naafo, waxaa laga dhimi kara ka tegid joogta ah ama ku meel gaar ah, laga soo bilaabo shaqeynta saameyna ku yeelata laylinta kuwaas cudurka ayaa qandras iyo deyn bixiyuhu ma doonayo joojinta shaqada, megdhowgu, wuxuu u dhigmayaa heerka hoose ee naafo oo loo maleyn karo deynta, waxay keeni doontaa in si joogto ah ama ku meelgaar ah looga tago shaqadaas kor ku xusan. Khilaafaad kasta oo ku saabasan qodobbada ay ansaxisay hay'adda cayminta, iyadoo fulineyso faqrada hore, waxaa go'aminaya guddi dhex dhexaadin si waafaqsan habka ku xusan qod. 100aad. Guddigu, waxay cadeynayaan qiyaasta laga dhimayo dakhliga megta.

## Qod. 127
## Hay'adda Caymintu, Waxay xaq u Leedahay in ay Aragto Qoraallada Aragtiyada Xilliyo ee Dhakhaatiirta

Hay'adda caymintu waa arki kartaa qoraallada la xiriira aragtiyada dhakhaatiirta horesay ee xilliyada sida uu qoray nidaamka loo dejiyay, haddii ay ku saleysan tahay

natiijooyinkii ka soo baxay aragtida horay loo xusay in la hubiyo, in shaqaale ku lug leh shaqo adag in la geliyo caymis qasab ah, jiritaanka astaamaha mid ka mid ah calaamadaha silica ee ku cad shaxda ku lifaaqan lambarka 3, loo shaqeeyeyaashu, waxay ku qasban yihiin in ay war geliyaan hay'adda cayminka, haddi aysan jirin wax cabasho ah sida uu qabo qod. 54aad.

**Qod. 128**
**Waa ku Waajib Dhakhaatiirtu in ay soo Sheegaan Cudurada Shaqada**

Dhakhtar kasta oo garta in uu jiro cudur shaqo waa ku qasab in u soo sheego agaasinka guud ee caymiska bulshada ee Soomaalida, kaas oo nuqul u dirayo wasaaradda caafimaadka.

Dadka ku xadgudbo nidaamka farqadda hore, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan sh.so. 50 ilaa sh.so. 300 boqol.

**Qod. 129**
**Loo Shaqeeyeyaasha, waxaa Waajib ku ah in ay soo Sheegaan Hababka Xaaladoodu Fududahay**

Loo shaqeeyeyaasha horay u lahaan jiray caymiska shilalka shaqo waa in ay soo sameeyaan cabasho sida ku xusan faqradda hore muddo saddex bilood ah taariikhda uu daqan galay sharcigaan.

Loo shaqeeyeyaasha, waxaa looga baahan yahay in ay ku qoraan diiwaanka lamabarrada loogu talo galay dadka ku jira caymiska, shaqooyinka fudud taariikhda bilowga iyo joojinta muddooyinkaas ay dadkaas u isticmaalan isla shaqadaas.

Dadka ku xad gudba nidaamka qodobkaan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax sh.so. 200 ama sh.so. 600.

## CINWAANKA 8AAD

Xeerarka Guud, ku meel Gaarka iyo ka ugu Dambeeya

**Qod. 130**
**Muddo Dhaca Falka**

Tallaabada lagu soo dhacsado xuquuqda adeegyada ku tilmaaman sharcigan, waxay ku dhacayan shuruudihiisu muddo hal sano ah oo ka bilaabatay maalinta shilku dhacay (55) ama goorta ay soo muuqdaan cudurrada shaqadu (122).

Tallaabada aad lagu urursan karo abaalgudka caymiska guud ahaan ay leeyihiin loo shaqeeyaashu hay'adda caymiska, wuxuu ku dhacayaa hal sano gudaheed oo ka bilaabata maalinta la sugay abaal marinta oo in la dhiibo ahayd bixinteeda (19, 22).

Hubinta dhanka hay'adda caymiska abaalmarinnada caymiska qaderka ay bixiyaan loo shaqeeyeyaashu, waxay ku xaddidan tahay sanadka la sameeyay qiimeynta iyo afarta ka horeysa, iyadoo ay sideeda u jirayan xuquq kasta ee hay'addaas sanadihii ka horeyay.

Taallabada ay xaqa ugu leedahay hay'adda caymisku loo shaqeeyeyaasha iyo caynsanahaba sharcigaana hoos yimaad, waxaa loo adeegsan karaa si madax banana fal ciqaabeed, marka laga reebo xaaladaha ku sugan qodobbada 15aad iyo 16aad.

Xukunka madaniga ah ee ku xusan qodobka 16aad ma la dhaqan gelin karo saddex sano ka dib oo xukunka ciqaabta uu sheego in aan la sii wadin sababaha lagu caddeeyey isla qodobkaas. Tallaabta fal celinta ee ku xusan qod. 16aad, waxay ku dhacaysaa si kastaba ha noqotee muddo saddex sano ah oo ka bilaabata maalinta xukunka ciqaabtu uu noqdo mid aan laga noqon karin.

**Qod. 131**
**Hay'adda Caymiska**

Sida uu qabo sharcigaan howl caymis, waxaa qabta sanduuqa caymiska bulshada Soomaaliyeed.

**Qod. 132**
**Xilka Dowladda**

Xilka dowladda iyo shirkadaha dowladda ee caymiska madaxa bannan si loogu daboolo dhaawacyada shilalka shaqo ee shaqaalahooda waa in ay ku jirta ku talo galka caadiga ah miisaaniyadda dowladda ee sanadle.

Shaqaalaha dowladda oo ku qasban caymiska sharciganu dhigayo oo la ildaran hoos u dhac awooddooda waxqabad shilal ku soo gaaray fulinta adeeggooda ama xaalado la xiriira nooca adeegga, ama badbaadayaasha xaqa u leh (87), haddii uu geeriyoodo shaqaaluhu sababaha dhaawac ee hore waa lagu qasban yahay in la kala dooronsiiyo inta u dhaxaysa kororka ku-daahidda dhammaadka adeegga iyo hab maamulka dowladda ee ku xusan qodobbada 5, 8 iyo 9 sharciga lambarkiisu yahay 5 ee 31 Disember 1969 ee dhahayo megta ee Keydka Caymiska Bulshada Soomaaliyeed uu ka bixinayo dhacdo sababtay dhaawac ama dhimasho shil shaqo ama cudur shaqo oo megdhaw lagu muteysan karo, sida uu qabo sharcigan.

Haddii qofka shaqaalaha ah ama kuwa ka badbaaday,waxay xaq u leeyahay in loogu wareejiyo maamulka dowladda, markaas Keydka Caymisku, wuxuu ku wareejinayaa megdhowga uu bixinayo Keydka maal gelinta hawlgabka sida uu qabo qod.4aad ee sharciga lambarkiisu yahay 5 ee 31 Disember 1969, lacagaha ay bixiso Keydka Caymiska Bulshada ee Soomaaliyeed waxay ka dhigan tahay metelaadda raasumaalka dakhliga magdhowga ay bixisay laguna xisaabiya, iyadoo lagu saleynayo jadwalka faqrada ugu dambeeysa qod.15aad ee sharcigaan.

**Qod. 133**
**Xilka Maareynta keydka Caymiska Bulshada ee Soomaaliyeed**

Keydka caymiska bulshada Soomaliyeed, waxay bixisaa adeegga maareynta caymiska shilalka shaqo iyo cudurrada shaqo sida waafaqsan nidaamka sharcigan.

**Qod. 134**
**Daboolidda Kharajyada Waaweyn**

Si loogu daboolo khidmadaha waawey ee ka soo jeeda keydka caymiska bulshada ee Soomaaliya, sharcigaan ayaa lagu dhaqayaa illaa inta laga soo saarayo heer kale oo cusub dhaqangalna uu ka noqdo. Abaal-marinnada kale ee lagu tixgelinayo caynsanaanta kharashaadka weynaantiisa horay loo soo sheegay, iyadoo lagu sii daray lacag dheeri ah abaalmarinta caymiska shilalka iyo cudurrada shaqo ee la go'aamiyey, marka la eego saameynta baahida, markaana uu amar ku bixiyo wasiirka wasaaradda caafimaadka qadder lacageed oo aan ka badnayn boqolkiiba labaatan.

**Qod. 135**
**Hoos-u-dhigga Ciqaabaha loo Shaqeeyeyaasha aan ka soo Bixin Waajibaadka lagu soo Rogay**

Tallaabooyinka ciqaabta maamulka ee dul saaraan loo shaqeeyaha gudan waaya waajibaadka sharcigaan sheegay waa surogal in la gaarsiiyo xadkooda derejada ugu sareyso ee nidaamku jideeyay, iyadoo lagu saleynayo astaamaha iyo dabeecadaha guud ay wax ku go'aamiyaan xubnaha hay'adaha caymiska iyo arrimaha bulshada Soomaaliya.

Marka la go'aaminayo astaamaha ku xusan faqradda hore waa in xisaabta lagu daraa halista gudasho la'aanta waajibka, waxaana la eegayaa duruufaha dhabta ah oo ay ku dhacday, iyadoo si gaar ah loo tixgelinayo niyad samida wanaagsan, guud ahaan dhacdada lama filaanka iyo joogteynta gudasho la'aanta.

Hoos u dhigista ciqaabta waa in ay ahaato mar kasta mid cad sababteedu ku xiran agaasimaha guud ee keydka caymiska, isagoo ka wakiil ah loo shaqeeyaha daneynaya.

**Qod. 136**
**Ganaaxyada u Gefidda Sharcigan**

Loo-shaqeeyayaasha ku gefa sharcigan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ah sh.so. 100 ama sh.so.1000, marka laga reebo kiisaska ciqaabtooda si gaar ah sharcigaani ugu sheegay qod. 21, 23, 25, 55, 106,129-129.

**Qod. 137**
**Miisaaniyadda Khaaska ah ee Shilalka**

Lacagta lagu soo ururiyo habka ganaaxa ee sharcigan, waxaa loogu daneeyaa in loogu shubo miisaaniyadda khaaska ah ee shilalka oo ka aasaasan Bangiga Dhexe Qaranka Soomaaliaya, maamulana wasiirka caafimaadka.

Miisaaniyadda ku xusan faqrada hore, wasiirka Caafimaadka ee dawladda ayaa u adeegsan kara lacagtaas;

a) Si loogu kabo, marka ay jiraan kiisaska xaqiiq ahaan u qalmaan in la caawino, shaqaalaha sida xun ugu dhaawacmo shaqada aan ku xusnayn cinwaanka koowaad ee sharcigaan.

b) Si loogu kabo, marka ay jiraan kiisaska xaqiiqda ahaan in la caawiyo waalidiinta (34-37 X.M.; 159 X. Qooyska) dhibbanaha shilka shaqada ku dhintay oo aan ku jiirin kuwa xaqa u leh sida ku xusan qod. 87, horana ugu dul noolaa kuwa shilka galay.

c) Si ay ugu kabtaan hay'adaha ujeeddadoodu tahay quudinta iyo waxbarashada agoonta dhibaneyaasha ku dhintay shaqada iyo caawimaadda guud ahaan dadka shilka galay.

d) Si uu gacan uga geysato hormarinta iyo barashada shilalka nidaamkooda caafimaadka bulshada guud ahaan.

**Qod. 138**
**Canshuur Dhaafka**

Ma la saari karo waajibaad dulsar ama qiime diiwaan gelinta iyo dhammaan nooc kasta ee xuquuqda adeeg canshuureedka garsoor dhammaan nidaamyada dacwo ha ahaadeen mid maamul ama garsoor, talaabooyinka dabeecad kasta hayeeshene oo ay soo saarto madaxda garsoor, iyo sidoo kale dhammaan falalka, qoraallada iyo waraaqaha ay soo saareen dhinacyada arrin khilaaf oo ku xiran sharcigaan, waxaa ka dhalanaya waajibaad u dhexeeya kuwa dhaawacmay, xaqooda leh, caymiska iyo dadka ku qasbanaa waajibaadka caymiska.

Sidoo kale waajibaadka shaambiga (bollo) waa ka reeban yihiin iyo adeegga diiwaan gelinta ee ku xusan sharcigaan, sidoo kale xitaa hawlaha la xiriira bixinta lacagaha magdhowga iyo dakhliga magdhowgaba, kama baxsana hababka qoraalada ah, shahaadooyinka, hawlaha wax u kala qoridda iyo waraaqaha kale oo muhiimka ah sida waafaqsan sharcigaan.

Dhammaan hawlaha iyo heshiisyada la xiriira maamulka keydka Caymiska bulshada Soomaaliya iyo kuwa loo qoondeeyay in loogu adeegsado dantooda miisaaniyad ahaan, deeqaha loo ballariyay ku daryeelka danahiisa waa ka reeban tahay waajibaadka canshuur, adeegga diiwaan gelinta iyo rahanka.

Daawooyinka, qalabka caafimaadka, agabka si toos ah dibadda looga keenay ama keydku ka iibshay dekedda si loo fuliyo ujeeddooyinka bulshadeed iyo daryeel samafal, sidoo

kale waa ka reeban yihiin in laga bixiyo canshuurta ku waajibaadka soo dejintooda, xuquuqaha maamul iyo tirakooba ee isla dekeddaas iyo xuquqaha kale ee dheeriga ah, dheeriga ku jirta qoondada miisaaniyada iyo manfacyada sanadlaha ah ee sanduuqa iyaguna waa ka reeban yihiin canshuur celinta.

## Qod. 139
## Dhaqan Galka Qodobbada ku Saabsan Caymiska Shilalka ka Dhaca Shaqooyinka iyo Cudurrada Shaqooyinka ee kuwa ku lug leh Badmaaxiinta Maraakiibta iyo Kallumeysatada Badda

Qodobbada sharcigan sidoo kale waxay khuseeyaan shaqaalaha badmaaxiinta ah iyo kallumeysatada badda, haddii ay san jirin in sharci gaar ah si kale u dhigo ee ku jirta isla sharcigaas.

Qodobbada sharcigaan laguma dhaqi karo ciidamada qalabka sida iyo kuwii u habeysan qaab ciidan.

## Qod. 140
## Feejignaanta Dhaqanka Nidaamka ku Saabasan Caymiska ka hor tagga Shilalka Shaqada iyo Cudur Xirfadeedka

Feejignaanta ku dhaqanka nidaamka sharcigaan, waxaa fuliya wasiirka caafimaadka. Marka la tixgeliyo marin biyoodka iyo kalluumeysiga badda feejignaanta, waxaa fuliya masuuliyiinta badda ee dowlad-goboleedyada ama xafiisyada qunsuliyadaha dibedda. Hay'adaha kor ku xusan, waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan dejinta shixnadda markabka, marka ay u la muuqato in qodobbada lagu tilmaamayo farqada koowaad aan la tix gelin. Gaadiidka badda shixnadahooda waa in la diido, haddii ay ka maagsandaan gebi ahaan qeyb abaal marinta caymiska.

## Qod. 141
## Fasiraadda

Ujeeddada turjumidda sharcigan qoraalkiisu waa Italyani.

## Qod. 142
## Dhaqan Galka Nidaamyadaan; Joojinta Caadooyinka ka soo Horjeeda

Sharcigani, wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu daabaco faafintiisa rasmiga ah midda xigta laguna howlgalayo 1 Disembar 1972, waxaana lagu dari doonaa ururinta rasmiga ah ee sharciyada iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waajibna ku ah qof kasta in uu ilaaliyo ilaalintiisa. laga soo bilaabo taariikhda kor ku xusan, waxaa la tirtiray dhammaan nidaamyada ka soo horjeeda sharcigaan.